# TAARIIKHDA SOOMAALIYA

## FASALKA SADDEXAAD

## 3

## DUGSIGA SARE

ismailpages.wordpress.com
ISMAIL DIGITAL LIBRARY

**Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta**
**Xafiiska Manaahijta**

**Waxaa lagu daabacay**
**Madbacadda Qaranka**
**Xamar, 1976.**

# HORDHAC

Buugga waxa loogu talagalay Fasalka Saddexaad ee dugsiga Sare. Tusmada buugga waxa si guud ugu dhan Taariikhda Soomaalida, laga bilaabo waayihii hore illaa iyo maanta. Si aan dhibyarayn ayaa looga urursha v bulshada Casharadan ku tusan buugga. Haddiiba wax laga tagay ama arrimo aan la xiriirin buuggan ay ku muuqato, mar naba mid kas ah may aha. Barahana waxa la farayaa in uu isku dayo hadba sidii uu si xiiso leh Casharada ugu gudbin lahaa ardayda. Sidaa darteed macluumaadkiisa waa in aanay ku ekaan inta buugga ku taal.

Waxa mahad loo naqayaa Cabdiraxmaan Carta Qaalib. Caasha Xaaji Xaashi. iyo Aamina Xaaji Aadan oo buuggan qoray.

Mahad kale waxa leh iyana farsamayaqaanada Madbacada Qaranka oo daabacaada buuggan hirgeliyey

Maamulka Xafiiska Manaahijta

Cabdiraxmaan Timir Cali

## TUSMO BUUGGA


| | | Bogga |
|---|---|---|
| 1. | Hordhac | |
| 2. | Taariikhdii hore ee Soomaalida . . . | 1 |
| 3. | Xidhiidhka Soomaaliya iyo dhulka dibadda ah . . . . . . . . . . | 4 |
| 5. | Saylac 1402 . . . . . . . | 6 |
| 6. | Imaatinkii Cismaaniyiinta iyo Boortoqiiska ay yimaadeen badda Cas . . . . | 8 |
| 7. | Boqortooyadii Itoobiya . . . . . | 9 |
| 10. | Itoobiya intii ka horreysay duulimaadka . | 10 |
| 11. | Duulimaadkii weynaa . . . . . | 12 |
| 12. | Taariikhda Soomaalida intii ka horreysay qaybintii Gumeysiga . . . . . | 16 |
| 13. | Kala boobkii dalka Soomaaliyeed . . | 18 |
| 14. | Soo gelitaankii dhinaca Waqooyi . . | 19 |
| 15. | Soo gelitaankii Gobollada Koonfureed . . | 22 |
| 16. | Qabsashadii Itoobiya ee Galbeed . . . | 24 |
| 17. | Dhalashadii Kacaanka Gobannimadoonka ah . . . . . . . . | 27 |
| 18. | Soomaalida Woqooyi ee Ingiriisku gumeysay . . . . . . . . . . | 28 |

19. EN-EF-DHII . . . . . . . . . 33
20. Xeebta Soomaalida ee Faransiiska . . . 34
21. Soomaalida Talyaanigu gumeysto . . . . 35
22. Soomaalida Galbeed . . . . . . . 27
23. Dagaalkii Dunida ee Labaad iyo Raad Reeb-kii uu ku yeeshay Geeska . . . . . . 39
24. Dhismihii maamulka gumeystaha iyo horis-taaggii dadweynaha Soomaaliyeed . . . 41
25. Halgankii N. F. D. iyo Jubaland . . . 42
26. Halgankii Soomaalida Talyaanigu gumeysto 43
27. Lafoole . . . . . . . . . . 41
28. Halgankii SH. Faraj . . . . . . 45
29. Qabsashadii Boqortooyadii Hobyo iyo Calu-ula . . . . . . . . . . . 48
30. Kacaankii Sayid Maxamed Cabdille Xasan 53
31. Dhismihii maamulka gumeysiga iyo waxyee-looyinkiisii . . . . . . . . 61
32. Taariikhda Ummadda Soomaaliyeed: Hal-gankii Gobannimadoonka . . . . . . 68
33. Dagaalkii Labaad ee Adduunka . . . . 69

**HORUMARKII BILOWGA DHAQDHAQAAQA SIYAASADEED:**


34. Dalkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku gumaysan jiray . . . . . . . . . . 72

35. Marikii Gobannimodoonka: Soomaalida uu Ingiriisku gumeysan jiray «British Soomaaliland» . . . . . . . . . . 76

36. Gobannimo iyo israac . . . . . . . . 84

37. Gobannimada intii ka danbeysay 1960-69: Turunturooyinkii gobannimada . . . 88

38. Soomaaliya iyo Siyaasaddii Dibadda 1960-69 93

39. Weerarkii Itoobiya iyo Soomaaliya . . . 95

40. Dhalashadii Kacaanka . . . . . . . . 97

41. Siyaasadda Dibedda . . . . . . . 108

42. Mucaahadooyin ay kala saxeexdeen Ingiriiska iyo madaxdii dalka Soomaaliyeed ee Gobollada Woqooyi: Juulay, 14dii 1884 — 16kii Juulay, 1884kii. 3dii Diisambar, 1884kii. 13kii Jeenawary, 1884kii. . . . . . . 117

43. Shirkii guud ee Soomaalida: 1dii Jeenawary, 1945kii . . . . . . . . . 118

44. GABAY: Arligaa la kala boobay (Faarax Nuuur) . . . . . . . . . . . . 124

45. Ismaaciil Mire iyo hashiisii Markab . . . 126

46. CALANKA: (Cabdillaahi Suldaan) . . . . 128

47. GABAY: Maandeeq (Qaasim, 1960) . . 131
48. GEERAAR GUUBAABO AH: (Xasan Kayd Cabdulle «Walanwal» . . . . . . . 133

49. Heshiiskii dhexmaray Shirkadda Imberyaaliyadda Ingiriiska ee Afrika Bari iyo Dowladda Talyaaniga . . . . . . . . 135

## SAWIRADA BUUGGA LA XIDHIIDA

1. Xaaji Faarax Omaar . . . . . . . 29

2. b. Qalcadda Taleex oo kor laga sawiray;
t. Qalcadda Taleex oo gudaha laga sawiray 54

3. Carruur, Ciiroole, rag iyo dumar ka qayb qaadanaya «Iskaa wax-u-Qabso» . . . . . 100

4. Ololaha ciribtirka wax Akhris la'aanta iyo wax Qoris la'aanta . . . . . . . 105

5. Shirkii saddexaad ee Dawladaha Islaamka ah 109

# TAARIIKHDII HORE EE SOOMAALIDA

Ardaygu waa in uu xusuus u yeesho in adduunka ummad kasta oo ku nooli ay leedahay sooyaal. Waxa kale oo jirta in ummad kasta oo ku faanta taariikh dheer hiddo asal ah, iyo ilbax nimo qoto dheerba in aan taariikhdeedu ahayn mid go'doon ah oo ka sidkan taariikhda adduunweynaha. Aadamigu intuu adduunka Uumanaaba wuxu hadh iyo habeen ku dedaalayey in aqoon uu isweydaarsado, garashadiisuna korodho. Innaka oo taa xusuus u leh ayaynu bilaabaynaa sooyaalkii dhul keena; fiirana siinaynaa dadyowgii taariikhdu isku keen xidhay.

## DHULKA BUNT.

Bunt waxa ay u yaqaaneen masaaridii hore xeebta badda Cas ee dhulka Soomaaliyeed. Masaaridii horena waxay aqoonsanaayeen in ay dhulkaas Bunt ka yimaadeen. Afartii oday ee ay boqorradii ka soo farcamay Buntbay ku abtirsan jireen waxa taariikhdooda qoray (Manetho) maneso. Waxayna Masar xukumi jireen waqtigii, Mana waqti ka horreeyey. Mana wuxu ahaa Boqor Afrikaan ah oo boqortooyadiisuna dhaxaltooyo ku dhisnayd. Kuwaa Mana ka soo farcamayna waxay boqortooyada hayeen 1255 oo sanadood. Waxana lagu magacaabi jiray reer Hak. Markii la mideeyey dhulka Masar waqooyigiisa iyo Koonfurtiisana boqorrada Faraacinadu waxay ku bili jireen magacooda laqabka Hak. Magaalo madaxdooda waxa la odhan jiray Nekehen. Taas oo macnaheedu tahay magaaladii Hak. Culimada Arkiyoolojigu waxay ka heleen Masaaridii hore, tusaalooyin caddaynaya in boqorradii Masar ee hore ay ka soo farcameen dhulka loo yiqiin Bunt.

Masar iyo Bunt had iyo jeer waxa dhexmari jirey geddis ganacsi iyo dhaqan iswaydaarsi. Farta helogiorofiyadda la yidhaahdo waxay inoo muujinaysaa in Masaaridii hore ay u yaqiineen Soomaaliya, dhulkii uduga ama dhulkii eebayaasha, Astaamahaasu waxay ina tuusayaan sharafta iyo milgahaay Soomaaliya ka mudnayd wadan ka mid ah kuwa adduunka ugu taariikhda dheer. Waxa kale oo Masaaridu aqoonsanayd in buugooda diinta ee lagu magacaabo «Buuggii dhimashada uu ka faaloon jiray bunt. Buuggaasu wuxuu ballan ku qaadi jiray Janno iyo cadaabba. Adduunka meelaha lagu kaydiyo sooyaalka waxa laga helaa sanamadii Amen, Osaris Isiya oo ahaa eebbayaashii ay Masaaridu hore caabudi jireen, loo aqoonsanaa inay ku nool yihiin dhulka Bunt. Arrintaas waxaynu u soo qaadnay in aynu ogaanno in xidhiidh diineed ka dhexeeyay Masar iyo Bunt. Buugga «dhimashada» ayaana inoo caddeynaya.

Dadkii ku noolaa Masar iyo reer Bunt aad ayey isugu midab ekaayeen. Culumada antharoboolajiga iyo arkiyoolajigu way isku waafaqsanyihiin arrintaas. Waqtigii boqoradii Xatsabshuutna waxay Bunt iyo Masar isweydaarsan jireen booqashooyin dhaqan isweydaarsi.

Culumada ka baaraan degta Cilmiga loo yaqaan IJIBTOOLAJI oo ah kuwa darsa taariikhda Masaarida waxay rumaysan yihiin in Masaaridii hore ka soo duuleen Bunt oo sii mareen badda Cas oo ay u sii gudbeen ilaa ay geediga dhigeendheltaha Niilka.

Borofasoor «Naville» oo Faransiis ah oo qarnigii 19aad wax qori jiray iyo Jamis H. Breasted oo Jaamacadda Shikaago bare sare ka ihi waxay si weyn isugu raaceen in sooyaalka Masaaridii hore aan la baran karin, uuna kala dhantaalan yahay

haddaan dhulka Bunt aad loogu fiirsan. Waqtigii boqorradii xatshabsuutna shan Markab ayaa Masar ka yimi oo meelo badan oo dhulka soomaaliyeed ah soo maray. Meelaha waxa ka mid ahaa Muqdisho oo ah magaalooyinka da'da weyn ee dhulka soomaaliyeed. Nin qore ah oo Shiine ihi wuxuu weriyey in Muqdisho ay qayb weyn ka qaadatay ganacsigii ka dhexeeyey Shiinaha iyo xeebta Bariga Afrika. Wuxuu ku tilmaamay guryaha Muqdisho in ay ka samaysan yihiin dhagax. Magaalooyinka ku taxan xeebta bariga Afrika oo dhan waxa laga helay lacag ay leeyihiin Shiinuhu oo casriyo hore ah. Waxa kale oo laga helay meelaha xeebta u dhow wiciyad dhoobo ah oo dhulka Shiinaha laga keenay. Lacagtaa iyo wiciyadaasuba waxay ahayd tii la isticmaali jiray waqtigii boqortooyadii «Sung» iyo boqortooyadii «Ming».

## XIDHIIDHKA SOOMAALIYA IYO DHULKA DIBADDA AH.

Ibna Batuuta wuxuu sheegay in markuu Muqdisho yimi xi dhiidh ganacsi ay la lahaayeen reer Muqdisho Masar iyo Suuriya. Qaadiga magaaladana la odhan jiray al-mistiri in kastoo dhalashadiisu ahayd Somali. Lacagta marka lagu isticmaali jiray dhulkana heeso yar yari ay ku qornaayeen. Kow iyo toban nin oo somali ah oo isaga danbeeyey xukunka magaaladana lacagtoodu waxay lahayd astaantii Turkiga ee 1402. Waxaynu ogsoonahay in Turkiga uu Yemen qabsaday 1547, Masarna 1517. Astaanta ay Muqdisho lacagteedu ku dhigatay waxay inatusay saa madaxbannaanida ay Boortaqiiska ka madax bannaanayd, iyo gacaltooyada ay u haysay dowladda Turkiga ee Muslinka ah. Ilaa qarnigii koowaad Hindiya iyo Sayloon waxay la baayacmushtareen jireen Soomaaliya. Iyaga oo keeni jiray xariir' dhar iyo caleenta shaaha. Boqorrada Soomaalida, kulligoodba lacagtooda way samaysan jireen. Nin la odhan jiray Durate Barbosa wuxuu yimi Muqdisho qarnigii 16aad, waxa uuna la dhacay guryaheeda quruxda san iyo dhismaha masaajidaadeeda.

Dadkii Soomaaliyeed waxay la baayacmushtarayn jireen dadkii ku noolaa dhulka la yidhaahdo Falistiin. Waxa taa rumaynaya marka buugga baybalka la akhriyo qaybta la yidhaahdo heestii sulaymaan. «Who is this that comen the cut of the wilderness like pillars of smoke. Perfumed with myrh and frankincense with all the powers of the merchant». Udugaa laga keeno dhulka Bunt waxa reer Jurusulam ku ilaalin jireen qolgooni ah oo askari joogto. Buugga Biribilas wuxu sheegayaa in qorafal dhagoodku ahaa waxyaabaha ugu weyn Soomaaliya laga helo. Culumadii Giriigga ee diirtuna; geedkaas intay saliid-

ku daraan ayey isticmaali jireen. Marka laga bilaabo Qarnigii Koowaad ilaa kii 19aad waxaynu buugagga taariikhda ka helay-naa in niman badan oo Sahmiyeyaal ihi ama sooyaal qoreyaal koowaad ilaa kii 19aad waxaynu buugagga taariikhda ka helay-naa in niman badan oo Sahmiyeyaal ihi ama sooyaal qoreyaal ihi in ay yimaadeen xeebaha Soomaaliyeed aadna uga faaloo-deen taariikhda iyo magaalooyinka, dadkii geeska Afrika de-gaana. Waxa nimanka ka mid ah nin Giriig ah ee qoray «Bi-rilis». waxa kale oo nimanka ka mid ahaa Faasko di Gaama, Duate Barboso, Al yacqubi, Ibin Khaladuun, Ibna Hawkal, Al cumari, Ibin Saciid, Al-Idiriis, Ibin Batuuta iyo Dhame Owim.

Al Yacquubi 890-3 wuxuu ahaa nin Juquraafiga ku caan baxay buuggiisa la odhan jiray buuggii wadanada wuxuu ku amaanay dhaqanka iyo masaajidadda Saylac iyo Muqdisho si-day u qurux sanaayeen.

Ibna Saciidna wuxu la dhacay caddaaladda iyo garsoorni-mada ninkii Soomaaliyeed ee Saylac xukumayay waqtigaa isa-ga ah. Abul fida oo marka qorayay taariikhda Soomaalida wuxu ku dheeraaday dhalinta reer Saylac dharkoodii bilicda san iyo cayaarihii ay had iyo jeer isu jiibinjireen iyo weyjogoodii fa-raxdu ku dheehnayd. Ibna Saciid oo noolaa 1214-1288 wuxuu u qiray Soomaalidu inay yihiin kuwii diinta Islaamka geeska Afrika iyo agagaarkiisaba ku fidiyey. Ibna Batuuta wuxuu Muq-disho yimi 1331, wuxu sheegay in magaalada uu xukumi jiray nin Soomaaliyeed oo aad u yiqiin afka Carabiga iyo ka Soomaa-ligaba. Wuxuu kaloo uu sheegay qoraaga weyni in Muqdisho lagu samayn jiray dhar aad u xiisan oo loo diri jiray Masar.

Al Cumari oo qarnigii 14aad qore ahaa wuxu sheegay in Berberi ay ahayd Marso weyn oo maraakiib badani ku soo xidha to baroosinka. Dadka waddanka degganina ay lahaayeen mi-

dab madaw oo wedhwidhaya, idohoodna ay madax madoobaayeen; badhi balaaranna ay lahaayeen. Warkaa waxa laga helayaa buugga la yidhaahdo «Rixila I-1958.

Ibna Batuuta wuxuu marna ilaawi kariwaayey dadka eeba ka cabsigoodii, diin jaceelkoodii, masaajidadoodii iyo dhaqan wanaagoodii ku taxnaa ilbaxnimo qoto dheer iyo ilbaxnimo dhalad ah. Ibna Batuuta wuxu sheegay deeqda Soomaalidu caanka ku tahay. Wuxu yidhi marka u nin marti ihi yimaado aad baa loo soo dhoween jiray. Hase yeeshee hadduu yahay nin Sare ama diinta ku xeel dheer yahay waxa marti qaadi jiray qaadiga magaalada amar reer sare».

Cuntada oo u badnayd Bariis iyo hilibna wuxuu ku fogaaday macaankeeda. Xusuus aan u laahaanno in Soomaaliya Culumada baybalka qaarkood ay ku sheegi jireen dhulka malabka iyo caanaha. Taasu oo aynu filayno in weedha ay ka timi aynu isku bariidinno ee ah «nabad iyo caano».

**SAYLAC 1402.**

Markay taariikhdu ahayd 1402 Saylac waxa weeraray dowladdii Itoobiya. Dagaalka waxa lagu dilay Sacad diin oo ahaa ninkii ugu sarreeyey ciidamadii Soomaalida. Sacada Diin wuxu ku aasan yahay dhulbaddeedka la yidhaahdo Sacada diin. Hase ahaatee Itoobiya qabsashadii ay qabsatay Saylac may waarin. Bil iyo toddoba cisho ayaa Saylac ay ku jirtay gacanta Itoobiya. Qarnigii 15aad wuxu ahaa mid Soomaalida iyo amxaaradu ay dagaallo isdaba jooga isku haleeleen.

1503dii waxa Saylac yimid nin la odhan jiray Barten oo tilmaam fiican ka bixiyaya Saylac, wuxu soo weriyey in marsadda laga dhoofin jiray dahab, bir iyo waxyaabo kale oo loo diri ji-

ray Beershiya, Masar iyo Shiine. 1616kii ayaa Boortaqiisku ku soo duuleen, Saylac. Dhibaatooyin culus ayaa Soomaalida meesha ka gaadhay. Markay taariikhdu ahayd 1527 Lebna dengel wuxu dab ku qabtay Awdal. Boqortooyada Awdal waxa ka mid ah magaalooyin Aw bare, iyo Camuud.

Intii ka horreysay sannadkii 1516kii Soomaalidu nabad gelliyo iyo xasilooni ayay haysteen. 1416 Joonkii labaad ee Boortaqiiska wuxu ergo u soo diray dowladdaa Itoobiya. Ergadaa waxa madax u ahaa Berdo. Ujeedadoodu waxay ahayd in dowladda Itoobiya ay ku dedaasho in ay dawaladdii Soomaaliyeed ee Muslinka ahayd go'doon ka dhigto oo ka sidigto Islaamka; waxay kale oo ay rabtay in Boortaqiisku ay noqdaan xoogga lama dhaafaanka ahaa ee badda Cas. 1518-9 ayaa Lebna Dengel u cugtay Degelhan oo uu cugtay in uu ciidamada Itoobiya sareeye u noqdo. Ciidamada oo loo tababarayay in ay Awdal ku duulaan.

## IMAATINKII CISMAANIYIINTA IYO BOORTAQIISKA

### AY YIMAADEEN XEEBTA BADDA CAS:

Wiilkii reer boqor ee lagu magacaabi jiray badmareenkii Henari markuu furay marinkii bariga looga kaco, Sooyaalka Afrika irido cusub ayaa ku furmay. Markay taariikhdu ahayd 1499kii Fasko da Gaama iyo maraakiibtiisu waxay weerareen magaalada Muqdisho. 1507dii saldhig ayey Boortaqiisku ka samaysteen dhulbadeedka la yidhaahdo soqadara oo u dhaw marinka badda Cas. Dadkii Muslimiinta ahaa ee agagaarka badda deggenaa inkasta oo ay isku dayeen inay gaashaanka u daruuraan budhcaddii Boortaqiiska ahayd hadna waa laga adkaaday.

Qansux Alqawri oo ahaa taliyihii ugu danbeeyey nimankii la odhan jiray mamaaliikta ee Masar xukumi jirey isaguna wuxu soo diray sahan u socday ilaa iyo Hindiya markay taariikhdu ahayd 1507-1515. Boortaqiisku waxay gubeen magaalada Saylac 1517kii. Sannadkii ka danbeeyayna waxay gubeen magaalada Berbera. Arrintaasu waxay dhalisay in Boortaqiiska ay iska hor yimaaddaadn dowladdii markaa ugu xoogga weynayd dowladaha muslinka. 1512kii ilaa 1519kii dowladdii Cismaaniyiintu waxay qabsaaty Suuriya, Masar, woqooyiga Afrika iyo xeebta dhulbadeedka carabta. Taasu waxay u suurto gelisay Turkiga in ay gacanta ku dhigaan dhul aad ugu fiican dhaqanka ganacsiga iyo istiraateejiyada siyaasaddaba. Hase yeeshee marka is yidhaahdeen Hindiya marinkeeda u gudba waxay la kulmeen Boortaqiiska oo aan rabin in cida kale qayb ka qaadato ganasiga bariga. Taasu waxay dhalisay in is af garanwaa halkaa ka dhaco.

## BOQORTOOYADII ITOOBIYA.

Dalka Itoobiya waa dal diinta Kiristaanka muddo dheer haystay Boqorrada dhulka xukumi jirayna waxay ahaayeen niman aqoonsan in xagga eebbe laga caleemo saaray.

Dadka waddanka deggana waxay isugu jireen dad kala geddisan oo afaf kala duwanna ku hadla. Hase ahaatee waxa dadka kulmin jiray hanuunsanida ay kiniisad kobtika ah uu hanuunsayihiin, iyo boqor ay hoggaankiisa oggolaayeen. Colad badan ayaa dadka kiristaanka ah iyo dadka muslinka ah ee hareerahooda deggan dhex tiil. Colaad aan taas ka yarinna waxay u hayeen dadka kiristaanka ihi dadkii katoolika ahaa ee dibadda kaga yimi. Waqtigaasu wuxu ahaa markii ay Itoobiya aad u dhul ballaadhsanaysay. Waxay Itoobiya ku tala jirtay soohdimaheedu in ay xagga waqooyiga ay gaadhaan kasoola, oo ahaa gobolka Suudaan oo ay degaan dadka loo yaqaan Beja. Dhanka Koonfureed soohdimaha Itocbiya waxay gaadhsiinaayeen ilaa dawladdii muslinka ee Ifaat. Xagga galbeedka waxay ku ekayd Siidaamo. Walaamo waxa la qabsaday 1414-29, waxaana qabsaday Nagaashkii yeshaaq.

Waxayse caadadoodu ahayd dhulal ka muslinka in uu xukumo waali muslin ihi sado ama gibrina ay sanad walba bixiyaan. Agaasinka dowladda Itoobiyase wuxu ahaa mid aad u tamar daran, aan si habsanna u wadi kareen arrimaha dadyowgay qabsadeen. Gobolka loo yaqaan Hadya sannad. walba wuxuu siin jiray dowladda Itoobiya sado, gabadh aad u qurux sana, sadadda ayay ku ladhi jireen. Marka gabadha la wareejinayo waxay ku tukan jireen salaadaha maydka. Arrimaha uu ka xumaaday Axmed Gurey taa ayaa ka mid ahayd.

## JIHAADKA IYO DUULIMAADKII.

Intii halganka diiniga ihi soconayey waxa kaloo jirtay in

dadkii ku dhaqnaa geeska Afrika Soomaali, Gaalla iyo Axmaaraduba ay duulimaad ka ku jireen.

Nimanka hoggaamiyayaasha u ahaa muslimiinta waxay isku magacaabi jireen (Amiir waxayna hoos imaan jireen suldaanka Awdal. Boqortooyadii muslinka ahayd ee loo yiqiin walaashma waxay ahayd mid guudka ka ilaalisa nimanka amiirada ah, cashuurna ka qaadda sanad walba. Shihaaba diin oo ahaa nin sooyaal qore ihi wuxu soo tebiyay in ay nimanka amiiradda ihi ka lahaayeen awood gaashaandhig ah oo hadday rabaan ay jihaad abaabuli karaan. Nimankaas hoggaamiyayaasha waxa ugu magac dheeraa Axmed Bin Ibraahim, ma uu lahayn laqabka amiir. Waxa jirtay Shahaaba Diin in nin yidhi «waxa aan ku riyooday Axmed Gurey in loo bixiyo (Imaam) oo aan suldaan iyo amiir midna loo bixin karin». Arrintaasuna dagaalkii bay aragti cusub Siisay, hoggaankii ciidamadana is bedel siyaasi, iyo diiniba ahaa ayaa ku dhacay. Goboikii Harar waxa ka dhalatay dawlad muslin oo dagaal u diyaar ah, isla markaa waxa dhismayey ilbaxnimada aynu soo sheegnay ee ilaa maanta aynu ka hayno heeso, Cayaaro, iyo masaajido.

## ITOOBIYA INTII KA HORAYSAY DUULIMAADKII

Baa'da Maryan (1468 — 68) oo markaa Itoobiya xukumayay wuxuu ku soconayay siyaasaddii caan Itoobiya ku ahayd. Taas oo ahayd in dadka aan kiristaanka aheen xoog iyo dagaal diinta lagu geliyo. 1446 — 71, Nin la odhan jirav Maxamed Ibna Badlay ayaa ergo u diray Baa"da Maryan oo weydiistay heshiis ballana ugu qaaday in uu sado dhiibo sanad walba. Heshiiskaasu wuxu Baa'da Maryan u suurageliyey in uu dagaal ku qaado dadka la yidhaahdo Falaasha ee Itoobiya deggan, ee diinta Yuhuudda haysta. Nimankii amiirada ahaa oo ka fara baxay bo-

qortooyada walaashma heshiiska lamay dhicin. Ninkii magaalada Saylac taliyaha u ahaa oo la odhan jiray Ladaaya Cismaan wuxu dagaal abaabulay 1471kii. Markaas oo ahayd sannadkuu dhintay Suldaan Maxamed. Baa'da Maryan dagaal qadhaadh ayuu ku qaaday muslimiintii, ciidamadii Awdal wuu cidhib tiray, niman badan oo amiirro ahna wuu dilay.

Baa'da Maryan dagaalka ku muu gaadhin guushuu filayey. Laba ciidan oo reer Itoobiya ah ayaa markay taariikhdu ahayd 1473-4, labaddaba uu jibiyay Cismaan. Arrintaasu waxay dhalisay in awoodi gaashaandhigga ahayd ee geeska Afrika isbeddel weyn ku dhacay. Itoobiyana ay liciiftay, muslimiintiina ay yeesheen gacanta sare. Baa'da Maryan wiilkiisii Iskandar (1472-78) ayaa isna muslimiinta dagaal la galay. Hase yeeshee markii u horraysay muslimiinta wuu ka adkaaday, magaala madaxdoodii oo la odhan jiray Dadkarna wuu baabi'yay. Cayaari waa gelin danbe; aakhirkii waa laga guulaystay Iskandar iyo ciidamadiisiiba. Markaa ka dib muslimiintii dagaallo is dabajoog ah ayey ku hayeen Itoobiya. 1481 ayuu Iskandar Qaahira u diray danjire oo uu ku waydiistay Kaniisadda Qibdiga ah in ay abuuna cusub u soo dirto Itoobiya.

1494-1508dii boqoraddii Haliina waxa la taliye u noqotay wiilkeedii oo markaa da'yaraa. Haliina waxa dhalay boqormuslin ahaa oo mar danbe galay diinta Qibdiga. Yaraanteedii waxay ku barbaartay diinta Islaamka, Juqraafiga iyo siyaasadda dhulka muslinka aad bay u taqiin. Waxay Haliina indho dheer u lahayd Itoobiya in ay go'doon siyaasadeed iyo mid diinba ku jirto. Haliina waxay u sii haysay boqortooyada wiilkeedii la odhan jiray Lebna Dengel. Muddo gaabanna iyada iyo amiir Maxamedba waxay isku dayeen in nabad gelyo ay gaadhaan, iriddaha ganacsigana ay furaan.

Hase yeeshee Haliina waxay garashadeeda siyaasiga ka heshay in nabad gelyadaasu tahay mid aan loo riyaaqi karin; layskuna haleen karin. Marka waxay cusboonaysiisay gaashaanbuurnimadii Bortoqiiska. Markii u horreeysay arrintaas isbahaysiga waxa loo jeediyey Joonkii II ee Bortoqiiska 1487, markuu maqlay Boqortooyo Kiristaan ihi in ay Afrika jirto. Beedro ninkii la odhan jiray oo Boortaqiis ah ayaa loo soo diray Itoobiya 1494kii. Ninkaassu wuxu ku taliyay in Bortaqiisku xeebta Itoobiya deggaan, ciidamadooda badahana saldhig uga abuuraan taasoo ay hiyiga ku hayeen in ay dawladda muslinka ee Awdal go'doon ka dhigaan, dawladda muslinka ihina aanay dibaddana xidddhiidh la yeelan. 1509kii Haliina waxay boqorka Boortaqiiska u dirtay nin Armiiniyaan ahaa 1520kii waxa Itoobiya yimi guuto Boortaqiis ah.

Lebna Dengal markii uu barbaarayay arrimihii dagaalka iyo doodihii siyaasiguba way isbeddeleen dagaalkana mar walba soohdimaha ayuu ka soconayay. Maxfuud oo Saylac xukumayayna waa la dilay. Koox Boortaqiis ihina waxay burburisay Saylac.1526kii wiil dhallin yar ah oo la odhan jiray Axmed Ibraahim Gurey ayaa qayb libaax ka qaadan doona dhisidda Awdal oo marka baaba'day.

## DUULIMAADKII WEYNAA.

Markii Lebna Dengal uu la wajaqay guushii uu qaaday, dadkii Awdal deggannaana waxay ka tashanayeen sidii ay dowlad iyo aarsi u habayn lahaayeen. Muddo seddex sano ah waxa aad u dedaalay nin la odhan jiray Al garaad Abuun adash oo aad isugu dayey in uu dowlad ka abuuro Awdal. Suldaan Abuu bakar ibna Maxamed magaala madaxdiisii wuu ka raray Dakar oo wuxuu u raray Harar 1520kii wuxuuna urursaday ciidamo Soomaali ah, Saylacna wuxuu qabsaday 1525. Markaa dadkii

Soomaalida ahaa waxay werin jireen in u imaan doono nin belaayada iyo dhibaatada ka saari doona dhulkoodana Amxaarada ka caydhin doona.

Imaan Axmed Ibraahim Alqasi (1506-43) oo lagu naanaysi jiray gurey ayaa noqday ninkii Soomaaliyeed ee culumada reer Awdal ay ku riyoon jireen kuna ducaysan jireen muslimiinta waxay markuu Axmed Gurey hoggaaminayay ka abuurtay «Koonfur bari Itoobiya»; dowlalda Muslin oo ciidamo Soomaali ihhi gaashaan u hayeen. Axmed Gurey dagaallo aad u qadhaadh ayey Itoobiya isku qaadeen. Mar walbana guushu isaga ayey raacaysay. Itoobiya marka afar meelood laga dhigo 3 meelood ayuu qabsaday. Markuu yaraa wuxuu ku barbaaray meel Harar 20 mayl xagga koonfurta u jirta. Aabbihii wuxuu u dhiibay markuu yaraa nin addoon ah oo la xureeyay oo la odhan jiray Adli.

Ninkaasu wuxuu baray Axmed Gurey farda fuulka, qalabka dagaalka iyo habka loo dagaalamo, boodada iyo legdinta. Macallinkaasu wuxuu kalo faray ardaygiisa runta, xushmadda iyo asluubta fiican.

Waxa kaloo Axmed Gurey Aabbihii kula dedaalay quraanka iyo aqoonta diinta islaamka. Axmed Gurey wuxu guursaday Daloonbira oo ahayd gabadhii Imaam Maxfuud oo ahaan jiray taliyihii Saylac. Taas awgeed wuxu gargaar milater ah ka helay dadkii Maxfuud raacsanaa. Isla markaa waxa xeebta qulquladi ka dhex taagnayd Boortaqiiska iyo Turkiga. Boortaqiiska waxay rabeen jidadka iyo mariinada badda in aan cidina uga ayaan roonaan. Turkiga saaxiibtooyo ayey la lahaayeen Soomaalida; Boortaqiiskuna Itoobiya ayuu taasoo kale la lahaa. Boortaqiisku waxay haysteen. Musawac oo dhul muslin ahayd.

Marku Abu bakar dhintay waxa boqor noqday Cumar Afiin.

Markii dowladdii Awdal dhisantay Axmed Gurey wuxuu isna diyaariyey dagaalkii diiniga ahaa iyo halgankii gobanimo-doonka ah ee u rabay in Itoobiya la galo.

Xusuus aynu u lahaanno in Itoobiya ay qasab kaga dhigtay reer Awdal in ay sado siiyaan sanad walba? Axmed Gurey arrintaas wuu diiday. Itoobiya arrintaas waxay u qaadatay ogeysiis dagaal. 1527kii ciidamadii Itoobiya waxay ku duuleen Awdal. Ciidamada waa la jebiyey, Axmed Gurey wuxu isugu yeedhay nabad doonadii Soomaalida, wuxuuna ka codsaday inay ciidamo soo ururiyaan halganka gobannimadoonka ay sidaa uga qayb galaan. Ciidamadii Soomaalida markii la isu keenay, Axmed Gurey si aad ah ayuu u carbiyey, arrintay u halgamayaana uga raariday. Ciidamadaasu waxay ahaayeen kuwo aad u carbisan, tababar dagaalna qaba, aragtidooduna tahay gobannimo iyo halgan diiniyad. Inta waxa u sii dheerayd geesinnimada ay caanka ku yihiin dadka reer guuraaga ihi ee gaajo,harraad, bahal dad iyo bahal dugaagba had iyo jeer u babac dhiga! Inta; waxaad ugu dartaa hoggaan qof-nimadiisu bilic sanayd.

1529kii Axmed Gurey wuxu dagaal kaga libaystay Itoobiya meesha la yidhaahdo Shemra kure. Marka ka dib Axmed Gurey xidiggiisu wuu sancanaa, guulba guul ayaa ugu danbaynaysay. 1531kii Dawaro iyo Shawa ayuu qabsaday. 1533 wuxu qabsaday Laasta, Daali Hadiya iyo siidaamo. 1535kii Axmed Gurey wuxuu qabsaday koonfur iyo badhtamaha Itoobiya wu xuuna u gudbay Tigri, inkastuu buuraha dhaa dheeri ay dhibaato keeneen dagaalkii ismuu taagin. Xagga waqooyiga waxay ciidamadii Soomaalida ahaa gaadheen ilaa kasala oo ku taal dhulka Suudaan.

Lebna Dengal markii hore wuxuu isku laday waanadii

hooyadii oo ahayd in aanu ka maarmi karin Boortaqiiska, sidaa daraadeed wuxu 1535kii weydiistay dawladda Boortaqiiska taageero milateri. Waxa loo soo diray 400 oo nin. Hase yeeshee 1441 markay yimaadeen Itoobiya waxa xukumay wiilkii uu dhalay Lebna Dengal ee la odhan jiray Galaadiyoos (1540— xasuus aynu u lahaanno markay taariikhdu ahayd 1530 in Itoobiya inteeda badan ay Soomaalidii qabsatay xukunka Soomaaliduna wuxu caynaanka u hayay Itoobiya 27 sannadood. Imaam Axmed Gurey wuxu ahaa nin warac ah; aqoon dheerna u leh tabta iyo xeesha dagaalka. 1542kii ayaa ciidamadii Boortaqiiska ee aynu hore u sheegnay, taageero Luddoon siiyeen dowladdii Itoobiya. Taasuna waxay u suura gelisay in Imaam Axmed la dhaawaco. Hase yeeshee Boortaqiiska midka ugu weynaa ay rabeen wuu u suura geliwaayey, taas oo ahayd in ay Axmed Gurey oo nool gacanta ku dhigaan! Markuu Axmed Gurey arkay sidii aawaasha dagaalka u soconasay isana wuxu gargaar weydiistay dowladdii Turkiga.

Markuu helay Axmed Gurey taageeradaasu carcar cusub ayey dagaalkii siisay. Ciidamadii Boortaqiiska iyo Itoobiya wuu kaga guulaystay. Abbaanduulihii Boortaqiiska Kiristaf di Gaama inta ciidamadiisii lagala hadhay ayaa kurta laga gooyay! Goobta waxa ku geeriyooday 200 oo Boortaqiis ah. Boortaqiiska iyo Itoobiyaankaba way ku hoobteen waana la curyaamiyey dagaha ayey wax ka dayeen.

Axmed Gurey aad ayuu ugu bogay heerka dagaalka u soconayey, aragtidiisii siyaasiga ahaydna waxa heedh-heedh gelisay libtii la yaabka lahayd.

Iyado uu doonayo in uu dib u fiiriyo xaalka dagaalka ayuu ku noqday xaruntiisii oo ahayd Harada Taana akteeda. Axmed Gurey waxa marka u babac dhigay nin la odhan jiray

Galadiyoos oo kaalmadii Boirtaqiiska aad uga faa'iidaystay Oktobar 1542 ayaa Axmed Gurey Isgiina la dilay ciidamadii-sana la jabiyay.

## TAARIIKHDA SOOMAALIDA INTII KA HORAYSAY QAY-BINTA GUMEYSIGA.

Geeska Afrika taariikhdiisu waxa badiba ka koobantaa doolidii ay dadka Soomaalida ihi ay ku baahsanaayeen cara edi-gta geeska qarniyadii danbe. Dhanka xeebta haddaynu fiiro ga-ara siino waxaynu ogaanaynaa in awooddii siyaasiga ahayd ee muslimiinta ee Xeebta muddo dheer u talin jirtay uu si isda-bayaal ah u liciifayey. Labada arrimood mid waliba taariikh-deeda gaar ahaaneed ayey leedahay. Hase yeeshee midna soo-yaalkeeda kama sidana ta kale. Qarnigii tobnaad waxa jirtay in aad looga soo duulay dhanka gudaha oo loo soo duulay dhan-ka xeebaha. Socdaallo isdabayaal ah ayaa jiray,xusuus aan u lahaano in geedigu dheeraa, sanooyin aad u badana ay qaa-datay in tay dadku aad ugu fidayeen dhulka oo dhan.

Markay dadkii gudaha ka soo duulay ay kuwa xeebta deg-gana la kulmeen waxa dhacday in meesha u ka abuurmay dha-qan isweydaarsi. Noloshii bulshada, dhaqankii ku xidhnaa ga-nacsiga debedda ee ay dadka xeebta deggan la lahaayeen Carab-ta uu isbeddel weyn ku dhacay. Haddaynu u fiirsano taariikhda xeebta waxaynu arkaynaa in heesaha dadka xeebta deggan ay muujinayeen dhaqannadii kala duwanaa ee marba ku soo kor-dhi jiray. Maanta waxaynu haynaa heeso aynu ku magacaabno Saylici oo lagu hal abuuray af Oraamo, Soomaali iyo dhawr eray oo carabi ah. Heesaha waxaynu ka garan karnaa nolosha iyo dhaqanka reer Saylac. Xeebta Banaadir iyo maakhir iyaka-na waxa xiisa gaar ah ina gelin karta sheekabarlayda kacaan-

ba ka kadanbeeya u tebiyo. Heeso iyo cayaaro gaarana way leeyihiin. Aad ayey heesahaas iyo sheekooyinkaasu inooga kaalmeen karaan xagga sooyaalka soo duulista.

Markii Soomaalidu ay u soo duushay iskuna kala bixisay geeska Afrika keli kumay ahayn arrintaas ee waxa soo horreysay Cafarta iyo Saaho. Waxa gadaal ka yimi Oraamo doolay Gaallada. Hore waatuu sheegay in Oraamadu iyo Soomaalidu meel ka wada farcameen. Oraamada iyo Soomaalida oo aynu ku sheeganay Kushitik waxay meelaha qaarkood oo geeska mid ahaa ugu yimaadeen dad Baantu ah. Ilaa maanta Itoobiya iyo Soomaaliyaba waa laga helaa astaamihii Bantuuga. Dadkaa Baantuuga ah Carabtuna waxay odhan jireen Sinji. Eraygu wuu canbaaraysan yahay! Markaase waxaynu filanaa in uu tilmaamyey midabka madow ee dadka labada webi dhexdooda dega. Waxa taariikhda dadkii webiga ku noolaa laga helayaa Buug nin carab ihi qoray oo la yidhaahdo ««Buuggii Sinjiga»: webiyada iyo dadku degganaa waxa ku soo kordhay dad ka soo duulay xagga Sanjibaar.

Dadka xagga koonfurta ka yimi meelo kale geddisan ayey degeen. Haddaynu eegno lahjada Baraawee lagaga hadlo waxaynu arkaynaa in ay afka Sawaaxiliga ay isbahaysan karaan; afkaa sawaaxiliga ah oo sidaynu buugga koowaad ku soo sheegnay ka dhex dhashay ilbaxnimadii xeebta bariga Afrika ka barbaartay.

Dadkii kushiitik ahaa ee soo duulay waxay ahaayeen xoolo dhaqato iyo reer guuraa baantuugana waxay ahaayeen beeralay.

## KALA BOOBKA DALKA SOOMAALIYEED.

Qarnigii 19aad barkiisii damboo idil dawladaha reer Yu-
rub waxay wadeen tartankii lagu kala boobayay dalka Afrika,
Soomaaliya oo qabsashadeeda bilaabatay 1806 socotayna tan iyo
1897, waxa ayaandarro kala qaybsaday dawlado badan oo dad-
kii Soomaaliyeed oo isku afka, isku dhaqanka, isku diinta ahaa
kala dhex dhigay soohdimo been ah, kuna khasbey in ay ku
noolaadaan Sharciyo iyo dhaqamo kala duwan oo shishee-
ye ku ah. Dawladihii kala qaybsaday Soomaaliya waxa ka
mid ahaa Ingiriis, Talyaani iyo Fransiis. Waxa kala dhantaalka
ummadda Soomaaliyeed ka faa'iidaysatay Itoobiya, oo aan hore
ugu dhici jirin in ay si rasmi ah dadka Soomaaliyeed u soo dhex-
gasho. Dhulka Soomaaliyeed waxa laga soo galay laba dhinac:
Waqooyi iyo Koofur. Dhinaca waqooyi waxa kala qaybsaday
Faransiis; Ingiriis iyo Talyaani ayagoo loolamayo: Dhinaca
Koonfureedna waxa wada jir iyo heshiis ku qaybsaday Ingiriis
iyo Talyaani. Gumeystayaashii waxay aqoonsadeen oo kaasha-
deen boqortooyada Sanjibaar iyo boqortooyada Itoobiya ayadoo
ujeeddadoodu ahayd in waqtigaa la joogay aqoonsigaasi u fudu-
ujeeddadoodu ahayd in waqtigaa la joogay aqoonsigaasi u fudu-
deeyo kala boodka dalalka Afrikada bari; ay dabadeedna boqor-
tooyinkaas laftooda kala qaybsadaan sida dhab ahaantii dhac-
dayba.

## SOO GELITAANKII DHINACA WAQOOYI

Ingiriisku wuxuu xoog ku qabsaday Cadan 1839kii, wuxuuna ka dhisay Deked ay ka sahay qaataan Maraakiibtiisa ku jeedda Hindiya; Cadani inkasta oo ay ku tiil qiima istaraatiijiya leh, haddana ma ayan lahayn nafaqo Askarta la siiyo, sida darteed waxay qiimo gaar ah siinayeen xeebta Soomaalida oo ay ka qaadanyeen hilib iyo subag. Ingiriisku waqtigaa uma darbanayn in uu gacanta ku dhigo dhul Soomaaliyeed, hase yeeshee wuxuu ka walwal qabay in ay qabsato cid asaga ku lid ah,wuxu siiba ka cabsi qabay Fransiiska oo weligiiba tartan kula jiray kala boobka waddammada Ameerika, Aasiya iyo Afrika. Fransiisku, sida ingiriiska oo kale ayuu wuxuu u baahnaa Deked ay ka sahay qaataan Maraakiibtiisa ku jeedda indoshiina, oo uu waqtigaa gumeysan jiray. Sidaas darteed wuxuu heshiis la saxiixday dul ka ilaalis ah madaxdii u talisay Obokh. Talyaanigu, inkastoo uu dhowr Gumeysi iska xoreeyay wuxuu durbaba u hanqal taagayay in uu ka qayb qaato kala boobka Afrikada bari, waxaana arrintaa ku dhiiri galinayay ingiriiska oo siyaasaddaa ku hor istaagayey Fransiiska.

Waxayse Talyaaniga ka soo horreeyey Masaarida oo 1866 dawladda Turkigu ku soo wareejisay maamulka Swakin iyo Masawac. Barasaabku tegay Tajorra, Saylac iyo Berbera, wuxuuna weydiistay madaxdii u talisay magaalooyinkaa in ay ku dhawaaqaan in ay daacad u yihiin taliska Turkiga. 1869kii Markab Masaariya ayaa soo ilaaleeyey Berbera, sannad dabadeedna Maxamed Jamaal Bey ayaa loo diray in uu calanka Masar ka taago Berbera iyo Bullaxaar. Magaalooyinkaa ay Masaaridu ciidamada geysay ayadoo cuskanaysa heshiisyadii Turkiga, waxa ka mid ahaa, oo labada aan hore u soo sheegnay weheliyay. Tajorra, Saylac, Harar. Ingiriisku wuxu ka codsaday Masaarida in ay tallaabooyinkaa dib uga noqoto Markay doodii muddo so-

cotay ayase Ingiriiskii waxaybaa la noqotay in ay dani ugu jirto in dhulka Masaarida oo ah dawlad taag yar ay sii hayso intii uu qola kale gacanta u gali lahaa. Labada dawladood waxay kala gaareen heshiis. Heshiiskaas wuxu Masaarida uga aqoonsaday Ingiriisku in ay leedahay xeebta galbeed ee Badda Cas tan iyo Xaafuun. Masaariduna waxay ballan qaaday in ayan cid kale ku wareejin.

Masaaridu inkastoo ay hunguriyayso Baraawe iyo Kismaayo oo ay geysay halkaa markab ay doonaysay in ay marsiiso webiga Juba, haddana taliskeedu xeebta badda Cas ma dhaafsiisnayn, magaalada Harar moove. Taliskii Masaarida, oo soo garay tan iyo 1882kii waxa cimri deg deg ku riday, oo ka kiciyay badda Cas kacaankii Mahdiga Suudaan.

Markii Masaaridu meesha ka baxday ayaa waxa la soo gudboonaatay Ingiriiska sidii uu uga badbaadin lahaa Soomaaliyada waqooyi dawlad asaga ku lid ah. Dawladda Ingiriisk waxay u dirtay dhulka Soomaalidu deggan tahay oo Cadan ka soo horjeeda Gaanshaanle Hunte oo loo xilsaaray in uu heshiiysyo la soo saxiixdo madaxda Soomaalida oo dhulka u talisay. Heshiisyadaa oo la kala saxiixday 1884—1885 ma ayan ahayn kuwo haba yaraatee kala dhantaalaya madaxbannaanida iyo gobannimada dadka Soomaaliyeed. Kuma jiro qodob qura oo dadka Soomaaliyeed Ingiriiska dhul ku siinayaan ama kaga kireynayaa, mana ay muuqato sida dhabta ah wax heshiisyadaas ay kaga duwan yihiin kuwa saaxiibtinimada ah oo dawladuhu maantaba kala saxiixdaan. Madaxdii Soomaaliyeed waxay rumaysanaayeen inuu Ingiriisku qaddarinayo madaxbannaanidooda sida uu heshiiska ku ballan qaaday, hase yeeshee Ingiriisku kuma tala jirin in uu oofiyo qodobbadaas, waxana arrintaa daaha ncoga qaadaysa tabaabushaysigii uu u galay qabsashadii dhulka Soomaaliyeed sannad dabadeed. Inkastoo Cadan

lagu tababarayay Ciidan Boolis ah oo loogu tala galay in uu gacanta ku dhigo maamulka Soomaalida Waqooyi. Wuxu dadka Soomaaliyeed ku maaweelinayay in uu ka dhexeeyo xiriir diblomaasiyeed. 1884kii waxa la geeyey Berbera, Saylac iyo Bullaxaar saddex qunsul ku xigeen. Waqtigaa Ingiriisku kuma tala jirin in uu dhulka aad u sii guda galo.

20kii Juulay 1887 ayaa Ingiriisku si rasmi ah ugu dhawaaqay in dhulka u dhexeeya Jabuuti iyo **Banaadir Siyaada** uu yahay dhul uu dusha ka ilaashado. Ingiriisku wuxu bilaabay si tallaabo tallaabo ah in uu u kordhiyo awoodiisii. wuxu dhisay Ciidan Boolis oo Soomaali ah, markuu u baahdana Ciidan ayuu Cadan ka keensan jiray, wuxuuna magacaabay garsooreyaal taliskiisa raacsan.

Fransiisku wuxu indha indheynayay tan iyo muddo meel uu ka dhigto Deked si uu uga maarmo Cadan. Sidaa awgeed 1884kii ayaa waxay dawladda u magacawday **Leonce Lagarde**, oo ah ninkii dhidibada u muday gumeysiga Fransiiska ee xeebta Soomaalida, in uu barasaab ka noqdo Obakh, oo Fransiisku heshiis kaga la wareegay madaxdii u talisay 1859. Xeebta Soomaalidu waxay Fransiiska qiima gaara u yeelatay, siiba markii la furay biyaxidheenka Suweys, Ingiriiskuna u diiday in maraakiibtiisa ku jeedda Indoshiina iyo Madagaskar ka sahay qaataan Cadan. Markii Masaaridu ka kacday Badda Casna Fransiisku wuxu qabsaday Jabuuti, halkaasoo aad ugu habboonayd Deked, iyo dhulka hareeraheeda ah.

Fransiiska iyo Ingiriisku waxay isku qabsadeen soohdimihii u dhexeeyey laba dhul oo ay gumeystaan. Sida caadada u ahayd gumeystayaasha waxay isku raaceen heshiis ay kala saxiixdeen 1888 oo lagu kala qoqobay dadka Soomaaliyeed oo walaalaha ah.

## SOO GELITAANKII GOBOLLADA KOONFUREED

Dhinaca koonfur waxa iyagoo wada jira kala qaybsaday Inyiriis iyo Talyaani. Dawladda Talyaaniga waxa had iyo jeer ugu baaqayay in ay ka soo qayb qaadato kala boobka Afrikada bari Gusepe Sapeto oo joogay Eritreya iyo Guglielmo Masaaya oo joogay Itoobiya, waxayna ahaayeen baadariyaal faafinaaya diinta Kirishtaanka. Siyaasadda dad iyo dal gumeysiga ku dhisan meel kastaba ha joogtee waxa hirgeliyey baaderiyaasha, sahmiyayaasha iyo warshadleyda oo qayb libaax ka qaadatay fidinta gumeysiga.

Dawladda Talyaanigu, markay go'satay in ay Badda Cas ku yeelato dal ay gumeysato, waxay wakiilatay **Guseppe Sapeto** oo qabanqaabiyay 1869 qabsashadii Asab oo ku taal Eritrea. Talyaanigu Siyaasaddiisa waxay ahayd in uu isku qabsado dhulka u dhexeeya Eritrea iyo webiga Juba, waxase siyaasadda hor-taagnaa oo u diiday in uu dhulballaarsado oo Itoobiya guda galo Imbradoor Yuunus. 1885tii ayaa waxa loo xilsaaray in uu baadigoobo siyaabihii siyaasaddaas lagu hirgelin lahaa **Antonio** Cecchi, oo ka mid ahaa sahamiyayaashii Afrikada bari taa-taageersanaana gumeysiga, iyo taliye **Matteo Fecarotta** oo watay markkab la oran jiray «Barbariga».

Taliska boqorka Zinjibaar ma uusan dhaafsiisnayn xeebaha wiligiina iskuma dayin in uu dad ogolaysiiyo xukunkiisa dhisana maamul qaran. Waxase intaba ka daran 1890kii maamulka dhulbadeedka Zinjibaar waxa gacanta ku hayay Ingiriis, inkastoo ayan baabi'in jiraalkii boqortooyada awoodeedu waxay ahayd mid oraha.

Talyaaniga, sidii kuwii ka soo horreeyey, wuxu dan mocday in u aqoonsado boqortooyadaas heshiis uu ayada la saxiixdo uu ku jidaysto qaybsashhada Soomaaliya. Antonio Cecchi iyo Matteo Fecarotta waxay tageen Zinjibaar, halkaasaana waxay kula kulmeen Sayid Barqash oo ay wareysteen in uu dawladdooda ka kireeyo Kismaayo Baraawo, Marka Xamar iyo Warshiikh. Markuu Sayid Barqash arrintii hor istaagay oo ay waxba ka dhamayn kari waayeen ayey waxay kula taliyeen dawladaha in qunsul lagu magaaabo Filonardi oo ku lahaa shirkad Zinjibaar. Talyaaniga markuu boqorkii oggolaysiin kari waayey danihiisii, ayuu wuxuu damcay in uu xoog ku qabsado xeebta Koonfureed waxaase is hor taagay Ingiriiska iyo Jarmalka. Waxa markaa u caddaatay Talyaaniga sida kaliya uu kaga qayb qaadan karo kala boobka Afrikada in ay tahay ayadoo ay raali ka yihiin labada gumeystayaal oo meesha kaga soo horreeyey.

Ingiriiska oo ka cabsi qaba in Jarmalku isku baahsho Afrikada Bari ayaana Talyaaniga ku gargaaray siyaasaddiisii.

Ayadoo Talyaaniga ballan laga qaadav aanse waxba weli fara ugu jirin, ayaa waxa Febraayo 1899 waxa heshiis dul ka ilaalis ah saxiixday boqor Yusaf Cali oo u taliyey Hobiyo.

Sannadkii ku xigayna waxa heshiis kii hore la mid ah la saxiixday boqor Cismaan Maxamuud oo u taliya Gobolka Bari. heshiisyadaas na ayan ahayn kuwa lagu oggolaaday gumeysi, waxana sidaa caddeynaya in madaxdii iskood isku maamuli jireen tan 1923.

1892 ayaa Boqorka Zinjibaar Talyaaniga ka kireeyey Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Warshiikh. Maamulka Soomaalida koonfureed ee Talyaanigu gumeysto waxa loo dhiibay shirkadda Filonardi saldhiggii u horreeyeyna waxa laga sameeyey Cadale

1896 Talyaanigu wuxu ka fadhiyay dalka Soomaaliyeed 6 Magaalo, 4 kaliya ayaase waxa maamulay niman Talyaaniya, kuwaasoo ahaa Baraawe, Marka, Muqdisho Luuq. Dhulka u dhexeeya Kismaayo iyo Ras Kiyamboone oo la oran jiray Jubaland iyo N.F.D. waxay ka mid ahaayeen qaybta Afrikkada bari ee Ingiriisku gumeysto, waxana maamulkeeda loo dhiibay Shirkadda Ingiriiska u qaabilsanayd gumeysiga Afrikada bari.

Gumeystayaashii waxay badanaaba dalka Soomaaliyeed soo galeen ayagoo daahaya ujeeddooyinkooda, iskana dhigaya in dantoodu tahay ganacsi, sidaa darteed waxa maamulka loo dhiibay Shirkado. Waxa dawladaha Yurub aad ugu guubaabinayay gumeysiga Shirkadahana maalkooda galin jiray maalqabeennada oo ah kuwa ka faa'iidaysanaya gumeysiga. 1892 Soomaalida dhammaan gobolka galbeed mooye waxa sheeganayey gumeystayaal reer Yurub, inkastoo ayan dalka Soomaaliyeed badankiisa gacanta ku hayn oo dadka Soomaaliyeed sidii caadada u ahayd isu maamulayeen.

## QABSASHADII ITOOBIYA EE GOBOLKA GALBEED

Qarnigii 19aad kala barkiisa dhulka boqortooyada Itoobiya Amxaara, Goojaam, Shawada waqooyi iyo Tigre'da Koonfureed Dawladda Itoobiya waxa u suurageliyay in ay xoogeysato oo dhulballaarsato qaybtii ay ka qaadatay kala boobkii dalka Soomaaliyeed. Gumeystayaasha waxay dan moodeen in ay aqoonsadaan boqortooyada Itoobiya garabsadaanna si ay ugu fududaato kala qaybsashada Ummadda Soomaaliyeed, inkastoo ay ayadaba Talyaanigu ku tala jiray in uu qabsado Itoobiya, weligeedbay dadka Soomaaliyeed u garabsan jirtay dawladaha reer Yurub ayadoo ka walaalaysanaysa xagga diinta dawladaha reer Yurubna badanaaba way ku diideen oo aad bay u quudhsan jireen kirishtaannimadeeda, waxa ayada loo oggolaa in la

siiyo ama laga iibiyo Hub, dawladaha reer Yurub waxa dhex-mada kale ay ayagu gumeystaan ay Hub ka iibiyaan Itoobiya mada kale ay ayaga gumeystaan ay Hub ka iibiyaan Itoobiya muddo yar ayay ku hubaysatay, waxana sidaa u suura geliyay siiba heshiiskii Uccialli oo ay Talyaaniga iyo Miniliq kala saxiix-deen 1888. Heshiiska Talyaaniga wuxu Miniliq ugu ballan qaa-day hub fara badan, asaguna wuxu ku oggolaaday in Talyaani-gu maamulo siyaasaddiisa dibedda, inkastoo dabadeed arrintaa laysku qabsaday Miniliqna diiday asaga oo ku doodayo in heshiiska af Axmaariga ku qoran uu sidaa ka duwan yahay.

Hubka Talyaanigu siiyay iyo mid u ka helay dawladaha ka-le ayaa Miniliq u suurageliyay in uu qabsado dhul fara badan wixii ka dambeeyey 1888dii. Hubkii Uccialli uu ku helay wuxuba noqday midkii uu Talyaaniga laftiisa kaga guulaystay goobtii Aduwa 1896. Dawladaha waddamada Soomaaliyeed ka dhisnaa oo iskood isu maamulay, waxa ugu filweynayd xagga taariikhda markii la eegana qaaya weyn lahaa dawladda Harar oo weli-geed Amxaarada ka soo horjeedday.

Harar iyo agagaarkeeda waxa degganaa dad iskood isu maa-mule, 10 sano oo Masaaridu gumeysanaysay mooyee, Amxaara-duna si burcadnima ah in ay ku timaado mooyee si rasmi ah uma ayan soo geli karin 1887dii ayay Amxaaradu Harar qab-satay, waxana Miniliq ku magacaabay barasaab Ras Mekoneen, kolkaa ayaana markii ugu horreysay talis Itoobiya oo ka dhismo dal Soomaaliyeed. Muddo dheer ayay ka qaadatay Itoobiya si-day ugu fidi lahayd dhulka. Itoobiya, inkastoo ay ku dhici way-day in ay dadka Soomaaliyeed dhexgasho waxay gumeystayaa-shii reer Yurub la saxiixday heshiisyo lagu kala dhexdhigay soohdimo xaqdarro ku dhisan dadka Soomaaliyeed. Heshiisyada waxay kala yihiin:-

1. Heshiiskii 1897dii ay kala saxiixdeen Itoobiya iyo Faransa oo uu Itoobiya lagu aqoonsaday dhul badan oo Soomaaliyeed.

2. Heshskii 1897dii dhexmaray Ingiriiska iyo Itoobiya oo uu ugu aqoonsaday Gobolka Galbeed ee Soomaalidu waligeed degganayd, Amxaaraduna markay soo gashay la yaqaan.

3. Heshiiskii 1908 dhexmaray Itoobiya iyo Talyaaniga oo soohdinta beenta lagu kala dhexdhigay Soomaalida.

Talyaaniga, Ingiriisku iyo Faransiiska sidoo kale ayay kala saxiixdeen heshiisyo lagu dhexdhigayay soohdimo, aan haba yaraatee lagu tixgelinayn danta dadka Soomaaliyeed.

Qarnigii labaatanaad wuxu Soomaalida ula dhaahay nasiib xumo. Soomaaliya waxa loo kala qaybiyay shan qaybood kuwaasoo ahaa: Xeebta Soomaalida ee Faransiiska, Gobollada waqooyi oo Ingiriisku gumeystay oo lagu magacaabi jiray Soomaaliland, Soomaaliyada Talyaanigu gumeysto, N.F.D. iyo Jubaland oo ayana Ingiriis gumeysto, inkastoo middan danbe Ingiriisku soo raacin doono Talyaaniga.

## DHALASHADII KACAANKA GOBANIMADOOKA AH.

Sidaan hore u soo aragnay Soomaalidu waligeed lama ayan yeelan qolocyinkii gumeysanayay xiriir wadanoolaasho oo wanaagsan. Muddadii ay taliska shisheeyaha ku hoos jireen oo idil waxay garansanaayeen in ay yihiin dad walaala ah dhexdoodana waxa yiillay is daryeel.

Dareenkaas waddaniyadeed ma uusan ahayn mid dabaqad ku kooban ee wuxu ahaa mid dadka Soomaaliyeed meel kasta ba ha joogaanee ay ka sinnaayeen. Waddaniyad kasta oo Soomaaliyeed wuxu saldhig u noqday dhalashadii kacaankii saddexaad ee ka dambeeyay Dagaalkii dunida ee Labaad.

Saddex arrimood ayaa tiiriyey xoogaysiga waddaniyad kasta oo Soomaaliyeed. Waxa ugu horreeya nacaybka taliska shisheeyaha ay dadka Soomaaliyeed u qabeen. Soomaalidu, wixi ka horreeyey kala boobkii geeska Afrikada bari, iskeed ayey isku xukumi jirtay waxay lahayd madax la doorto oo lagu kalsoon yahay, arrimaha qiimaha weyn lehna waxa lagu falanqayn jiray Shirar waaweyn. Taliska dawladaha Shisheeyaha ahi wuxu waxyeellayn jiray nolosha hiddaysiga ah ee dadka Soomaaliyeed. Marar badan waxa iska horiman jiray dhaqanka, caadooyin, sharciga muslinka ee dadka Soomaaliyeed ku dhaqmo iyo kan dawladda waxana xoog lagu dhaqan galin jiray kan dawladda gumeystaha ah oo ayadu gacan sarreysay. Intaa waxa weheliyay maamulka dawladaha gumeystaha ah oo wixi ka horreeyay Dagaalkii Dunida ee Labaad ku dhisnaa cadaadis naxariis la'aan ah, siiba kan Talyaaniga oo hirgeliyey shaqo sandullayn iyo midab takoor. waxa kaloo nolosha hid-

dayaiga ee Soomaalida waxyeelleeyey soohdima ku sheegyada la dhexdhigay dadka Soomaaliyeed, oo ay dhici karto markay guuraanba in ay la kulmaan Sharci, dhaqan, maamul, af cusub oo ayaga shisheeye ku ah. Waxaabase dhici kartay in ay dawladuhu horistaagaan dadka reer guuraaga ah markay dam caan in ay soohdimahaas ka tallaabaan iyagoo raadsanaya daaq iyo biyo taasina ay aad u waxyeellayn jirtay noloshooda aadna u dareensiin jirtay kala boobka iyo kala qaybsiga dalkooda.

Arrinta labaad ee doorka ka ciyaartay faafidda wadaniyad kasta ee Soomaaliyeed waa diinta Islaamka oo ka mid ah tiirarka ay ku dhisan tahay ummadnimada Soomaaliyeed. Diinta Islaamka waa mid saameynaysa nolosha idil, sidaa darteed way ku adag tahay bulsho muslin ah in ay oggolaato taliis dad aan diin la wadaagin.

Waxa door weynn ka ciyaaray horistaagga dawladaha Kiristaanka oo gumeysatada ah wadaadada iyo dadweynaha Soomaaliyeed oo diinta ku dheer.

Waxa intaa weheliyay dawladaha gumeysatada oo mararka qaarqood dhiirri geliyay faafiddii iyo xoogaysigii wadaniyadda Soomaaliyeed ayagoo dana ay leeyihiin ku fushanaya. Dhiirri gelintaa waxa badanaa loola jeeday in lagu baabi'iyo taliska dawladda gumeysatada ee jaarka, hase yeeshee dhaqdhaqaaqyada iyo gadoodyada sidaa ku dhasha, ma ayan noqon jirin kuwa dama ee way faafi jireen, waxayna ekayn jireen geeska oo dhan.

## SOOMAALIDA WAQOOYI EE INGIRIISKU GUMEYSTAY

Kacaankii Sayidka ka dib dagaalla waawevn waddanka kama ayan dhicin, inkastoo aan xasillooni dhab ah jirin. Nolo-



aha dalku wax dhan ayaase iska beddelay haddii loo eego labaatankii sano ee u horreysay taliska gumeysiga Ingiriiska. Waxa taariikhda dalka aad u saameeyey halgankii Draawiishta, kaasoo ciribtirkiisii Ingiriiska kaga baxay kharaj farabadan. Ingiriisku wixi waqtigaa ka dambeeyey aad ayaa u yareeyey hawlihii uu waddanka ka qabsanayey asagoo ka cabsi qabo in kacaan kale uu dhasho. Inakastoo oo uu Ingiriisku maamulkii siyaasiga ahaa ee hore dalka u jiray uusan burburin, ma uusan oggolaan jirin wixi danihiisa ka horimaanaya. Waxyeellooyinkii Ingiriisku dalka u geystay waxa u weynaa dadkii oo soohdimo la dhexdhigay lagana xiray dhulkii ay xoolaha daaqsan jireen, iyo asagoo Itoobiya u aqoonsaday dhul farabadan oo Soomaaliyeed, kuna dhiirri geliyay gumeysiga dadka Soomaaliyeed. Inkastoo ay dadku soohdinta ka tallaabsan jireen ayagoo wada noloshii caadada u ahayd, haddana soohdimahaasu aad bay u waxyeellaeeyeen nolosha dadka.

Soohdintu waagii hore ma ayan calaamadaysnayn sida darteed. Way adkayd sidii loogu kala garan lahaa in dadku ku hoos jiro gumeysi Ingiriis ama gumeysi Amxaaro. Muddadii u dhexaysay 1932-1934 waxa loo saaray guddi calaamadiyo soohdinta. Soomaalidii ayagoo garansiisan dhibaatooyinka arrintaasi la iman doonto ayay burburiyeen calaamooyinkii, dawladduna way ganaaxday.

Dhaqdhaqaaqyada cusub oo ku halgamayo hab cusub waxa hoggaaminayey adduunkoo idil dad tacliin leh, Soomaaliyada woqiiyi ee Inngiriisku gumeystana dadka sidaas ahi way ku yaraayeen. inkastoo wixii Dagaalkii Dunida ee koowaad ka dambeeyey dadku garteen qiimaha waxbarashada Dugsiyo ma ayan jirin oo 1934 hal Dugsi oo hoose oo qura ayaa ka furnaa dalka. Dawladdu wixi 1934 ka horreeyay wax tallaabaa oo ay ka qaadday faafinta waxbarashada ma ayan jirin. Inta

yar oo waxbaratay waxay ahaayeen dad dawladda u shaqeeya, sidaa darteedna uma ayan suura galayn in ay siyaasadda door weyn ka qaataan amaba hoggaamiyaan dhaqdhaqaaqyada gobanimadoonka ah.

Raggii u horreeyey ee hoggaaminayey dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka ah oo qayb weyn ka qaatay dhalashadiisii waxa u horreeyey una magac weyn Xaaji Faarax Oomaar oo ahaa nin cilmi leh, oo gobanimada ku doonayey hab ka duwan kii Sayidka raacsanaa fikradihii mahatama Gandi horseedkii gobannimada Hindiya.

Xaaji Faarax Oomaar 1910 wuxu ahaa nin dawladda u shaqeeya oo kaaliye Taliye degmo ah.

Markii Ingiriiskii gartay in uu aad isugu hawliyo baabi'inta maamulka gumeysiga oo dadka fara ugu fiiqayo ceebihiisa iyo gardarooyinkiisa, ayaa wuxu u beddelay milateriga kana dhigay dhamme Ingriiska ma uusan ruqsayn waayo wuxu ka cabsi qabay in uu fursad u helo uu door weyn kaga cayaaro siyaasadda dalka. Laba sano dabadeed ayaase Xaaji Faarax Oomaar shaqadii ka fariistay si uu ugu jeesto ka qayb galka siyaasadda ka soo horjeeda maamulka gumeysiga. Xaaji Faarax wuxu tegay Hindiya 1930kii wuxuna aad ula saaxiibay Mahatma Gandi oo uu bartay falsafadiisa, wuxuna ku soo laabtay dalka si uu hawshiisii u wato. Wuxu Xafiiska Gumeysiga Ingiriiska u diray 1932kii dacwaddii u horreeysay oo uu kaga cabanayay cadaadiska foosha xun ee dadka Soomaaliyeed lagu hayo. Waxyaabihii uu ka dooday waxa ka mid ahaa barasaabka, xaq darada, iyo gabi ahaan sida saraakiisha maamulka haysaa ula dhaqanto dadka Soomaaliyeed. Waxyaabihii uu tusaalaha ka dhigay waxa ka mid ahaa in dalka loo keeno niman Ingiriis oo aan waligood arag meel sharci lagu hayo loona dhiibo maa-

mulka garsoorka. Wuxu qoray arjigaa iyo kuwa badan oo ka dambeeyey oo uu falanqeeyey maamul xumada gumeysiga.

Ingiriiska oo hore ugu gubtay kacaankii Draawiishta aad buu ugu dhega nuglaa ka soo horjeed siyaasadeed oo kaga yimaado dhinaca Soomaalida, sidaas darteed dawladdu waxay weydiisay in uu arrimahaa ka jawaabo barasaabkii, oo mar walba inta isu keeno niman adeega faranji ah oo dawladda lacag ka qaata, ka saxiixi jiray warqad lagu amaanayo isaga iyo maamulka gumeysiga, laguna tilmaamayo Xaaji Faarax Oomaar nin rabshad badan oo siyaasi ah oo aanse dadka haba yaraatee kalsooni ka haysan. Xabsi iyo cadaadis Xaaji Faarax Oomaar waxay u ahaayeen wax nolosha ka mid ah, hase yeeshee marna kama uusan hakan hawshiisii wadaniga ahayd. Wuxu intii uu nolaa ku dadaalayey soo dhicinta xuquuqda dadka Soomaaliyeed, ku baraarujinta dhibaatooyinka gumeysiga iyo kicintooda siyaasadeed

1940kii ayaa Xaaji Faarax Oomaar, asagoo sideetan jirkii ku dhow, la xiray loona masaafuriyey dhulbadeedka Kamaran, Cadan agteeda. Waxa la soo daayey marku caafimaadkiisu aad u liicay mudda yar dabadeedna wuxu ku geeriyooday magaalada Hargeysa, halkaasoo uu ku aasan yahay.

Garaadkiisii siyaasadeed, wadaniyadiisii, mabda' adaygiisii waxay noqdeen kuwa taabta qalbiga dhallinyarada Soomaaliyeed una noqda dhaxalgal. Waxa laysku dayey in la dhiso ururro siyaasi. Abaabulidda ururradaas waxa badanaaba lahaa niman ganacsata ah. Ururro siyaasi ah waxay ka furnaayeen 1935tii Hargeysa, Berbera iyo Burco, ma ayanse ahayn kuwa aad u waaweyn, dadka taageera tiradoodu ma badnayn.

Shaqaalaha CSoomaalida ah oo dawladda u shaqeeya aad

ayey uga xumaayeen sida loo maamulo. Marna ma dhici jirin in aqoontooda iyo kartidooda loogu dhiibo jagooyinka laguna siiyo dallacaadda. Soomaalidu inkastoo dhulka ay ayagu lahaayeen waxa laga sara marreysiin jiray Ingiriiska iyo Hindida. Sidaas darteed 1937 waxa la aasaasay Ururka Saraakiisha Soomaalida. Danaha Saraakiisha Soomaalida waxay ahaayeen kuwa la xiriira Siyaasadda.

Waxa sidaas ku bilawday dareen siyaasadeed oo ka baxsan dana dad yar, waxa maalinba maalinta kale ka soo korodhay waddaniyad kasta siyaasiga ee dadweynaha, taasoo dhalisay isutag iyo dhaqdhaqaaq gobannimadoon oo se soo banbaxay Dagaalkii Dunida ee Labaad ka dib.

## N. F. D.

Tan iyo 1940kii isbeddelka ka dhacay N. F. D. ma ahayn mid aad u qota dheer, ha ahaato xagga dhaqaalaha iyo siyaasadadaba.

Siyaasadda dawladda Ingiriisku, oo ku dhisnayd horistaagga midnimada iyo xoogga ummadda Soomaaliyeed waxa ujeeddadeedu ahayd in lagu horistaaga in ay geeska Afrika ka dhalato dawlad muslin ah oo xoog leh. Dadka Soomaaliyeed markuu Ingiriisku qabsaday N. F. D waxay wadeen dhaqdhaqaaqyo dal doorsi ah, Ingriiskuna wuxu durbaba ku dadaalay sidii uudhaqdhaqaaqyada uga hortegi lahaa. Dadka Soomaaliyeed waxa loo yeelay soohdimo ayan soo dhaafi karin oo waxa loo diiday dhaqdhaqaaqii la xiriiray noloshooda reer guuraaga ah. Arrintaasi waxay dhalisay iska horimaatinno badan oo ka dhexdhacay dawladda Ingiriiska iyo dadka Soomaaliyd. Halgammadaas waxa ugu weynaa kuwii ka dhacay Jubaland intaan Talyaaniga lagu wareejin 1925kii. Keniya gudaheeda waxa deg-

gan beel Soomaaliya oo aan yarayn oo qayb weyn ka qaadatay dhaqdhaqaaqyadii gobanimadoonka ahaa oo ka dhashay Keniya Dadka Soomaaliyeed ee reer N.F.D. aad ayay uga gilgisheen gumeysiga Ingiriiska oo muddo badan ay ka hortageen dhismaha taliskiisa. Nacaybka gumeysiga waxa ka dhashay wadaniyad kasta oo siyaasi oo saldhig u noqotay dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka N.F.D

## XEEBTA SOOMAALIDA EE FARANSIISKA

Jabuuti waxay ahayd magaalo ugu hormarsan uguna shaqa badan magaalooyin geeska ku yaal, sidaas darteed Soomaalida ku nool waxay kulan la yeesheen dad fara badan oo shisheeye ah. Dagaalkii Dunida ee Kiiwaad kumanyaal Soomaali ah ayaa ka mid noqday Ciidammada Faransiiska, waxana Yurub ka dagaal gashay 2.000 iyo dheeraad.

Dagaalkaas si wacan ayey uga qayb galeen waayo 1 000 ka badan ayaa ammaan mutaytay, 400 way ku geeriyootay. Waxa dadkii Soomaaliyeed u caddaatay in aan reer Yurub karti iyo geesinimo midna dheerayn, oo ayan hadday ururaan xuquuqdooda ka dhacsan karaan.

Ururkii u horreeyey oo halkaa ka dhisma wuxu ahaa Ururka Badmaaxyada oo laga aasaasay Jubuuti 1931. Danaha urur ma ayan ahayn kuwa ku kooban arrimaha badmaaxyada, ee waxa u weheliyay hawlaha xagga dawladda uga wakiil oo ay ahaayeen dadka Soomaaliyeed una doodi jiray qayb ay ku lahaayeen dhaqaalaha waddanka

Ku baraarugga siyaasadda waxa kordhiyay qabsashadii talyaanigu uu qabsaday Itoobiya 1935. Talyaaniga iyo Fransiisku waxay isku qabsadeen dhul, taasuna waxay dhalisay dadwey-

naha oo siyaasadda u soo jeesta siiyaana qiima gaara. Soomaalida iyo dadkii kale oo waddanka degganaa waxay la safteen Fransiiska ayagoo ballan qaadaya in ay dalkooda ka daafacaan cadawga Talyaaniga

Soomaalida Jabuuti oo kulanka ay la yeelatay reer galbeedka uu ka badnaa kuwa kale, waxay dhalisay dadka halkaa degganaa garaadkooda siyaasadeed oo aad u kordho, dhisana ururradii u horreeyey oo dalka ka aasaasan. Inkastoo ay sidaa ahayd dhaqdhaqaaq gobannimadoon oo dhab ah kama uusan horreyn Dagaalkii labaad ee Dunada.

## SOOMAALIDA TALYAANIGU GUMEYSTO

Markii ay ka dhasheen dhaqdhaqaayadii gobannimadoonka geeska Afrikada bari, dalka ugu horumarsanaa xagga dhaqaalaha iyo bulshada waxay ahayd Soomaalidii Talyaanigu gumeysto. Gumeysigii Talyaaniga wuu ka siyaasad duwanaa kan Ingiriiska, Fransiiska, iyo Itoobiya. Ujeeddada gumeysiga talyaanigu waxay ahayd in dadka Talyaaniga ah oo aan dhulkooda shaqada ka heli karin la soo dejiyo dhulka wabiyada Shabeelle iyo Jubba u dhexeeya. Danaha dadka Soomaaliyeed iyo kuwa gumeystahana aad bay isaga horyimaadeen, waxyeellooyinka loo geystay dadka beeralayda ee Soomaaliyeed waxa weeye kuwa waddanka gudihiisa aan meel kale ka dhicin.

Dhalashadii waddaniyad kaska siyaasiga ee halkaa ka hanaqaaday waxa weeye mid uu saldhigga u ahaa nacaybka gumeysiga. Soomaalidu waxay aad uga gilgisheen sida foosha xun ee Talyaanigu ula maamulan jiray. Nacaybka gumeysiga Talyaaniga ayaa door weyn ka cayaaray dhalashadii iyo xoogsigii wadaniyad kaska Soomaalida Talyaanigu Gumesysto Dhismihii taliska gumeysiga wuxu ahaa mid waqti badan qaadatay, taas-

na waxa ugu wacnaa dadweynaha Soomaaliyeed oo aad u horistaagay. Dadka Soomaaliyeed, waxa dhib kastaba ha lahaatee, aad ula qiimo weynayd gobanimadooda. Halganka lagala soo hoorjeestay Talyaanigu wuxu ahaa mid aan waqtina joogsan oo marba meel ka qarxanayey.

Talyaanigu taliskiisa wuxu ku hirgeliyey xoog militari oo ay weheliyeen tallaabooyin aad u foolxun oo lagu baabi'inaayey dadka waddaniyiinta ah.

Talyaanigu sina uma oggolayn in waddanka uu ka dhasho horumar siyaasi, sidaa darteed kama uusan dhalan, marna kacaan ballaaran oo u dhigma kii Draawiishta. Inkastoo ciidammada dawladda ay Soomaali ka mid ahayd, haddana marnaba ayaga oo keliya lakuma aamini jirin oo waxa waddanka joogay askar ama Eritreya ah ama Carab ah.

Gumeystaha Talyaaniga waxa maamulkiisa ka mid ahaa caadooyin foolxun kuwaasoo ay ka mid ahayd ahaqa sandullaynta iyo midab takoor. Liidmada, quursi iyo cadaadiska lagu hayey dadka Soomaaliyeed waxay sii kordheen markii taliska dalka Talyaaniga ay faashiistadu gacanta ku dhigtay. Waxyaabahaasi waxay kordhiyeen nacaybka loo qabay gumeystaha waxayna soo dadajiyeen dhalashadii dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka.

Dagaalkii dhexmaray Itoobiya iyo Talyaaniga waxa ka qayb galay askar farabadan oo Soomaali ah, taasina waxay dhalisay in dadka reer magaalka ihi aad u kordhay, taasoo wax dhantartay xoogaysigii waddaniyad kasta siyaasiga. Raggii ka qayb galay dagaalka waxa u muuqatay in waxa lagu dagaalamayaa uu dhulkoodii yahay, waxayna ku baraarugeen kala firirsanaanta ummadda Soomaaliyeed.

Waxa kaloo wax taray dhalashadii dhaqdhaqaaqa gobani-

madoonka horumar dhaqaalaha iyo bulshada oo gaarsiisnayd Soomaaliya. Hawlihii uu Talyaanigu dalka ka qabtay, inkastoo ayan aad u sii weynayn waxay dhaliyeen horumar dhaqaale oo faa'iidadiisa, yaanba loogu tala geline, dad Soomaaliyeed wax ka gaareen. Horumarka ka dhacay xagga dhaqaalaha wuxu keena isbeddel bulshadeed. Isbeddelkaasi wuxu fududeeyey dhalashadii dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka oo se hanaqaa. dhalashadii dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka oo se hanaqaad-day dagaalkii ka dib.

Waxyaabihii horistaagay raajiyayna dhalashada dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka waxa ka mid ahaa dadka tacliinta leh oo aad u yaraa iyo Talyaaniga oo aan haba yaraatee u oggolaan jirin in Soomaalidu qayb ka qaadato siyaasadda dalka.

Sannadku markuu ahaa 1935 waxa jirtay dhallinyaro Soomaaliyeed oo isku dayday in ay abaabulaan urur siyaasi ah. Dhallinyaradaa oo u badnayd shaqaale, markii laga war helay tallaabada ay ku tala jireen in ay qaadaan ayaa waxa laga dhigay qaar la beddelo iyo kuwa la ruqseeyo

## SOOMAALIDA GALBEED

Nolosha dadka Soomaaliyeed ee Itoobiya gumeysato waxay ahayd mid aad u dhibaataysan. Dadka Soomaaliyeed oo muslinka ah iyo Itoobiya waxa waligoodba ka dhexeysay cadaawad. Magaalada Harar waxa ka dhisnaan jirtay dawlad Soomaali ah oo madaxbannaan oo iskeed isu maamusha. Muddadii u dhexeysay labada dagaal ayaa taliska Itoobiya ku xididaytay dhulka Soomaalida, ayadoo ay gumeystayaasha reer Yurub gacan ku siinayeen. Wixi inta ka horreeysay awoodda ay dalka ku leedahay oraah bay ahayd. Taliska Itoobiya waxa gaar u ahayd asagoo aan ahayn mid nidaamsan, ee Askartu dadka ula dhaqanto si burcadnimo ah. Maamulka foosha xun waxa ka

iman jiray askarta iyo shacbiga Soomaalida oo iskala horyimaado dagaallo. Dadka Soomaaliyeed marnaba, uma ayan suuroobin, inta ay illoobaan taariikhdoodii hore, in ay oggolaadaan taliska Itoobiya. Tan iyo 1930kii meesha ugu koonfursan oo Amxaaradu gaarsiisanayd waxay ahayd Dhagax Buur, wixi ka shisheeya in ay si burcadnima ah ku timaado mooye, ma ayan degganayn. Itoobiya tan iyo wixii ka horreeyey isafgaranshawaagii dhexmaray ayaga iyo Talyaaniga, waxa u caddayn in ayan lahayn tabar ay ladka Soomaaliyeed ku oggolaysiiyo taliskeeda. Waxa ku kallifay in ay dhulka ka samaysato saldhigyo rasmi ah, cabsi ay ka qabtay Talyaaniga,

Waxa kaaliyay dhalashada waddaniyad kaska siyaasiga ee Soomaalida galbeed qabashadii Talyaaniga uu qabsaday Itoobiya. Muddadii Talyaanigu dhulka haystay waxa la mideeyay maamulka Soomaalida galbeed iyo tii Talyaaniga hore u gumeysan jiray, taasoo dhalisay in dadka Soomaaliyeed isu furmaan, is dhaafsadaan fikrado, xoojiyaanna xiriirkii ka dhexeeyay. Dadka Soomaalida, oo aad uga fogaa taliska dhexe, ee Itoobiya wuxu weligiiba ku xirnaa Soomaalida Talyaaniga gumeysto. Waxa intaa wehelisay Talyaanigu in uu dhiirri galin jiray dadyowga Muslinka si uu gacan uga helo.

## DAGAALKII DUNIDA EE LABAAD IYO RAAD REEBKII UU KU YEESHAY GEESKA.

Waxa gumeystayaashu had iyo jeer qoraan in dhalaashada wadaniyad Afrika ay tahay mid ay saldhig u yihiin ilbaxnimo laga bartay reer Yurub, hadalkaasuna waa sheekabaralay. Dadka reer Afrika waxa ku kallifay in ay isu tagaan, isgarabsadaan oo istaageeraan, gumeysiga foosha xun ee reer Yurub ay ku hayeen.

Ummadda Soomaaliyeed midnimadeeda weligeed way aqoonsanayd ee ma aha mid uga timid dad kale, waxa ay reer Yurub ka barteen waa taba cusub oo lagu dagaallamo si loo helo gobannimo.

Dagaalkii Dunida ee Labaad aad buu u saameeyey dhalaasha dii kacaankii gobanimadoonka. Dadka Soomaaliyeed markuu dagaalku bilaabmayey wuxu u kala qaybsanaa afar qaybood: Sooaamliyada Talyaanigu xukumay, Soomaaliyada Waqooyi ee Ingiriisku gumeysanayey, N F.D. iyo Xeebta Soomaaliyeed ee Fransiiska.

Talyaanigu waxay ku duuleen Itoobiya Oktoober 3. 1935 May 1936 dhammaanteed gacanta ayey ugu jirtay Agoosto 1940 Talyaanigu wuxu ku dhawaaqay in uu ka qayb galayo dagaalka. Talyaanigii wuxu weeraray Soomaaliyada waqooyi, laba toddobaad ka dibna gacanta ayey ku dhigeen, dhowrkii bilood ee ku xigay waxa iskaga soo horjeeday NFD. Ciidammada Ingiriiska iyo Talyaaniga, jannaayo 1941 ayaa Ilngiriiskii weerar ku soo qaaddeen ciidammadii Talyaaniga Bil dabadeedna, Febraa-

yo 1941 waxay qabsadeen Muqdisho. Maarso Ingiriisku wuxu dib u soo dhacsaday Soomaalida waqooyi. Aprib 6, waxa la qabtay Addis Ababa. Xeebta Soomaalida, oo ay u talisay dawladdii Vichy, waxay is dhiibtay Diseember 1942. Dhulka Soomaalidu deggan tahay dhammaantiina wuxu soo hoos galay talis Ingiriis.

Dagaalkii Dunida ee Labaad wuxu keenay dadkii Soomaaliyeed oo wada hoos yimid Maamulka Milateriga ee Ingiriiska Dalkii iyo dadkii kala xirnaan jiray way isu furmeen, xiriirkii ka dhexeeyey, siiba xagga dhaqaalaha iyo siyaasadda wuu isku xirmay Waxa kale oo uu dagaalkii dhaliyay xiisaha dadku u lahaa arrimaha siyaasadda oo aad u kordha, dadkii ha joogo miyi iyo magaalaba aad bay isugu hawleen ka war haynta isbeddelka siyaasiga ah ee adduunka ka dhacayey taasina waxay keentay dadkii oo aad u xiisa dhibaatooyinka dalka haysta. Waxyaabahaas oo idil waxay saldhig u noqdeen kacaankii saddexaad ee gobanimadoonka ahaa.

## DHISMIHII MAAMULKA GUMEYSIGA IYO HORISTAAGGII DADWEYNAHA SOOMAALIYEED

Soomaalidu meel kastaba ha joogtee gacma furan kuma ayan soo dhaweyn gumeysiga, oo tan iyo maalintii uu caga soo dhigay iyo maalinta laga kiciyey ama laga kicin doono waxay ku jirtay walina ku jirtaa dagaal aan joogsanayn. Dalka Soomaaliyeed waxay waligoodba caan ku ahaayeen in ay geesinimo kala soo horjeestaan wixi xumaan ula yimaado, ayanna sina u oggolaan wax sharaftooda iyo dadnimadooda waxyeelaynaya. Buugaagta ay qoreen reer Yurub marka ay ka hadlayaan Soomaalida waxay ku tilmaamaan dad rabshad badan, taasna macnaheedu waxa weeye in ay yihiin dad aan gumeysiga oggolayn. Halganka dadka Soomaaliyeed kala soo horjeedo dartii ayey gumeystaa u suuroobi waysay in ay siday rabaan uga danaystaan maamulka gumeysi ee ka dhisnaa dalka Soomaaliyeedd wixii 1920kii ka horreeyey.

Dagaalka gumeystayaashu wuxu ahaa mid dhab ah oo layska la dagaallamayo hub, waxyeelladiisuna jirka ku siman tahay, qofkuna haba waayo naftiise uusan waayayn sharaftiisa: iyo dagaal hoose oo aan waqtina joogsanayn oo lagu baabi'inayo dadnimada iyo isku kalsoonida layskuna oggolaysiinayo gunnimo iyo midiidinnimo, waxyeelladiisuna tahay mid duxaysa.

Siyaabihii Soomaalidu uga hortagtay dagaalkaa waxa ka mid ahaa dhaqdhaqaaq soconayey muddo dheer, kuwaasoo uu ugu horreeyo kii Sayidka, iyo dagaal had iyo jeer meel ka qarxanayay oo dhulka Soomaaliyeed wada ekeeya, ku tusaaleeynayana sida ay u qiimeeyaan madaxbannaanida.

Gumeystayaashu markay ka hadlayaan taariikhda Afrika waxaad moodaa in ay yimaadeen dhul aan cidina degganayn ama ay dadka degganaa aad ugu riyaaqeen imaatinkooda, halganka dadka Soomaaliyeedse wuxu muujinayaa in arrintaasi tahay sheekabaraley.-

## HALGANKII N.F.D. IYO JUBALAND

Dhulka u dhexeeya Kismaayo iyo Ras Kiyamboone oo la oran jiray Jubaland iyo N.F.D. waxay galeen qaybta Ingiriisku ku yeeshay kala boobkii dalalka Afrika bari, waxa maamulkoodana loo dhiibay shirkadda Imbradooriyadda Ingiriiska u qaabilsan Afrikada bari, oo gacanta ku dhigtay 1891. Dadka Soomaaliyeed, sida caadadaba u ahayd, waxay gumeystaha kala hortageen dagaal. Sannadkii u horreeysayba dagaallo ayaa dhexmaray Soomaalida iyo Ingiriiska dagaaladaas oo dhaawac halisa lagu gaarsiiyey ninkii magaalada Kismaayo u taliyay, laguna dilay W.G. Hamilton oo u taliyay Ciidammada. Markab Ingiriisa oo la oran jiray H.M.S. Widgeon oo xeebta fadhiyay ayaa magaalada bomba la dhacay. 1896 ayaa markii Shirkaddii maamulkii wadi kari wayday dawladdu la wareegtay. Muddadii u dhexaysay 1905-1912 Ingiriisku wuxu isku dayayay had iyo jeer in uu dadka Soomaaliyeed oggolaysiiyo Taliskiisa, kumase uusan guulaysan Siyaasadiisa, inkastoo uu xoog isticmaalayey. Wajeer wuxu Ciidankii ugu horreeyey geeyey 1912, 4 sano dabadeed ayaase si deg deg ah uu uga baxay markay Saranley isaga horyimaadeen naftoodhurayaal Soomaaliyeed iyo ciidan uu watay Xiddigle Lentemente Ellis, halkaana ku ruux waayeen 80 qof.

1919 ayaa ingiriiska oon dhulka tan iyo waqtigaa rabahad mooye wax kale kala kulmin wuxu goostay in uu gobolka loo yiqiin Jubaland ku wareejiyo Talyaaniga, oo uu hore uga ballan

qaaday. 1925kii ayaa Kismaayo lagu wareejiyey Talyaaniga.

## HALGANKII SOOMAALIDA TALYAANIGA GUMEYSTO

Talyaanigii u horreeyay oo Soomaaliya socdaalka ku yimid waxay warbixintooda ku qori jireen in dadka Soomaaliyeed uu raali ka yahay gumeysiga Talyaaniga, waxase arrintaasi beenowday markii magaalada Marka dhaawac halis ah lagu gaarsiiyay Xiddigle Talmone, Oktoobar 11, 1893, oo ka tirsanaa Ciidanka markabka «Staffetta» oo joogay xeebta, ula jeeddadiisuna ahayd in lagu handado dadka Soomaaliyeed. Warbixintii ka hadlaysay arrintaa waxa lagu caddeeyey in geesiga Soomaaliyeed uu doonayo in uu muujiyo in Soomaalida ka sarreeyoo Yurubta.

Filonardi, markuu sidaa ogaaday, ayuu si uu uga hortago shucuurta geesigaa tallaabadaasu ay dadka Soomaaliyeed ku dhalin kartay wuxu amray in:-

b) Nafti hurihii Soomaaliyeed oo mayd ah gacanta midig laga gooyo; ,

t) La beddelo garsoorihii magaalada:

j) Bombo lala dhoco magaalada Marka ciidankii joogayna la kordhiyo.

Waxase dhacay wixii uu ka cabsi qabay Filonardi oo naftii hurihii fikradda uu qabay oo uu u dhintay ma ahayn mid asaga ku kooban ee waxay ahayd mid lala wada qabo, Soomaalidii si ay arrintaa ku muujiyaan intay magaaladii ka baxeen ayay waxay ka joojiyeen cunnadii ay keeni jireen. Magaalada noloshee-dii ciriiri ayey gashay wax walibana way qaaliyoobeen, inkastoo Shirkadda Filonardi ay raashin dibedda ka keeni jirtay.

## LAFOOLE.

Arrintaa iyo kuwa ka mid ah ayaa ciriiri maamulkii Shirkadda Filonardi. Dawladda Talyaanigu waxay soo dirtay Antonio Cecchi si uu dhibaatooyinkaa wax uga qabto.,Cecchi wuxu goostay in uu taliska ku fidiyo waddanka, sidaa darteedna asaga, taliyii Markabka Staffetta, taliyihii markabka Volturno, 14 nin oo talyaaniga oo ka tirsan Ciidammada maraakiibta iyo 70 Askari oo la soo kiraystay ayaa u ambabaxay xagga boqortooyayada Geledi, 25kii November 1896.

Lafoole ayay ku furteen halkii ayagoo jooga ayaana isla habeen ahaantii weerar lagu soo qaaday. Colkii Soomaaliyeed dib ayay u cesheen, intaa kuma uusanse hakan ee subixii ayuu haddana weerar kale soo ceshay Soomaalidii weerarkii dambe way ku guulaysatay oo 3 badmaax mooye Talyaanigii goobtii ayay ku geeriyoodeen. Lafoole waxay ka mid tahay guulaha waaweyn ee dadka Soomaaliyeed uu ka soo hooyey gumaystaha.

Shirkaddii Filanardi maamulkii Benaadir way ku guulaysan waysay, taas waxa ugu wacnaa dadka Soomaaliyeed horistaagiis sidaa darteed 1896dii ayaa maamulkii waxay dawladdu u dhiibtay shirkad la yiraahdo Benaadir, kamase ayan roonaan oo maamulkii dawladda ayaa faraha ku dhigtay markay shirkaddii danbena u wadi kari waysay. Waxa jira laba maamul oo gumeysi: Mid toosan iyo mid dadban. Talyaanigu wixi ka horreeyay 1923dii wuxu ku maamuli jiray Benaadir nidaamka dadbadan, boqortooyinka Hobye iyo Caluulana ayagaa iskood isu maamuli jiray oo wuxu lahaa xiriir dibloomaasi ah..

Wuxuu magacaabi jiray niman madaxa oo u dhexeeya dawladda iyo dadka kana qaata asaga mushaar. Nimankaasi waxay ahaayeen niman fulinaya danta dawladda oo aan kalsooni ka

haysan dadweynaha. Dawladdu midkii ay ka aragto qiiro waddaninimo, daryeel dan Soomaaliyeed way ka qaadi jirtay madaxtinimada. Had iyo jeerna waxa lagula kici jiray dadka Soomaaliyeed Liidmo iyo quursi, waxana lagu hayay duullaan waligiiba socda oo lagu jilcinaya dadnimadooda iyo isku kalsoonidooda meystuhu wuxu ku dadaalayay asagoon dhiigna ka daadan maaliyad badan ku bixin in uu hirgeliyo siyaasaddiisa gumeysiga ah. Markuu arkayse in ay arrintaan u meel mararyn ayuu inta dhoola caddeyntii meel soo dhigtay, bilaabay dagaal uu xoog iyo xoolo midna kula harin. Dagaalkaa oo socday 1923-1927 waxa ka qayb galay Ciidammo cirka, badda dhulka. Dagaalladaas sida aan arki doono, waxa ku nafwaayey dad fara badan oo Soomaali

1923dii, markii barasaabkii ugu horreeyey ee Fashiistaha ahaa uu ka soo degay magaalada Muqdisho gumeysiga Talyaanigu magaalooyinka waaweyn xeebaha iyo agagaarkooda ma dhaafsiinayn De Vecchi wuxu amar ku bixiyay in dadka hubka laga dhigo si ay u noqdaan dad gumeysiga u hoggaansan. Amarka markii la damcay in la fuliyo, ayaa dadka degganaa Shabeelaha dhexe ayaga oo uu hoggaaminaayo Sh. X. Barsame horistaageen fulinta amarkaa; ayadoo ay u muuqato ujeedaddiisu in tahay in dadka Soomaaliyeed maamul gumeysi lagu soo rogo. SH. Xasan Barsame warqad uu u diray taliyihii Mahadday wuxu ku qoray:

«Dawladdu waxay leedahay Sharcigeeda, innana waxan leenahay Sharcigeena, ma aan oggolin wax ka baxsan. Sharcigayagu waa kan Ilaahay iyoRasuulkiisa. Dadka qaarkiis la mid ma nihin. Ma aadan arag waligaa nin dadkayaga ah oo gogle kuu noqda, ama naag dadkayaga ah oo ku soo aada».

Hadalladaas uu qoray SH. X. Barsame, oo warqadiisa ku

gabagabeeyey in uu dagaal u darban yahay, waxa ka muuqato in ayan dadkaas Soomaaliyeed sinna ugu hoggaansanayn gumeysi oo ay u darbanaayeen in ay naftooda u huraan madaxbannaanidooda.

SH.X Barsane oo aad waayeel u ahaa wuxu ahaa nin caalin ah diintina aqoon dheer u leh oo dadku aad u qaddariyaan. SH. X. Barsame markuu arkay in gumeystuhu ,oo uu weligiiba necbaa, goostay in nolosha dadka Soomaaliyeed farageliyo wuxu go'aan ku gaaray in uu horseedo sida caadadaba u ahaan jirtay wadaadada Soomaaliyeed, dhaqdhaqaaq lagu badbaadinayo muslinimada iyo ummadnimada dadka Soomaaliyeed.

SH. X. Barsame iyo dadkii raacsanaa waxa laga fariistay ceelasha, waxa laga cadaadiyay xaasadka ugu dambeystii waxa lagu soo kiciyey Ciidan aad u farabadan oo sita hub casri ah. Labada Ciidan dhawr jeer ayey dagaallo isaga horyimaadeen, goobahaana waxa ku dhintay naftoodhurayaal Soomaaliyeed oo farabadan. Inkastoo ay dagaalkaa dhibaatooyin badan ka soo gaareen SH. X. iyo dadkiisu isma ayaan dhiibin ee dagaal ayaa lagaga xoog roonaaday. SH. X. Barsame, oo 80 jir ahaa waxa lagu xukumay 30 sano oo xarig ah 13kii jannaayo 1925kii, wuxuna ku geeriyooday xabsiga, magaalada Muqdisho 28 jannaayo 1925.

## HALGANKII SH. FARAJ.

Waxa ka mid ahaa dadkii horistaagay gumeystaha, qiimana u sii yeelay kaalinta weyn oo ay wadaadadu ka qaateen kicinta dadka Soomaaliyeed iyo horistaaga gumeystaha; halgankii SH. Faraj.

SH. Faraj wuxu joogi jiray magaalada Baraawe, halkaasoo uu ka tirsanaa dariiqado Qaadiriyada. Shiikha, oo aad isu hawlli jiray xoojinta dariiqda, tan iyo 1917dii wuxu ahaa wadaad loo aqoosan yahay walinnimo, aad loo qaddariyo, hadalkiisana la tixgaliyo.

SH. Faraj wuxu u guuray 1923dii dhulka u dhexeeya Buur iyo Baydhaba halkaasoo uu ka bilaabay wacdi iyo hanuunin. Dhaqdhaqaaqiisa, oo muddo yar dabadeed soo jiiday dad farabadan oo caama iyo culimaba leh, wuxu u dillaacay dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo lagu horistaagayo gumeystaha. SH. Faraj si uu dadka isugu keeno oo uu dhaqdhaqaaqa u xoojiyo wuxu ku dhaqaaqay in u cambaareeyo qabiilka iyo wixii kale oo dadka kala qaybinayay. Gumeystuhu wuxu durbaba ku dhaqaaqay sidii uu uga hortegi lahaa oo uu ku baabi'in lahaa dhaqdhaqaaqaas. Ugu horreeyntii waxa lagu amray SH. Faraj in uu yimaado Baraawe, markuu yeeli waayana, waxa aaday in ay soo xiraan taliyihii degmada iyo taliyihii Ciidammada Baraawe iyo 10 Askari. Shiikh Faraj wuxu fadhiyey tuulo dhinacyadoo dhan biyo kaga wareegsan yihiin.

Ayadoo labadii talyaani dusha lagu sido si looga tillaabiyo biyaha ayagoo aan qoyaan oogadooda taabaan, ayaa dad ka mid ah qolooyinkii Shiikha raacsanaa soo weerareen. Labadii Talyaani inta biyaha looga wareegay ayaa laga cararay, ayagina, dan iyo xarago iswaydaye, Ciidankoodii bay ka daba carareen ayagoo qoyan oo wasakhaysan. Ciidankii Talyaaniga saddex baa laga dhaawacay, kolkaasay baqdeen oo dib u carareen. Waqtiga wixii ka dambeeyey waxa lagu billaabay dadkii shiikha raacsanaa cadaadis.

si dadku ay u baqdaan oo shiikha uga soo yacaan ayaa la

xirxiri jiray tuulooyinkaana laga gubi jiray. intaa lagagama harine waxa lagu qaaday weerar dad oo Nofembar 17' 1924 waxa iska hor yimid ciidamadii gumaystaha iyo ciidan u hogaaminnayo Shiriif Caliyow oo ahaa ninkii ugu magac weyn Culimadii Shiikha raacsanayd. Goobtaas waxa lagu dhaawacay taliyihii Ciidanka Talyaaniga iyo Askari, waxana lagu dilay saddex nin oo ka tirsan dadkii Shiikha raacsanaa.

Inkastoo dadkii si naxariis darro ah loo ciqaabay oo tuulooyinkii laga gubay, ceelashii laga fariistay, xaasaskii ciriiri laga galiyey, Shiikh Faraj isma uusan dhiibin ee wuxu doortay in uu dagaal ku dhinto. Maajo 31deedii ayaa isaga iyo Ciidankii gumeystaha iska horyimaadeen, goobtaas ayaa asagoo dhaawac halis ahi gaaray lagu qabtay. Asagoo dhiiggiisu daadanayo ayaa loo dhoofiyay Baraawe, halkaa ayuuna ku nafwaayay, isla maalin ahaantii.

QABSASHADII BOQORTOOYADII HOBYA IYO CALUULA.

Sidaan hore u soo aragnay 8 Febbraayo 1889kii ayaa dawladda Talyaanigu waxay heshiisyo dul ka ilaalis ah la saxiixatay Suldaankii Hobya Yuusuf Cali, mid kalena waxay la saxiiatay boqor Cusmaan oo u Taliyay Gobolka Bari. Labadaa heshiis waxa la cusboonaysiiyey 1895tii Boqarrada Hoboyo iyo Caluula heshiisyadaa waxay u haysteen kuwa saaxiibtinimo oo marna aan madaxbannaanidooda ku xadgudbayn, sidaana waxay had iyo jeer ku muujin jireen falkooda.

Oktoobar 1. 1925 ayaa waxa la bilaabay qabsashadii boqortooyada Hobyo. Ugu horreeyntii, waxa laga joojiyay wixii dibedda uga imaanayay waxa laga qabsaday doonyihii, cadaadiskaa waxa loola jeeday in dadku dhaqsi u fuliyo amarkii bara-

saabka ee ahaa in hubka layska dhiibo, Ciidammo ayana dhulka iyo baddaba lagaga soo kiciyay, ishortaaggii ka dhacay boqortooyada Hobyo waxa ugu weynaa dagaalkii Ceel Buur.

Ceel Buur waxa la qabtay 9 Oktoobar. Magaalada Ceel Buur waxa fadhiyay naa'ib waxana ku tiil daar weyn oo derbi dheer ku heerarsan. 21kii Oktoobar ayaa waxa loo dhiibay taliska iyo maamulka degmada Dhamme Franco Carolei. 23 Oktoobar, ayagoo fulinaya amar barasaabku bixiyeyna wuxu xiray Xirsi Guushaa, oo naa'ib ka ahaa jiray magaalada iyo Maxamuud Maxamad oo ku magac dheeraa Godogodo, oo lays yiri waxay horjoogaan uruurinta hubka.

Dhamme Carolei wuxu madax ka dhigay nin la yiraahdo Cumar Samantar, oo toban sano ka hor naa'ib ka ahaan jiray magaalada. Gumeystuhu wuxu is yiri ninkaa oo ka caraysan jagada muddada ka hor laga qaaday ayaa danahaaga u fulin doona si daacadnimo ah. Kuma tashan in waddaninimadiisu ka sara mari karto danihiisa.

Dhamme Carolei wuxu Cumar Samantar ku amray in uu .. raro daarta ay ku jireen asaga iyo Ciidamadiisu, harka farabadan oo Suldaanku lahaa. Cumar Samatar wuxu garty in amarkaasi u fududenayo in uu Ceelbuur ka xoreeyo taliska gumeysiga. Cumar Samatar wuxu soo watay rag tiradoodu gaarayso 40, markii lagu amray in uu shaqada dadajiyana wuxu waraystay in uu Ciidanka kordhiyo. Raggaa uu horkacayey Cumar Samatar waxay wateen billaawooyin u qarsoon, markii la gaaray waqtigii raashinka oo askartu hub dhigatay. Ayey weerar ku qaadeen, oo banaadiiqdoodii ka qabsadeen. Waxa halkaa ka bilawday dagaal socday laba maalmood. Dhamme Carolei markii ugu horreeysay ayaa la dilay, Askartiisii oo

ahayd 79 waxa ka baxsaday 22 badankooduna dhaawacan yihiin oo u cararay Bud Bud, halkaasoo ay tageen 15kii Nofeember 1925.

Halgankaasi aad buu u ballaartay oo wuxu ku fiday gobolkii oo dhan, dabkii Ceelbuur ka ololay wuu noqon kari waayey mid dhaqsi u dama oo wuxu ku kallifay gumeystaha Talyaaniga ah in uu hakiyo siyaasaddiisii dhul boobka ahayd. Gumeystuhu wuxu go'aan ku gaaray si uu arrintaa uga hortago in uu masaafuriyo Xamar Baqor Cali Yuusuf iyo qoyskiisa iyo in qof kasta oo Soomaali ah oo hub laga helo in isla goobta lagu toogto. Waxa la isku dubba riday urur cusub oo ay u taliyaan G. S. Dalmazzo iyo G Dhexe Splendorelli. Gaashaanle dhexe Splendorelli iyo Ciidankiisii markay soo indha indhheeyeen saldhiggii looga duuli lahaa Ceelbuur ayay soo noqdeen. Intay dhexda soo socdeen ayaa waxay is haleeleen col Soomaali ah goobtaasna waxa ku dhintay Splendorelli iyo laba Askari, laba kalena waa lagu dhaawacay. Waxa la isugu geeyey degmooyinka Ceelbuur iyo Dhuusamareeb 3 urur oo hub casri ah sita. Colkii Soomaaliyeed uu horkacayey Cumar Samatar, markay arkeen in aanay si cad uga hortegi karin Ciidamada gumeystaha ayay waxay go'aan ku gaareen in ay ka tallaab aan s oohdin isku sheegga. Intii ayan arrintaa ku dhaqaaqin ayaa waxay is haleeleen Ciidan gumeystuhu leeyahay. Goobtaas, inkastoo labada dhinacba dhiig badani kaga qulqulay waxa ku guulaystay Cumar Samatar iyo Colkiisii.

Dagaalkii Ceelbuur oo bilowday 9 Nofeember 1925 socdana tan iyo 14 Jannaayo 1926 wuxu ka mid yahay halgammada waaweyn oo ummadda Soomaaliyeed kala hortagay gumeystaha.

Sidaa si le'eg Talyaanigu dhibaatooyin iyo dagaallo farabadan ayuu kala kulmay qabsashadii boqortooyadii ka dhis-

nayd Gobolka Bari. Boqor Cismaan markay u caddaatay in uu Talyaanigu doonayo in uu ula yimaado gumeysi cad, ayuu wuxu bilaabay in wixii hub ah oo laga rari karo magaalooyinka loo daadgureeyi miyiga, si aanu Talyaaniga gacanta ugu gelin. Shir ayuu isugu yeeray dadkii boqortooyada degganaa. Shirkaa oo lagu qabtay ceelasha Dhuur, waxa go'aan lagu gaaray in lagu gacan sayro amarka dawladda.

23kii Oktoobar ayaa Boqor Cismaan si rasmi ah u ogeysiiyey dawladda Talyaaniga in aan boqortooyadu oggolayn wax hub ah in ay dhiibto haba yaraatee. Oktoobar 24keedii ayaa waxa baroosinka ku soo xirtay magaalada Bandar Bayla xeebteeda markab lagu magacaabo «Campania» oo uu la socdo barasaabkii dalka. Xirsi Cismaan, oo ah inanka boqorka, oo magaalada naa'ib ka ah iyo dadkii degganaa oo idil waxay u guureen miyiga ayagoo filaya in Talyaanigu weerar ku soo qaado

...ktoobar 28keedii ayaa ciidan Talyaaniya wuxu damcay in uu xoog ku galo magaalada Baargaal, waxase lagaga hortagay dagaal. Talyaaniga waxa goobtaa kaga dhintay saddex badmaax, qaarna waa lagu dhaawacay. Wixii waqtigaa ka dambeeyayna waxa socday dagaallo isdabajoog ah.

Talyaanigu si uu uga aargoosto dadkii kaga dhintay magaalada Baargaal wuxu bambo la dhacay oo burburiyey magaaladii, asaga oo doonayana in uu bajiyo geesiyaasha Soomaaliyeed.

Nofembar 26keedii Soomaalidu weerar ayay ku oo qaaday munaaradda Ras Cassayr, waxana halkaa lagu dilay 3 Askari iyo ninkii munaaradda hagaajinayey Aldo Ciomo

Qalcadda Taleex oo kor laga sawiray.

Taleex oo gudaha laga sawiray.

Disembar 2deedii waxa Soomaalidu weerar ku qaadday Hurdiyo waxawana la burburiyay Warshadda Cusbada, goobtaa waxa lagu laayey dad aan yarayn. Mar labaad waxa ayana la weeraray munaaradda oo lagu dilay Dhamme Gatti. Waxa intaa weheliya dagaallo isdabajoog ah oo ayana ka dhacay magaalooyinka Qardho, Karin, Botiyaale iyo meela aan halkan lagu wada koobi karin oo dhammaantood muujinaya sidii Soomaalidu u horistaagtay gumeysiga.

Talyaanigu wuxu dabkaa ku damiyay oo u suuragaliyey in uu qabsado boqortooyadii Gobolka Bari, weerarro ay wadajir uga qaybgaleen ciidammada Badda, Cirka iyo Dhulka.


# KACAANKII SAYID MAXAMED CABDILLE XASAN

Dhinaca waqooyi ee Ingiriisku gumeysan jiray waxa ka dhashay dhaqdhaqaaqii ugu qiima weynaa halgankii Soomaalidu kala horjeestay gumeystayaasha aadna u saameeyey taariikhda cusub ee Soomaaliya: Kacaankii Sayid Maxamed Cabdille Xasan.

Diintu waxay waligeedba ka mid ahayd tiirarka ay ku dhisan tahay midnimada ummadda Soomaaliyeed. Dawladahii u horreeyay y oo ka dhasha dalka Soomaaliyeed waxay ahaayeen kuwo ku dhisan diinta Islaanka, waxana ka mid ahaa Saylac, Ifaat, Harar.

Sidaa darteed ayan la yaab lahayn haddii dhaqdhaqaaqyadii u horreeyey oo gumeysiga lagala hortagay ay hoggaaminayeen niman culumada diinta aqoonta u leh ah. Intaa waxa weheliya oo suura galisay arrintaa, ayadoo ururka kaliya oo ku dhisan nidaam kana baxsan qabiilka ay ahaayeen dariiqooyinka.





Qalcadda Taleex oo kor laga sawiray

Taleex oo gudaha laga sawiray

Soomaaliya gudaheeda qarnigii 19aad waxa jiray oo xoog ku lahaa laba dariiqo, kuwaasoo ahaa Qaadiriyada iyo Axmadiyada. Qarnigii 19aad dabayaaqadiisii ayaa waxa ku soo kortay Saalixiyada oo ah qayb ka tirsan Axmadiyada oo uu aasaasay Sayid Maxamad Saalix (1853-1917). Dariiqada oo ahayd mid isku hawsha adkaynta tiirarka diinta iyo kacaamaynta dadka muslinka ah, waxa ka tirsanaa Sayid Maxamad Cabdille Xasan oo ku qaaday gumeytayaasha halgan soconayey 20 sano.

Sayid Maxamad Cabdille Xasan wuxu ku dhashay balliga Gobaysane oo ku yaal degmada Buuhoodle waqti lagu qiyaaso 1856kii, kolkuu ahaa 7 jir ayuu bilaabay in uu barto Qur'aanka, wuxuna ku dhammeeyey toban jirkii. Isla sannadkaa waxa geeriyooday Aabbihii, asna wuxu noqday kaaliyihii macallinkiisa. Maxamad, markii uu qaangaaray wuxu go'aan ku gaaray in uu noloshiisa u hibeeyo barashada iyo faafinta diinta Islaanka asagoo aan wali labaatan gaarin ayaana la aqoonsaday Shiikhnimadiisa.

Shiikh Maxamad wuxu bilaabay in uu u socdaalo magaayinka caanka ku ah aqoonta diinta ee ku yaal Afrikada bari, sida caadada u ahayd wadaadada Soomaalida. Muddo 9 sano ah ayuu wuxu ku hawshoonaa kororsashada aqoonta diinta iyo baariddeeda 1891dii ayuu wuxu ku noqday dhulkiisii, halkaasoo oo ku guursaday.

Saddex sano dabadeed ayuu asagoo ay weheliyaan wadaado kale aaday Xajka wuxuuna halkaa kula kulmay SH. Maxamadd Saalax oo uu wacdiigiisii aad ula dhacay, wuxuna ka mid noqday dariiqada Saalixiyada. Markuu ku soo noqday Soomaaliya wuxu bilaabay in uu hirgeliyo dariiqadiisa. Wuxu degay Berbera, wuxuna bilaabay in uu dadka ka wacdiyo Cunidda qaadka, dhuuqidda Sigaarka iyo jeclaysiga raaxada iyo

nolosha dabacsan, kuna guubaabiyo in ay ku soo noqdaan waddada dhabta ah ee Islaanka.

1891dii ayaa waxa laga furay Daymoole meel lagu faafiyo diinta Masiixiga ah oo ay leeyihiin baadariyaal Fransiis, halkaana lagu xereeyay ilmo Soomaali ah oo agoon ah si loogu Kristaamiyo — Sayid Maxamed arrintaa aad bay uga caraysiisay oo wuu garawsan waayey dhallaan Soomaaliyeed oo la krishtaaminayo. Sayid Maxamad wuxu xoojiyay wacdigiisii, intii waqtiga ka dambaysay waxana kordhay nacaybkii uu u qabay gumeystayaasha. Wuxu bilaabay in uu dadka ugu baaqo in ay kacaan oo gumeystaha jihaad ku qaadaan.

Baaqiisaas waa loo dhug yeelan waayey waxana ugu wacnaa badnaashaha qaadiriyadu ay ku badnayd Berbera iyo ganacsatada oo xiriir ganacsi la lahayd Ingiriiska sidaa darteed Sayid Maxamad wuxu u guuray miyiga halkaasuuna ka waday wacdigiisii iyo baaqiisii.

Sayid Maxamad wuxu ahaa nin quruxsan oo gabayaa af-tahamo leh ah, geesinnimadiisii cadawgiisuba wuu u aqoonsanaa. Wuxuna ahhaa nin deeqsi ah oo ku kalsoon naftiisa iyo mabda'iisa. Faafinta diinta waxa u dheeraa qaboojinta dagaallada. Waxa Sayidka u suurageliyey in halgaankiisu uu noqdo muddo yar dabadeed, mid dhulka Soomaalida oo hdan laga wada ogsoonyahay gabayadiisii qiimiga lahaa heerka sarena gaarsiiyey suugaanta Soomaalida. Gabayadiisa oo ka hadlaya gobanimo, midnimo iyo gumeysi nacayb waxay noqdeen kuwa dadka Soomaaliyeed uu dhegta u wada laalaadsho una faafa sidii ayadoo idaacad laga sii daynayo.

Sannadku markuu ahaa 1899 ayaa Xarunta Sayidka waxa tegay koox ilaalo ah, mid ayaga ka mid ah ayana wuxu Sayidka

ka iibiyay bunduq. Ilaaladii markay dib ugu noqotay Berbera waxay sheegeen in Sayidku ka xaday buntuq, sidaa darteed ayaa Qunsulkii Ingiriisku wuxu u soo diray warqad uu ku waydiisanayo in dib loogu celiyo buntuqii laga xaday. Sayidku hadalkaa aad buu uga carooday wuxuuna go''aan ku gaaray in uu ku dhaqaaqo dagaalkii uu weligiiba laabta ku hayey. Shir weyn ayuu ku qabtay Burco, halkaasoo uu ku celceliyay baaqiisii ahaa in gumeystaha lala dagaallamo. Aad baa arrintaa loogu riyaaqay waxana dadkii Sayidka raacsanaa ku soo biiray dad farabadan, waxana ciidankiisa lagu qiyaasaa in uu gaaray 5.000. Sebtember 1. 1899kii wuxu u diray Qunsulkii Ingiriiska warqad uu ku edaynayo Ingiriiska in uu cadaadiyo dadka muslinka ah, waqtigaa wixii ka dambeeyana Ingiriisku wuxu ku tiriyay in uu ku caasiyay taliska Ingiriiska. Maarso 1900 ayaa Ciidan xabashi ah, oo qawlaysata ah wuxu Soomaalida ka dhacay xoolo fara badan, ciidan Daraawiish ah ayaa xoolihii uga daba tegay Jigjiga oo soo dhiciyey. Waqtigaa wixi ka dambeeya gumeystayaashu waxay bilaabeen in ay xoogga Daraawiishta tixgeliyaan.

Itoobiya iyo Ingiriisku waxay ku heshiiyeen in ay wadajir ula dagaallamaan Draawiishta. Gaashaanle dhexe Swayne ayaa lagu xilsaaray in uu isku dubba rido ciidan ka hortaga Draawiishta. Muddadii u dhexeysay 1901 iyo 1904 waxa la abaabulay afarduullaan, kuwaasoo Itoobiyana qayb weyn ka qaadatay Talyaaniguna gacan ka geystay.

Dagaallada waxa ugu weynaa dagaalkii Cagaarweyne 17.3.1903 oo ka dhacay buuraha Gumburo oo ka xiga xagga bari Wardheer. Dagaalka Ingiriiska waxa ka gaartay guuldarro oo goobta waxa kaooa nafwaayey 19 Sarkaal oo Ingiriisa iyo 189 Askari oo dadyowga uu gumeysto ah.

Draawiishta oo ayagaba dagaalka j ogtada ahi uu dhibaatooyin u geystay waxay u baahdeen nabadgelyo. Sayidku heshiis nabadeed ayuu kula saxiixday Ilig 5tii Maarso, 1905, Cav. G. Pestalozza oo qunsul uga ahaa Talyaaniga Cadan. Heshiiska waxa Sayidka loo aqoonsaday dhulka u dhexeeya boqortooyada bari iyo tan Hobyo, waxa loo aqoonsaday in asaga iyo dadkiisu ay iskood u tashadaan oo cidday doonaan ganacsi la yeeshaan. Gumeystuhu kuma tali jirin in uu Draawiish sida uga haro ee laftiisuna waqtigaa taag iyo tabar ma uu hayn.

Nabadgelyadaasi waxay socotay tan iyo 1908. Muddadaa nabadda lagu jiray Sayid hiyiga kuma hayn in dagaalkii sidaa ku dhammaday ee wuxu ku jiray tabaabulsho iyo kacaamayn Soomaaliyeed. Gumeystayaashu ayaguna gacmaha iskuma haysan oo intaa waxay ka shaqeynayeen siday ku baabi'in lahaayeen kalsoonida Sayidku ka haysto dadweynaha Soomaaliyeed. Waxa wafdi loo diray Sh. Maxamad Saalax oo waxa la isku dayey in laga dhaadhiciyo Sayid Maxamad dariiqada iyo diintaba in uu ku xadgudbay. Dirdiradaas iyo dibindaabyo gumeystuhu waxba waa ku keeni waayey.

Ingiriisku wuxu go''aan ku gaaray in uu u guuro magaalooyinka ku yaal xeebaha halkaana isku daafaco. Ingiriisku wuxu had iyo jeer ku andacoon jiray in Draawiishtu ay laynayso dad isaga heshiis la leh oo dagaalkiisaas uu ayaga ku daafacayo, hase yeeshee markay dantiisii iyo toodu ay iska hor timid meel daleela ayuu kaga tegay.

Ingiriisku wuxu filayay markuu ka soo dhexbaxo in Soomaalidu qabiil qabiil isu layso oo Draawiishtu kala firdhato, sidaas ma aayan noqon oo Draawiishtii way sii xoogeysatay.

1912kii, markii la arkay in aan siyaasaddii hore lagu guulaysan ayaa Ingiriisku mar kale isbeddelay oo waxa la isku du-

way ciidan rakuublay ah oo uu u taliyo Richard Cornfied. Draawiishta iyo colkii Richard Cornfield ayaa waxay isku ha leeleen buurta Dulmadoobe 1913kii, goobtii ayana lagu dilay Cornfied Colkiisiina la jabshay.

Tan iyo 1918kii Ingiriisku wuxu waday siyaasaddiisii ahayd xeeb isku difaaca. Dagaalkii Koowaad ee Dunida oo socday awgeed. Markuu dagaalkii dhammaaday ayaa Ingiriisku wuxu isku soo dubba riday duullaan ay u wada dhanyihiin Ciidammada cirka, dhulka, badda. Sannadkii 1920 bilowgiisii ayaa tambo lala dhacay Taleex. Taasi waxay ahayd markii ugu horreysay oo dad Afrikaan ah lagula dagaallamo dayuurado, Draawiishtina way kala firdhatay. Sayidka iyo col uu hoggaaminayey waxay aadeen Iimay oo ku taal xuduud ku sheegga Itoobiya halkaa ayaa geesi hoggaaminayey kacaankii labaad ee dadka Soomaaliyeed ku geeriyooday Nofember 23. 1920.

Had iyo jeer waxa gumeystuhu isku dayaa in uu shaki galiyo ujeeddadii kacaankii Sayidka. Taasi ma aha mid muran gali karto oo Kacaankii Sayidku wuxu ahaa kacaan gobannimadoon ah oo la doonayo in dadka Soomaaliyeed looga xoreeyo talisyada gumeysiga.

Dhinaca galbeed mudda dheer ayay ka qaadatay Itoobiya guda galka Soomaaliyeed iyo oggolaysiinta taliskeeda. In badan baa Askar ku sheegga dawladda Itoobiya oo ku noolaan jirtay boob iyo dhac dadka Soomaaliyeed isaga horyimaaddeen dagaallo. Itoobiya waxay had iyo jeer isku dayi jirtay in ay dadka Soomaaliyeed cashuur ka qaadato, waxase arrintaa ka raaci jiray jab iyo guuldarro.

Sannadku markuu ahaa 1915 waxa Ciidammada Itoobiya laga dilay 150, Askari sanooyin dhan ayay dabadeed ku dhici

jirin in ay Soomaalida dhexasha. Itoobiya kumay qaadin xoog dadka Soomaaliyeed ee waxa u gacangeliyey gumeystayaasha reer Yurub markay kala boobayeen Geeska Afrika oo Itoobiya garabsaday. Dadka Soomaaliyeed oo deggan Xeebta Fransiisku gumeysto sida si le'eg ayay gumeysiga kala hortageen dagaallo iyo diidmo. Fransiis dhibaato la'aan kuma uusan qabsan dhulka.

Khor Ambado waxa lagu laayey Ciidan aan yarayn oo Faransiis ah. Inta jid tareemada dhismihiisu socdayna weerarro fara badan ayaa Soomaalidu ku soo qaaday ayagoo diidan in dhulkooda loo tashado, waxana ugu weynaa dagaal lagu dilay 7 nin oo Faransiis ah.

Wixi ka horreeyey Dagaalkii Dunida ee Koowaad maamulka gumeystuhu wuxuu ku sinnaa Jabuuti oo wuxuu ku guulaysan dhismahii maamulka Gumaysiga iyo waxyeelooyinkiisii.

## DHISMIHII MAAMULKA GUMEYSIGA IYO WAXYEELOOYINKIISII

Gumeystayaashu waxay ku andacoodaan in ay u keeneen dadka ilbaxnimo, haddaba aan aragno waxa ay u qabteen dadka Soomaaliyeed muddadii dheerayd ee ay dhulka gumeysanayeen.

Soomaaliyada Talyaanigu gumeystay waxa maamulkeeda qabtay, sidaan hore u soo aragnay Sharikaddii Filonardi. Ishortaagii dadweynaha Soomaaliyeed, siiba dagaalkii Lafoole ayaa, wuxu ku riday fashal iyo cimri deg deg. Maamulka Shirkaddaasi wuxu socday muddadii u dhexaysay 1893-1896. Shirkaddu muddadii yarayd oo ay dhisnayd waxay gacanta ku dhigtay ganacsiga magaalooyinka Baraawe, Marka, Muqdisho, Cadale, Warshiikh, waxayna magaalooyinkaa oo idil ka dhistay maamul gumeysi. Shirkaddu meelaha ay u talisay waxay gacanta ku dhigtay maamulka caddaaladda iyo nabad gelyada. Kolkay caddaatay in ay ku guulaysan wayday sugidda nabad gelyada ayaa waxa maamulkii lagu wareejiyay shirkad cusub oo lagu magacaabi jiray Benaadir. Waxa la kordhiyey askartii dalka fadhiday, Abriil 1907 waxa duullaan argoosi ah lagu qaaday tuulooyinkii ka qayb galay dagaalkii Lafoole.

Waxa la gubay oo dambas laga dhigay Lafoole iyo tuulooyin kale oo dhowr ah, madaxdii Soomaalida ahaydna waa la masaafiriyay

Si dhible ayaa Barlamaanku Talyaaniga ugu oggolaaday dawladda in ay maamulka xeebta Benaadir u dhiibto Shirkadda Banaadir sidaana waxa ugu wacnaa dadweynaha Talyaaniga oo

aan jeclayn gumeysiga. Shirkadda Benaadir laba sano ayey dalka ku maamulaysay heshiis meel ku gaar ah oo dhexmaray ayada iyo dawladda.

Intay Shirkadaasi dalka maamulaysay wax horumar ah oo laga gaaray xagga dhaqaalaha iyo bulshada haba yaraatee ma jirto Hawsha Shirkaldaasi waxay ku koobnayd ayadoo aruursato cashuurta dalka ka soo gasha ganacsiga. Inkastoo uusan ahayn mid aad u ballaaran, ganacsiga dadka wuu jiray xeebta Benaadir. Shirkadda Benaadir waxba kama ayan qaban ciribtiridda addoonsiga, waxaba lagu eedeeyey Talyaanigii Shirkadda u shaqeynayey in ay ayagu dad lahaayeen, markii arrintaasu soo banbaxday waxa halkaa ka dhacay ceeb iyo foolxumo weyn, waxana khasab ku noqotay dawladda in ay si deg deg ah ula wareegto maamulka Benaadir Marsh 15 1905 ayaa Shirkaddii Benaadir maamulkii ku wareejisay Dawladda.

Waqtigaa wixii ka dambeeyey siyaasaddii dalka lagu maamulayay way isbeddeshay, oo dawladdu waxay bilawday in ay ku dhex gasho dadka xoog iyo amar ku taaglayn, faragelisana nolosha dadka; Cadaadiskaas wuxuu keenay dadkii degganaa magaalada Marka Miyigeeda oo ku kacaa dawladda' weerarna ku qaada Oktoobar 27—1905 tuulada Jilib oo askar dawladeed fadhiday, markay dagaalkaa ku guulaysteen waxay hareerayeen magaaladda Marka, xagga barrigana ka go'doomiyeen dadkii reer Marka ee la halgamayey Talyaaniga waxay wafdi udireen Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo soo siiyey hub halgankoodana ku dhiiri galiyey. halgan kaasi wuxuu garansiiyey dawladda in aan si dhib yari ah dad lagu qabsan karin; waddanka khayraadkiisana haddaan xasillooni jirin in aan laga faa,iidaysan karin

Saddex sano ayaa nolosha magaalada Marka ciriiri ku jirtay Fabaraayo 1907 ayaa Magaalada dhanaane, oo dagaallo faraba-

dan goob u ahayd, isaga horyimaadeen ciidamo Soomaali ah iyo kuwo Taliyaani ah inkastoo Soomalida goobtaa looga gacan sareeyey, isam ayan dhiibin.

Bishi May 1 1907 wasiirka arrimaha dibedda ee Taliyaanga Titton, warqad uu u qoray barasaabka cusub ee Banaadir uu ku falanqaynayo Siyaasadda lagu maamulayey waxa lagu amray barasaabka in dadyowga deggan wabiga Shabeelle agagaarkiisa loo muujiyo dawladda gacan sarraynteeda, si looga tabaabushaysto sidii looga faa'iidaysan lahaa khayraadka. Si lagu hirgeliyo siyaasaddaas waxa aad loo kordhiyey ciidammadii, waxa la bilaabay in la kala qaybiyo oo laysku diro Soomaalidii si tabardarraddooda looga faa'iidaysto Juun 24. 1908 barasaabkii Benaadir wuxu waraystay in awood buuxda oo militari la siiyo si waddan ka xoog ugu qabta, waxana lagu qaaday weerarro dadkii Soomaallyeed oo diidanaa gumeysiga. Weerarradaa gardarrada ah waxa magacaabi jiray hawlaha nabadaynta. Tan iyo Sebtember Talyaanigu wuxu gacanta ku dhigay magaalooyinka Malable, Awdheegle, Afgooye oo wuxu wada qabsaday dhulka u dhexeeya xeebta iyo wabiga Shabeelle

Sebtember 24keedii waxa isaga horyimid meel Balcad agteeda Ciidammadii Talyaaniga iyo Ciidan Draawiish. Siyaasaddaas dhulbaallaarsigaa waxay socotay tan iyo 1914, waqtigaa aya waxa loo hoos galay talis gumeysiga Talyaaniga dhulka Buulo Berde, Baydhaba iyo Luuq. Waxa dhulka loo qaybiyey Lix degmo oo uusan Xamar ku jirin, kuwaasoo kala ahaa Marka, Luuq, Ilaha (Cadale) Baardheere iyo Jubbo, oo ay u taliyaan rag militari ah oo awoodooda sida ay doonaan ugu camalfala muddo yar dabadeedna waxa la kordhiyey degmooyinkii.

Waxyaabahaas oo idil waxa loo galay si uu Talyaanigu u helo taag uu ku boobo dhulka hodanka ah ee u dhexeeya laba-

da Wabi. Siyaasaddii Talyaanigu ka dhaqan geliyey dalka Soomaaliya oo uu kaga dhacay dadkeenna khayraadkoodii iyo xoogoodii waxay ahayd mid aad u cambaaraysan.

Talyaanigii dawladdu soo kaxaysay oo ay dejisay dhulka Soomaaliya, lama siin jirin dhul bannaan oo ay beertaan, inkastoo aan dhul caynkaas ihi dalka ku yarayn, ee sida loo soo wado ayaa inta la geeyo dhul dad Soomaali ihi beeranayo oo ku soo tiir iyo tacab beelay, ayaa in alla intay ka doonaan dhulka iyo dadka loo xerayn jiray.

Dadkii Soomaaliyeed oo waligood iskood u shaqaysanjiray, way kari waayeen in ay u shaqeeyaan dad kula dhaqmaya quursi iyo liidmo, markaasay isaga carareen dhulkii ay ayaga abkood iyo isirkood ka dhaxleen. Kolkii la waayey dad oggol in ay gumeystaha u shaqeeyaan, ayaa waxa la soo rogay shaqo sandullayn. Siyaabaha loo dhaqan galiyey shaqo sandullayntu way kala duwanayd. Waagii hore waxa degma walba lagu amri jiray in ay keento qaybta ayada ku soo aado. Dadka loo qaadanaya shaqa sandullaynta waxa magacyadooda soo qori jiray niman madax ah oo u adeega Faranjiga dawladana lacag ka qaata. Nimanka adeega faranji ah waxa la raacin jiray askar soo khasabta dadkii. Dadka askarbaa degma kasta ka soo wadi jirtay, oo lug ku keeni jirtay magaalada Shalaamhood, halkaa ayaana Talyaaniga beeralaydaa loogu kala qaybin jiray, oo nin walba la siin jiray inta uu u baahan yahay. Mid wlaba inta uu kaxaysto dadka uu qaybta u helay oo xero weyn oo uu ku dhex wareejiyey beerta ku aruursado ayaa halkaa askar ugu ilaalin jirtay. Dadkaa subixii ayaa beerta loogu shaqayn, maqribkiina xeradooda ayaa, sidii ari oo kale lagu aruurin jiray.

Wax kastoo hela lagama soo bixin jirin, kii xanuunsadana halkiisa ayuu ku dhiman jiray. Midkii geeriyooda waxa lagu

beddeli jiray mid cusub. Shaqo sandullayntaasi waxay u socon jirtay dadkaas bil qura. Muddada yaraanteeda, ma ahayn mid loogu naxariisanayo dadka, ee nolosha caynkaasa caafimaadkooda ayey wax weyn u dhimi jirtay, waxtarkoodu aad buu u yaraan jiray. Bil dabadeed waxa la keeni jiray qolooyin cusub oo xoog leh, kuwii intaa ka badbaadayna waa la sii dayn jiray.

Maamulka caynkaasi oo ayan muuqano wax uu adoonsigii dhabta ahaa kaga duwanaa, waxa dhaliilay beeralaydii Talyaaniga sida darteed, ayaa waxa lagu beddelay mid xagga beni'aadanimada aad mooddo in uu dhaamo. Qofkii kaliga oo la soo khasbi jiray waxa lagu beddelay qoys. Nin walboo beeralay ah oo Talyaaniya waxa la siin jiray dhowr qoys oo uu guri dejiyo si joogta ahna ugu shaqaysto. Qoyskaasi awood uma ayan lahayn in ay iska tagaan oo qofkii cararo inta la soo qabto ayaa dib loo soo celin jiray.

Hawlaha guud ay dawladdu leedahay waxa qaban jiray hadba dadka meesha ay ka socdaan deggan ayagoo aan wax qimal gud ah la siinayn. Dadka waxa loogu shaqayn jiray si naxariis la'aan ah, inta hawlahaasi socdaanna aad ayay u maran jireen. Waxa jiro keli ku yaal magaalada Jannaale, wabiga geddiggiisa midig, oo la magac baxay keli Asaay, taasoo lagu tilmaamayo dumarkii faraha badnaa ee asayda loo saaray, markii raggoodii halka ku le'day. Talyaanigu aad ayuu uga cunaqabateeyey dadka Soomaaliyeed xagga waxbarashada. Qofka Soomaali waxa la bari jiray af Talyaani qura, mana uusan dhaafi karin fasalka saddexaad, siiba hadduu qof fahma leh oo waxbaranaya yahay. Ujeeddada laga lahaa waxbarashadaas waxay ahayd in uu gumeystuhu helo dad afgaranaya oo uu midiidinsado.

Askar fara badan oo Soomaali ayaa ka tirsanayd ciidammada Talyaaniga, oo ayaga ayaa u suurageliyey in uu si fudud ku

qabsado Itoobiya, hase yeeshee wax farsama lama bari jirin. Qof Soomaali ah oo loo dhiibay jago taliye, ma jirin ha ka shaqeeyo ciidammada ama beeraha. Nolosha Talyaaniga iyo Soomaalidu way kala oodnayd. Dugsiyada, Cusbitaalada, basaska iyo meelaha dadweynuhu ku kulmo oo idil wey u kala qaybsanaayeen dadka caddaan iyo dadka madow.

Qofka Soomaali ah waxa khasab ku ahayd in uu nin kasta oo cad oo ka horyimaada salaamo. Qofka Soomaaliga ma uusan ka qayb gali karin ganacsiga dibedda. Sharciyada midabtakoorka waxay aad u sii foolxumaadeen, intii fashiistadu taliska haysatay oo waxa la gaaray in la yiraahdo ninkii Soomaali ah dsar qurux leh asagu ma seexan karo ee waa inuu nin cad ka kiyeero. Qofka Soomaaliga si uusan marnaba sinnaansho u haweysan, waxa laga horjoogasan jiray waxyaabaha nin cad haysto oo idil.

Dhinaca waqooyi ee Ingiriisku gumeysto labaatankii sano ee uu waday dagaalkii gardarrada ahaa ee uu kula dagaallamaayey geesiyaashii Soomaaliyeed ee uu hoggaaminayey Maxamad Cabdulle Xasan, dad waddanka deggan wuu martay oo in lagu qiyaasoo bar ka badan ayaa le'atay, kuwa Daraawiish ahaa oo Ingiriisku laayay iyo qaar u dhinaty dhibaatooyinkii iyo abaartii la xiriiray dagaalka.

Markuu dagaalkii dhammaaday wax mashaariica oo la bilaabay si lagu ciribtiro dhibaatooyinkii dagaalka ka soo gaaray dalka iyo dadka haba yaraadaanee ma ayan jirin.

Maamulka Ingiriiska waxba kama uusan duwanayn kii shirkadihii Filonardi iyo Benaadir oo in uu cashuurtaas ka gaaho dekedaha aruursado mooyee wax kale ma uusan qaban jirin. Dhowr jeer oo uu isku dayay in uu dadkana cashuur ka-

qaado aad ayaa loo horistaagay, oo waxa laga la hortagay dagaallo, waayo tan iyo waqtigaa ma ayan muuqan wax wanaag ah uu dalka ka qabtay. Burco waxa 1977 lagu dilay Taliyihii Degmada, mar layaku dayay in dadka cashuur laga qaado. Xagga wax barashada oo la og yahay in ay tahay Saldhiggii horumarka Ingiriisku wax quman kama uusan qaban wixii dagaalkii labaad ka horreeyey. 1934 waxa dalka ka furnaa hal dugsi oo hoose ardada Soomaaliyeed ee dhigatana aad bay u yarayd oo waxa ku badnaa Hindida iyo Carabta. Maaliyaadda dawlalda ku bixin jirtay wax barashada oo idil waxay ahayd L. 500 Sannadkii. Maamulka dugsiga hoose waxaa ku bixi jirtay L. 100 waxaa lagu kaalmayn jiray dugsiyada quraanka; L. 300 waxay ku bixi jireen ardada yar oo wax lagu Gordan Collega ee ku yiil Khartuum. Sannadku markuu ahaa 1938 ayaa markii ugu horreeysay laga sameeyey dalka Xafiis qaabilsan wax barashada. Horumar la'aantu kuma koobnayn wax barashada oo qura, ee dhinac kasta oo laga eego nolosha waddanka wax hurumar ah ama isbeddela oo ingiriisku sameeyay ma jiraan.

Soomaaliyada Galbeed waxa cashuur aruuriska iyo horumar la"aanta u wehelisay, cadaadis, dhac, boob, dil, had iyo jeer militariga Itoobiya uu ku hayay.

Xeebta Soomaalida ee Fransiisku gumeysto, ayada, magaalada Jabuuti mooye dalka intiisa kale waxba iskama beddelin, waxa ayana la mid ahayd N.F.D,

Haddaan isu dhigno horumarka dalku gaaray muddadii yarayd ee aan gobanimada haysanay, iyo wixii gumeystayaashu dalka ka qabteen muddadii dheerayd ee ay u taliyeen, waxan garanaynaa in gumeystayaashu ay horumarka iyo daryeelka Soomaalida ay surmo ku hayeen.

Halgankii Gobannimadoonkka.

Dhamaadkii dagaalkii II ee adduunka waxaa ka dhashay asaaskii U.U.M. Ururkaas waxa hor iyo salba looga jeeday in nabad iyo xasilin ka dhalato gaar ahaan Yurub gudaheeda, guud ahaanna adduunka intiisa kale.

Labada dhinac ee dagaalku marka uu socday is ka soo horjeeday ee kala ahaa Isbahaysigii «Allied forces» iyo «Aksiskii» Axis. Ururku wuxuu ugu baaqay nabad sugid waarta, oo laguna caddeeyey warqadda (Charter) ururka siyaabaha loo baajin rabo dagaal kale oo dunida ku fida. Kolkii uu dagaalku socday, dawladaha Isbahaysiga ee Ingiriiska iyo Maraykanku waxay ku baaqayeen fiirada «Gobanimada iyo Aayetashiga Ummadaha». Si taasi u suuragashana ummadaha waxay ku guubaabinayeen in «Aksiska» dagaal lagu qaado. Jarmalka oo ahaa hoggaamiyaha Aksisku, wuxuu dadka cad tusay heerka la gaadhsiin karo midab takoorka iyo kala sooca bulshooyinka. Inkastoo oo Isbahaysigu ku baaqayay gobanimo iyo Aayatashi in ummadaha adduunku helaan, misana Maraykanka iyo Ingiriisku waxay ahaayeen kuwa dalalkooda gudahooda iyo dalalka ay gumeystaanba ka dhaqan gesha midab takoor hor leh, dadkana si laxaad leh uga hortaagnaa inay aayahooda ka tashaan Jeerjil iyo Ruusfelt markay jaangoynayeen warqadda ururka, maanka kumay hayn ummadaha faraha badan ee gumeysiga ku hoos jiray ee Afrika iyo Eeshiya. Haddii uu ururka U. M. reer Yurub ugu baaqay xasilin iyo nabad sugan u fiigtayna in la aqoonsado «xuquuqda aadamiga gun u ah, xurmada iyo quu-

dha qofku uu leeyahay, sinaanta ragga iyo dumarka, iyo qaramada kuwa yaryar iyo kuwooda waaweyn, in la dhiirriyo lana tixgasho xaqa aadamigu u leeyahay uu xor yahay, oon lagu kala soocin midab, af, diin, IWM. dadyadaa si Afrika iyo Eeshiya waxa ay ka oogeen dagaal waji cusub leh. Dagaal ay Malaayiin dad ihi ku qaadeen gumeysiga, xukunkiisiina kaga hoos bexeen. Afrika, gaar ahaan ka dib markii uu D.II.A dhamaaday, ayaa halgan gobanimadoon ihi ka shidmay Soomaaliyana sidaas oo kale ayaa halgan gobanimo doon ihi uga bilaabmay.

## DAGAALKII II EE ADDUUNKA

Bishii Sebtember 1939kii, Ciidamadii Jarmalka ee kalidii tashadihii Adholf Hitlar, ayaa galay dalka Poland, Zechoslavakia iyo dalalka bariga ka xiga dalka Jarmalka. Faransiiska iyo Ingiriiska ayaa iyana markaasi caddeeyey inay Jarmalka dagaal kala hortegayeen, talyaaniguna wuxuu la soo saftay Jarmalka. Dawladda Japan ayaa Jarmalkii iyo Talyaanigii ku soo biirtay oo markaas lagu magacaabay «Xoogaggii Aksiiska» (Axis powers), iyada oo dalka Shiinaha iyo dawlado yar yar ahaa oo kale ku biireen Ingiriiska iyo Faransiiska oo markaas la magac baxay «Isbahaysi» (Allies). Dalka Maraykanka iyo Ruushkuba waxay labaduba la soo safteen dowladaha Isbahaysiga intii 1941dii ka danbaysay.

Ingiriiska iyo Talyaaniga bilowgii D.II.A. waxay noqdeen laba xoog oo is ka soo horjeeda, sidaas awgeedna waxa la filayey in labada dawladood u xoogtamaan dalka Soomaalida. Hortiiba Ingiriiska, Jarmalka ayaa weerar ku asqaysiiyey sida awgeedna waxa uu u guntaday in uu dalkiisa difaaco, wixii rag, Baabuuro iyo Diyaarada ahaa ee meelaha aan weli la weerarrina, dalkiisa ayuu ku soo ururshay. Dalka Soomaaliyeed ee ab-

bansiga uu ku haystay waxa uu ka mid ahaa meelaha uu isku baneeyey. Halkaas waxa joogay 1941kii, 568 oo askar ah iyo guuto ka tirsan ciidamada woqooyiga Roodiishiya. Faransiiska Jabuuti degganaa waxa uu ku la heshiiyay in uu kaalmeeyo haddii u talyaanigu soo weerarro dalkaasi abbansiga Ingiriiska ku hoos jiray. Hase ahaatee bishii July, 1940kii oo faransiisku Jarmalka isu dhiibay wuxuu Talyaaniga ugu ballan qaaday in uusan dagaal danbe shidin. Sidaas darteedna waa uu u ciidmi kari waayey Ingiriiska. Bishii Ogost, 4tii ayaa ciidamadii Talyaanigu Itoobiya ka soo duuleen iyaga oo u jeeda inay Berbera gacanta ku dhigaan. Ciidamadii Talyaanigu iyaga oo ku gaashaaman banaadiiq, taangiyo, dayuurado iyo gawaadhi ayey dagaal ku qaseen ciidamadii Ingiriiska. Dagaalku wuxuu laxaad kiisu ku ekaa waddada u dhexayla Hargeysa iyo Berbera. Soomaalidii ka tirsanayd ciidamadii Ingiriiska ayaa si geesinnimo leh Talyaaniga weerarkiisii sutida u qabatay waxa ka mid ahaa Cumar Kojoog, oo markii danbe Ingiriisku taalo ku magacaaban ninkaas isaga ah ka dhisay «Dacarbudhuq» meel aan sidaa uga durugsanayn. Dagaalkaas dabadiisa waxay Talyaaniga ku qaadatay afar iyo toban cisho in uu Berbera galo, dhul abbansigii Ingiriiskuna gacantiisa galo. Ingiriiskuna wuxuu u qaxay Cadan. Cadan.

Marka laga bilaabo bishii sibtambar 1939kii ilaa iyo Jeenwary 1941dii ciidamada Ingiriiska iyo Talyaanigu waxay is ku horfadhiyeen soohdinta Koonfur galbeed ee Soomaaliya. Mar mar ayaa labada dhinac is xabbadaynayeen, hase ahaatee, labada dhinac midna muu awoodaynin in ay Soomaaliya ku dagaalamaan. Maxa yeelay labaduba waxay ku dagaalamayeen Liibiya iyo Masar. Hase ahaatee bishii Jeenawary 1941dii Ingiriisku wuxuu gaaray in uu ciidamo ka soo gudbiyo dhinaca Kiiniya.

Guuto waxa loo diray inay Muqdisho qabsato mid kalena Jigjiga. Ciidamadii Ingiriiska oy taageerayeen askar reer Nayjeeriya iyo xeebta dahabka ayaa muddo ku siman bil ku qabsaday degaanka Juba. Dagaal si aadah u qadhaadh ayaa labada dhinac ku dhexmaray goobaha Buulo. Erillo iyo Jilib, hase ahaatee, Talyaanigii waa laga libaystay.

Askarta Talyaanigu waa ay waayeen gargaarkii ay ku filanayeen madaxda ciidamada ee Muqdisho fadhiday. Talyaaniga ciidamadiisii iyo Soomaalidii askartiise ahaydba rasaastii ayaa ka go'day, diyaaradiihii Muqdisho fadhiyayna waa u ciidmi waayeen. Markii ay ciidamadii Ingiriiska iyo kuwii Afrikada galbeed Muqdisho soo galeen, taliyaashii ciidamada talyaaniga waxay iyagu ka horba u carareen Rooma.

Bishii Maarj 16kii, 1941dii ayaa Ingiriisku ciidan Cadan ka diray, Berbera qabsada waana uu ku libaystay, sidaasaanu dalkii ay horayba abbansigu ugu haysteen mar labaad u gacan galay. Bishii May, 1941dii adisababa ayaa Ingiriisku galay, sidaas darteedna dhulkii ummadda Soomaaliyeed degganayd oo idil oonay Jabuuti ku jirin ayaa Ingiriisku taabay. Bishii Nofeembar, 1941dii ayaa ciidamadii Faransiiska Jabuuti ka joogay qaybo ka mid ihi Ingiriiska isu dhiibeen. Ingiriisku dabadeed ciidan uu leeyahay ayuu Jabuuti u diray, halkaasna magaalada Jabuuti ayaa gacantooda ku gashay. Markii la gaaray Bishii Diisambar, 1941dii dagaalkii waa ka joogsaday Afrikada bari, hase ahaatee Soomaali badan ayaa Ingiriiska la dagaal gashay iyaga oo ka soo horjeeday Jarmalka, iyo Talyaaniga. Soomaali badan ayaa gaar ahaan ka dagaal gashay Burma.

Bishii Oktoobar 1943dii ayaa muusaliini la jabiyey, dawladladdii Talyaaniga ee cusbaydna waxay ka soo horjeesatay Jar-

malka. 1941dii Ruushka ayaa isna dawladihii Isbahaysiga ku biiray, Jarmalkuna markaasi bari iyo galbeedba waa uu isugu tagay. 1942dii, intii ka dambaysay xaalkii Jarmarka iyo Jabaankiiba waa uu ka qasmay, bishii Maajo, 1945tiina Jarmalkii waa la jabiyay. Bishii Ogost 1945tii Maraykanka ayaa isna-hiroosHima ku riday markii taariikhda adduunka ugu horray-say Qumbulada Dunye, waxaana ku dhintay kumanaan qof. Dhawr maalmood kadibna, mid kale ayaa Maraykanku ku riday Nagasaaki markaasi ayaa Jabaanku isdhiibay, nabadana oggolaaday. Dagaalkii labaad ee adduunka oo ahaa kii ugu darnaa wax soo [illegible] mara taariikhda aadamiga markaasi ayuu dhammaaday.

## Horumarkii bilowga Dhaqdhaqaaq Siyaasadeed,

## Dalkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku Gumeysan jiray.

Bulshada ummadda Soomaaliyeed (Somaland National Socity S.N.S.) oo markii dambe la magac baxday ururka ummadda Soomaaliyeed (Somaland National League-S.N.L.) waxa la unkay 1935tii. Waxa unkay odayaal Madax iyo Baayacmushtar leh oo ka [illegible] Berbera, Burco iyo Hargeysa. Odayaashaasi waxay rabeen in ay dhaqaalaha dalka hormarshaan, in Soomaalidu iyaga oo wada jira ay shaqeeyaan, sidaasna ay ku gaadhaan isxukun. S.N.S. waxay ku guubaabisay dadweynuhu in uu fahmo baahida loo qabo in Soomaaliyi midowdo, qaran kaliyana ay noqoto. Waxay [illegible] ku cadaadsheen inuu dalka horumarsho, oo uu dugsiyo, waddooyin IWM ka dhiso. 1947dii waxa kale oo la aasaasay ururka shaqaalaha Soomaaliyeed. Waxa ku jiray ururkaas shaqaalaha markaasi dawlada u shaqayn jiray iyo shaqaale kale oo [illegible] Ingiriiska uu Soomaalida shaqooyin u [illegible] [illegible] 1940kii ummaddii Soomaaliyeed waxay [illegible] siyaasi ah, waxanay ugun-

tadeen gobanimadoon. 1940kii bulshadii ummadda Soomaaliyeed waxay ku biirtay kooxahii kale waxa markaasna unkamay ururka ummadda Soomaaliyeed (Somali National League S.N.L.) 1947dii si uu isu hortaago horumarka gobanimadoonka, Ingiriiska wuxuu sameeyey gole la talis Advisory Council) ka kooban 48 oday, qaar qabiilooyin soo doorteen qaarna isagu uu magacaabay. Ururka ummadda Soomaaliyeed waxa uu hiyiga ku hayay in ummadda Soomaaliyeed wadajir hore ugu marto dalalka Soomaaliyeedna ay midoobaan. Ingiriisku wax badan ayuu ku dhawaaqay in sabata dagaalka loo gelayaa ay tahay in loo suuragesho ummadaha in ay iyagu aayahooda ka tashaan. Markii uu dagaalku socday ayaa nin ciidamada Ingiriiska ka tirsan oo rabay in uu qorto askar Afrikaan ah, wuxuu u yimid nin ka mid ah odayaasha Afrikada bari. Wuxuu yiri «Ha dhaco Hitlar» kii Afrikaanka ahaa wuxuu yiri «Maxaad Hitlar u ridaysaa» «waa nin Jarmal ah ayuu yiri» oo maxaa ku jaban haddii u Jarmal noqday «ayaa ninkii Afrikaanka ahaa yiri» «adduunka oo dhan ayuu rabaa in uu u taliyo» ayaa kii Ingiriis ku jawaabay «oo maxaa ku jira, haddii uu sidaas rabo?»

«ayaa misana Afrikaankii waydiiyey. Kolkaas ninkii Ingiriiska ahaa meel uu ka baxo waayey, waxa uu ku jawaab ceshay «waad ogtahay ina aanay habboonaynin in qabiil qabiil kale u taliyo sidoo kale ayaanay habboonaynin in qaranna qaran kale u gumeysto. Ingiriisku waa in uu ingiriiska uun xukumaa, Faransiisna faransiis, Jarmalna jarmal, Talyaanina talyaani fiiradaasi ayaa reer Afrika ka dib markii uu dagaalkii dhamaaday, gumeystayaashii ay ku dhirbaaxeen. Markay Soomaalidu dabadeed u guntatay in iyadu ay aayaheeda ka taliso ingiriisku si uu isu hortaagi karaa may jirin, hase ahaatee halgan gaabis ah ayuu rabay.

Dhinaca koonfureed oo markaas talyaanigu gumeysan ji-

ray, waxa markii ugu horraysay xisbi Siyaasi ihi ka abuurmay bishii May, 1943dii. Saddex iyo toban dhallin ah oo madax u ahaa Cabdilqaadir Sakhaawe Diin, Yaasiin Cusmaan iyo Xaaji Maxamed Xuseen ayaa bilaabay. «Soomaali Youth Club».

Dhallin fara badan oo markaasi dawladda u shaqaysa ayaa ku biirtay 1947dii magacii ururka waxa loo rogay S.Y.L ujeeddooyinka S. Y. L waxay la mid ahaayeen kuwii S. N. L laba da xisbiba waxay u fiigahayeen in Soomaaliyi midowdo, qaran kaliyana noqoto. Isla waqtigaas ka dib markii la jabshay waxa uu talyaaniyu heshiis nabadeed la saxiixday Ingiriilka, Faransiiska, Ruushka iyo Maraykanka. Heshiiskaasi qodob ka mid ahaa waxa uu awood u siinayay afartaas xoog ee adduunku in ay ka taliyaan aayaha dalka Soomaaliyeed ee Talyaanigu gumeysan jiray. 1947 ayaa golaha xoghayeyaasha debedda ee afarta dawladood gooyeen in guurti loo diro Soomaaliya, si ay u soo ogaadaan waxa uu dadweynuhu rabo. Si ay ugu tabaabushaytaan imaatinka guurtida ummadaha, midoobay, S.Y.L iyo kilaabka dhallinta ee Xamar waxay qoreen fiirooyinkoodii iyo qodabaday ku doodayeen. Waraaqda murtideeda waxa qoray Maykal Maryaano oo Hargeysa ka socday, hadalkaana waxa guurtidii u jeediyey Cabdillaahi Ciise, oo waydiistay guddida in Soomaaliya ay amaansiga U.U. hoos gasho, afarta dawladoodna guudka ka ilaashaan.

Xisbiga S.Y.L., S.N.L. iyo kooxo kaleba waxay rabeen in dalalka Soomaaliyeed la mideeyo. Waxa aanay U. M. iyo guddida afarta xoogba u direen araaji iyo dacwooyin ay ku muujiyeen, Soomaali in ay ul iyo diirkeed tahay, sidaa darteedna dalalka soomaalida oo dhan la hoos geeyo ammaasinga U. M. Bishii Oktoobar, 18kii 1948 S.N.L iyo S.Y.L ayaa wadajir arji U.M. u gudbiyey, iyaga oo taageero ka dhigtay shirkii guud ee

qaranka ee Muqdisho lagu qabtay go'aankii ka soo baxay. Markii ay guddidii Muqdisho timi, waxay bilaabeen hawshii loo soo egmaday. Waxaanay ku bilaabeen afti ay dadka Soomaaliyeed ka qaadeen. go'aankii ka soo baxay aftidaasi waxa uu caddeeyey in Soomaalidu 85% ay codsadeen in dalalka Soomaaliyeed ee Faransiiska, talyaaniga, Ingiriiska iyo Itoobiya ay gumeystaan loo mideeyo loona dhiibo U.M. 5% in dal aan Talyaani ahayn loo dhiibo, 5% waxay ayana codsadeen U.M. loo dhiibo hase ahaatee uu Ingiriisku ka wakiil noqdo, 5% Iyana waxay rabeen in Talyaanigu U. U. M. kawakiil noqday. Koorddaasi u dambaysa waxa ku jiray dad shisheeye ah, waxaanay isku magacaabeen «Somalia-Conference». Waxay iyaduna gudbiyeen araaji ay ku dalbayeen xukunka Talyaaniga oo ku ekaada muddo 30 sano ah. Isla waqtigaa ay guddidu aftida qaadaysay, waxa S.Y.L. ay soo qabanqaabisay bannaan bax. Ingiriiska oo markaas dalka ka talinayayna wuxuu ka cabsi qabay in halkaas labada kooxood iskaga horyimaadaan, markaasi ayuu codsigoodii diiday. Hase ahaatee, guddidii waxay codsatay in labada dhinacba loo fasaxo, hadiiba bannaanbaxu uu si nabad gelyo leh u soconayo.

Bishii Jan. IIdii, 1948 S.Y.L iyo dadweynihii ayaa bannaanbax u soo ururay. Talyaaniga iyo kooxdiisii oo baabuurro iyo rag gaashaaman wata ayaa goobtii S.Y.L bannaanbaxa ku maraysay yimid dadweynihiina ku qayshay, ka dibna dagaal ayaaba halkii ka oogmay. Waxaana la isu la baxay qaanso iyo leeb, bunduq iyo garnayl iyo budh iyo gacan. In ku siman muddo lix saacadoodaMuqdisho dagaal bay la qiiqday, ka dibna ciidamadii Ingiriiska iyo Booliskii ayaa joojiyey dagaalkii. Halkaasna waxa ku dhintay dad badan oo soomaali ah dar kale oo fara badanina waa ku dhaawacmeen. Guddidii magaalooyin kale oo Soomaaliya ayay soo martay dabadeedna Niyuuyork ayay dib ugu laabatay. Warbixintoodii waxay ku caddaysay in dadweynaha Soo-

maaliyeed ay qabaan fikradaha S.Y.L ay codsatay sidaas awgeedna ay tahay in Soomaalida loo dhiibo U.U.M. afarta dawladood ee xoog ahina guudka ka ilaashaan. Guddida nabad gelyadu ee U.U.M. arrintii Soomaaliya waa ay isku afgaranwaayeen. Dabadeedna golaha Guud ayaa arrintii loo soo gudbiyey. Fadhigood 24na Bishii Nov. 1949kii waxay ku gooyeen in Soomaaliya ammaansi loogu lhiibo dawladda Talyaaniga, muddo ku eg toban sannadoodna ay madaxbannaani ku helaan. Dawladda talyaaniga waxa laga filayay in ay Soomaalida gaarsiiso madaxbannaani, warbixin joogto ahna siiso gole ka egman U.U.M. oo ka koobnaa Masar, kolombiya iyo Filibiin. Go'aankaasi soomaalidu may garawsan, waana ay diideen soo noqodka Talyaanigii faashiistaha ahaa, hase ahaatee ciidamadii Talyaaniga ayaa Muqdisho soo galay, Ingiriiskuna dabadeed maamulkii dalka ayuu ku wareejiyey Bishii April Idii, 1950.

## MARINKII GOBANIMADA: SOOMAALIDA uu INGIRIISKU GUMEYSAN JIRAY «BRITISH SOOMAALILAND»

1922dii ayaa Sayid Maxamed Cabdule Xasan Ingiriiskii jabshay' iyaga oo u itaalsaday diyaaradaha bamka qaada. Hase ahaatee taasi micnaheedu may ahayn in Soomaalidu jacaylkay u qabtay madaxbanaanida iyo qarannimadu uu ka dhintay 1922dii Ingiriisku wuxuu damcay in uu si dadban shaqo sandulle ah Soomaalida ku soo rogo wuxuu soo rogay in canshuur Xoolaha laga baxsho. soomalidii se waa ay diiday' gadoodkoodina waxay ku dileen nin D.C ahaa. 1930 Naadigii Faarax Cumar ayaa isku dayay in uu ummadda soomaaliyeed ku abuuro kasmo Siyaasi ah' qaranimo kastana ku talaalo. inkasta oo markii uu noolaa aanay u rumoobin himilooyinkii u lahaa' dadkii Soomaaliyeed halgan dhab ah ayey u galeen qaranimo ay helaan. 1945kii Sheekh Bashiir ayaa isna isku dayey in uu soo cusboonaysiiyo dagaalkii Sayidka oo kale. Hase ahaatee

intaanu dhaqdhaqaaqiisi hagaagin ayaa la dilay. 1946kii ilaa iyo 1950 dadka Soomaaliyeed waxay u halgameen in dalalka Soomaaliyeed la mideeyo U.U M. na loo dhiibo.

Nasiib darro taasi may suuragelin, isla wakhtigaasi ay Soomaalidu U.M iyo Ingiriiskaba ay ka dalbaysay midaynta Soomaalida, Ingiriisku 24kii bishii Sebtember, 1948, wuxuu Itoobiya si qarsoodi ah ugu wareejiyey gobolka galbeed ee loo aqoon jiray «Ogaadeenya». Ummadda Soomaaliyeed waxa u bilowday waa cusub oo ay fakareen qaranimo iyo gobanimo ay Soomaaliyi hesho. Markii ugu horraysay ayaa suugaan ku unkan fiirooyinkaasi abwaanadii Soomaalidu af soomaali iyo af Carbeedna ku goobaabsheen dadweynaha. Cumar Maxamad Cabdiraxmaan oo macallin ahaa isaga af carbeed ku gabyay wuxuu yiri, 1948kii.

Ma ogtahay dadkaygu in dhulku irmaan yahay, khayraat, ciid hodan ah iyo dahabna ku jiro, in kayntiisu ciid hodan ah oo farax ku gesha leeyahay, in batrool ku jiro gudihiisa badisana jawhar ka buuxo. Intaabana uu ku raaxaysto kii isagu xaqii aan lahayn lunshay; ee ina dulmay, sidii libaaxana inoogu ciyay, kii inta uu carruuro agoomeeyey dhiigeenana daadshay, oo aqoondarrida dhidibka u aasay si uu halis inoo gelsho.

Waa gumeystaha qarsada irmaanteena iyada oo widh widhay say, ee xada isagoon la arkayn, marna dhac iyo xoog inugu muquuniya, misana dadkii lahaa gaajo ay mudanyihiin, markay ka adkeesan waayaana ay habeenka necbeystaan, waa in uu u baryana ay ku taamaan, markaas ayay haddana xusuus u yeeahaan in waagu aanu u dhamaynin mugdiga habeenka, barqo marka la gaadhana aanay dacartu dheef macaan u noqonayn.

Soomaaliyay ma waxa aan garanay in aan darxumoono,

qayr keena barwaaqaystaan, innana aan qabuuraha ka dul barooraro.

Waxaan ku baaqaa in dugsiyo la dhiso, si aan mar u arko midhihii aqoonta oo la goosto, oo aqoon iyo cilmi lagu kormaro.

Ma waxa maqal aad ka fili dhego waxmaqal gabay mise waxa aad malaysan in gabay soo toosiyo qof xabaal kaa galay. Xaaji Aadan isaga oo dadweynaha ku guubaabinaya in gumeysiga dabarka loo gooyo waxa uu tiriyay gabay fara badan halkan se waxaan ku soo qaadi doonaa mid uu tirshay ka dib Markii sheekh Bashiir la dilay.

Duhur baa Bashiir lagu shannaqay daar agtiina ahe, damal la hadh galaa bay jebsheen, waqay dulloobeene kolkii aaska loo diiday waa wada dul joogteene, ma damqane jidhkiinii kolkaas waa ku digateene, —————— kun kale oo cayaar lagu dilay iyo diyo dawgal baa jiraye, aan deero deero u herdiyin sida digaagiiye, isaga oo dulmiga aad qabtaan dood kacelinaaya, da'dii uu ahaa Faarax baa jeelka loo diraye ——————
Dabka qaaday sharaqii waxa badan daaniksa ahaaye, Turki in uu bulgaariya diluu daarka ku hayaa, wax badan buu dariiq in uu ka helo doonay maalatoofe, Dardaniil ka xidhay Ruushkanay daris ahaayeene, ka duuduubay Faransiis dhulkii Suuriyuu degaye,

Dergadii Lubnaan iyo ka guur degalkii Bayruude,
Deeq kama ahaanine bir baa daanka loo sudhaye,
Dejle iyo fûraad ferenjigii kama dekeeyaane.
Ingriis wuxuu daamcsanaa reer hindiya diidye.
Sidii gaandi doonaayey baa haatan daahiraye.
gobanimo daleel lagama helo daar adoo galaye.

Waar mur iyo deebaaq waxaad dib ugu aydaaye.
Marse haddaan waxaan doonayiyo dawladnimo waayey
Dantey weeye inaan aamusaa eegga dabadeede.
Dacaska ku jira, noloshu waa idinku deelqaafe.

Abwaano kale oo iyana gabayo iyo heeso ay daweynaha ku guubaawinayaan tiriyey ayaa jiray oo uu ka mid ahaa Maxamad X. Ismaaciil Barkhad Cas, Cali Sugule, Cabdilaahi Qarshe, Xuseen aw faarax iyo niman markaasi. macallimiin ahaa oo ay ka mid ahaayeen Yusuug X. Aadan iyo Cali Mire oo wada tirshay heestii SYL, Hal ku dhegga oo ahayd-Soomaaliyey toosaa toosoo isku tiirsaday, hadba kiina taagdaran taageera abidkiin. Cumar Cabdiraxmaan, Cumar Carte Qaalib iyo Shelihi X. Ibraahim iyana waxa ay tiriyeen gabayo af Carbeed ah, kaalin wayna ka ciyaarayay sidii ardayda Soomaaliyeed loogu talaali lahaa kasmo wadani ah. Kuwa af Soomaaliga ah waxa laga heli karaa casharada suugaanta, sidaas darteed ayaan inta af Carbeedka lagu tirshay tusaale ka soo qaadi doonaa iyadoo kuwa af Soomaaliya aan waxa ka taataaban doono 1949kii Cumar Cabdiraxmaan isaga oo kagadooday go'aankii U. U. M. oo siday Soomaalidu codsatay lid ku noqday waxa uu yiri.

Sideen cadaalad uga filanaa dir xumaato
Qareensada oo baytal Qudus ba yahuudda dajiyey,
Waa ururo iska tilmaamay in uu tiirka nabada yahay,
Hase ahaatee noqday dawlad xoog ah oo dulmiga meelaysa.

Cumar Carte isaga ku dhiidhiyey dalkii Soomaaliyeed ee Xabashida lagu wareejiyey wuxuu isna tiriyey.
Hoogeeda Soomaaliyi ma waxay u gacan gasha gumeystada,
Oo nacabkeed dulmi ku miciyo listaa
Waayo hore ayaa lagu kala qaybsaday

Shirqool hoos ahaan loo qorsheeyaye,
Waxa lagu qaybsaday hoosaasada gumeystada,
Iyada oon la inna ogeysiih la nana weydiin.
Waxa lagu qaybsaday hoosaasada gumeystada,
Oo ku adeegsatay heshiisyo aynaan garawsan karayn,
Oo tolow rageedii ma daayeero ayey isu dhalan rogeen,
Mise waagaasi dalku ba madax ayaanu lahayn.
Maya eh waa jireen waxaa see bahdishey qabyaalad,
Kolkaasa iyagu isu cudud dhigteen, iskoodna u kibreen.
Waxaan u baaqayaa dhallinta cusub in ay cilmi bartaan.
Wadankii mudan ahi kama nabad galo dulmi,
Haddii aan dadkiisu dhiiggooda anay u hurin.

Bishii Jan. 5ddii, 1955tii waxa Ingiriisku ku dhawaaqay in Ogaadeeniya, Hawd and reserved area» oo qayb dalka Soomaaliyeed ka mid ah ku wareejin doono dawladda Itoobiya, Ingiriisku maamulkii uu ku lahaana istaagi doona bishii Feb. 28da, 1955. In ku siman shan iyo toban sannadoodna ay Soomaalidu xaq u yeelandoonto xadka beenta ah inay ka gudubto oo xoolaha daaqsan karto dalkaasi xabashida lagu wareejiyay. Ummadda Soomaaliyeed markii warkaasi dhegeheeda ku dhacay waa ay ka gadooday bannaanbaxyo lagu diidanyahay go'aankaasina meel kasta ayaa laga qabanqaabshay. Soomaalidu waa ay ka dhiidhiday dalkoodaa loo dhaxal wareejiyay iyada oon waxba laga weydiin, waxaanay Ingiriiska ku dirqiyeen in arrintaasi maxkamadda adduunka loo gudbiyo, hase ahaatee Ingiriiskii wuu garawsanwaayey. Madax ka eegman bulshada Soomaaliyeed ayaa Hargeysa isugu timi, dabadeedna shir guud ayaa dooxa Hargeysa lagu qabtay. Halkaasna waxa go'aan lagu gaaray in arrinta loo gudbiyo U. U. M. Shirkaasi waxa lagu doortay afar oday oo loo xilsaaray in ay arrinta U.U.M horgeeyaan. Waxaan kalsooni ka dhashay urur lagu magacaabay (Nafta-na-

tional united front, N.U.F) jabhadda ummadda midowday. Islamarkaasi dadweynaha Soomaaliyeed meel kasta ha joogo eh uu ku deeqay lacag lagu dhiso ururka, odayaashuna ay arrinta U.M. ku geeyaan. Afartii oday oo kale ahaa:

Suldaan Cabdiraxmaan Suldaan Diiriye, Suldaan Cabdilaahi Suldaan Diiriye, Maykal Maryano, iyo Dube Cali Yare, waxay tageen London, hase ahaatee, Ingiriiska wax kaalmo ah kamay helin, ururka qaramada midowbayna in ay arrintay wateen ka hadlaan waa uu diiday. Markay odayaashii soo noqdeen ururkii N.U.F. wuu liciifay, maxaayeelay koxihii ku jiray fiirooyin kala gooni ah ayey ka qabeen tallaabada habboon in la qaado.

Bishii May 1957dii ayaa Ingiriisku wuxuu abuuray gile Sharci ku daray 6 qof oo Soomaali ah uu isagu magacaabay 1958dii tiradii xubnaha Soomaalida ayaa Ingiriisku kordhiyey, waxaanu ku baaqay in 6 qof la soo doorto saddexna uu magacaabo. Xisbigii S.N.L waa uu qaadacay doorashadaasi, hase ahaatee xisbigii N.U.F ayaa galay kuraastiina markaas wada helay. 1960kii waxa kale oo unkamay xisbi siyaasi ah oo saddexaad laguna magacaabay xisbiga midowga Soomaalida «united Somali Party-U.S.P» bishii Feb. 17dii 1960kii, sideed iyo lixdan ruux ayaa isu taagay doorasho loo galayay saddex iyo soddon kursi Soomaalidu qayb looga siiyay golaha sharciga. S.N.L iyo U.S.P. way is bahaysteen doorashadana wadajir ayey isu taageereen, sidaas darteedna S.N.L waxay heshay 20 kursi, U.S.P na 12, N.U.F I kursi.

Tartanku wuxuu si dhab u dhexmaray S.N.L iyo N.U.F, maxaayeelay, kuraasta U.S.P inta badan ciduba lama looltamin. Codadkii la dhiibay marka la eego S.N.L waxay heshay 43% N.U.F, na 37% U.S.P. na 20% Xubnihii ku socday S.N.L

U.S.P ayaa ka dhisay golahii sharciga dawlad cusub oo Maxamad X. Ibraahim Cigaal madax ka yahay oo muddo afar bilood ku siman dalkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku u talinayey ku gaarsiiyey madaxbannaani. Bishii June 26, 1960kii ayaa markii ugu horraysay taariikhda Soomaalida calan ay leedahay lagu dhidbay dal Soomaaliyeed oo xor ah. Bishii July Idil 1960kii na waxa madax bannaanaaday dalkii Soomaaliyeed ee Talyaanigu ammaansiga ugu jirtay, dabadeedna labadaas dhinac ayaa israacay, waxaanay abuureen Jamhuuriyad Soomaaliyeed «Somali Republic».

Dalka Soomaaliyeed ee U.Q.M talyaaniga ammaansiga ugu dhiibay waxa ku dhisnaa gole la talis oo ku magacaaban golaha dalka «territorial council». 1956kii ayaa waxa loo rogay gole sharci, waxaanay markii ugu horraysay axsaabta siyaasaddu awood u yeesheen in ay ka qayb qaataan dalka taladiisa. Xisbiga S.Y.L. oo ugu da'waynaa uguna habaysnaa ayaa doorashadii 1956dii ku guulaysatay. Intii ka danbaysay oo idilna S.Y.L. ayaa doorashad had iyo jeer bursan jirtay. Hase ahaatee, xubnihii golaha sharciga loo soo dooranayo isku aragti ayay noqon waayeen, dabadeed kooxo ayay u kala baxeen, qaarna axsaab gooni ah ayay fureen. Koox uu watay X. Maxamed Xuseen waxay la baxday G.S.L «greater Somali league». Kooxo kalena HD MS xisbiya Distoor mustaqil Somali kooxo kalena (The liberal Somali youth party) dar kalena, the Somali democratic Party, the simali national union. Mararka qaarkood tirada axsaabtu waxay gaaraysay labaatan. Doorashadii ugu horraysay waxa la qabtay 1954. Markaasi oo loo tartamay kuraasta dawladda hoose (Municipal Election) 1956kii waxa loo tartamay doorashadii xubnaha golaha sharciga. S.Y.L waxay ka heshay 43 kursi tirada guud ee golaha oo ahayd 60 kursi. Cabdilaahi Ciise ayaa markaasi noqday «Prime Minister». 1958dii waxa mar labaad doorasho loo qab-

tay dawladda hoos e «Municipal Election». Markan dumarka ayaa ka qayb qaatay oo codkoodii dhiibtay, kuraasta loo tartamayay oo dhamayd 663,S.Y.L waxay ka heshay 416, HDMS 175, GSL 36, PLGS 26. 1959kii qofkii da'diisu gaarto 18 sannadood codkiisa ayuu dhiiban karayey. Doorashadii loogu tartamayey golaha sharciga oo kuraastiisu dhamayd 90, S.Y.L waxay ka heshay 83. Dabadeedna Cabdilaahi Ciisa ayaa misana loo doortay «Prime Minister». Golahii sharcigu wuxuu noqday golaha guud ee Ummadda, waxaa aanu U.M. ka codsaday in madaxbanaani buuxda dalka la siiyo, Bisha July 1da, halkii bay ka noqon lahayd Diisambar 2da 1960ka. U.U.M wuu aqbalay, taasina waxa ay suuragelisay in labada gobol israacaan bishii July 1dii, 1960kii.

## GOBANIMO IYO ISRAAC.

1959kii markii ay dhamaanaysay muddadii tobanka sanadood ee dalka Soomaaliya uu ammaansiga U.U.M ku jiri lahaa ayaa golahaa guud ee ururka wuxuu oggalaaday in Soomaaliya ay gobanimo qaadato bishii July 1da, 1960ka. Dalka Soomaaliyeed uu ingiriisku gumeysanayey markay go'aankaasi maqleen waxa golaha sharcigu guddoonshay in dalkaasi isna madaxbanaanaado inta 1da Juulay ka horysa, labada dalna ay markaasi is raacaan. Madax ka tirsan gobolka woqooyi oo Maxamad Ibraahim Cigaal hoggaaminayo ayaa la kulmay Cabdilaahi Ciise oo madax ka ahaa dhinaca Koonfurta. Waxay markaasi ku heshiiyeen in dalku yeesho calan keliya, madaxweyne qudha iyo dawlad keliya. Inta la sameynayo distoorna gobol waliba isku sii maamulo xeerka u yaal. Bishii May 2dii, '60kii ayaa dawladda Ingiriisku oggolaatay in gobolkaasi waqooyi bisha Juun 26, 1960ka uu madaxbanaanaado.

Dabadeed Bishii Juulay 1dii, 1960kii ay labada dal oo gobanimo helay israaceen. Bishii Juulay 1dii, 1960kii ayaa golaha guud ee Ummaddu fadhigii ugu horreeyey yeeshay. Waxa halkaasi lagu dhisay dawlad ku meel gaar ah oo xukunka haysa tan iyo inta distoor cusub la sugayo oo dadweynuhana codkooda ka dhiibanayaan. Waxa la doortay madaxweyne, oo isna ra'iisul wasaare u doortay, misana isna wasiirro sii doortay. Aadan Cabdula Cusmaan ayaa golaha guud ee Ummaddu madaxweyne u dooratay, isna Cabdirashiid Cali Sharmaarke ayuu Ra'iis al wasaare u doortay, co isna markaasi afar iyo toban Wasiir ka dhexdoortay golaha guud. Bishii Juun 20dii, 1961kii waxa Afti 'loo qaaday distoorkii cusbaa Go aankii ay dawladda S.Y.L. ka soo saartay aftidaasi wuxuu cad-

deeyay in 90.6% intii codkooda dhiibatay ay oggolaadeen distoorka. Dadweyne badan yayey la ahayd in S. Y .L. ay meelmarisay distoorku in uu hirgalo. Degmooyin iyo magaalooyin aad u yar ayaa SYL ku sheegatay in cod ay ka dhiibeen dad boqol kun ku dhow. Distoorku wuxuu dhigayey in Soomaaliya ay Jamhuuriyad noqoto, doorasho, taliswadaag iyo qaran keliyana ka dhisanta. Ka dib markii distoorku hirgalay waxa misana madaxweyne golaha guud ee ummaddu u doortay Aadan Cabdule Cismaan, isna wuxuu mar labaad ra'iis al wasaare u doortay Cabdirashiid Cali Sharmaarke. Intii u dhexaysay 1961-1964kii dawladdii SYL waxay raacdaysay sidii labada gobol la isugu dari lahaa. Ciidamada qalabka sida waa la isku dadaray, taliskooda iyo qaanuunkii u yiilna waa la mideeyey. Shaqaalaha dawladda iyana waa la mideeyey xeer kaliyana waa loo sugay. Maxkamadaha iyo garsoorka iyagana hab waafaqsan distoorka ayaa lagu sugay.

Dhinaca dhaqaalaha waxa la qaatay shilinka soomaaliga ah, oo badalay Liirihii iyo shilinkii Afrikada Bari ee koonfur iyo waqooyi lagu isticmaali jiray. Xagga waxbarashada iyo barbaarinta waxa bilowday sidii nidaam habaysan dalka loogu dajin lahaa.

Isla markaasi waxa bilaabmay unugii musuq-maasuqa oo ku talaalmay taliska iyo maamulkaba. Qabyaaladda, siyaaso qabiil, eexda iyo qadarinta gobolka ama degmada ayaa ka muuqday taliskii SYL. 1962kii waxa abuurmay xisbiga midowga taliswadaagga Soomaaliyeed SDU «Simali Democratic Union». 1963kii waxa unkamay xisbigii shirka guud ee Ummadda Soomaaliyeed SNC «Somali National Congress» waxaanu ka dhashay dhinaca gobolka waqooyi ka dib markii madaxdii siyaasaddu ay arkeen sifahay S.Y.L. wax u maamulaysay inaanay qaranimo horseedaynin, markaasi oo dadweynaha gobolkaasina uu

ka gadooday ascaartii oo kor u kacday iyi cashuurtii oo ka dib markii la mideeyey cashuurta kastanka «coustoms duties» ee labada gobol. Dhinacaasi gobolka Woqooyi markaasi waxa ku furmay gedis qarsoodi ah. «Koontrabaan» oo hadaan tilmaan soo qaadano sigaarka si aan qarsoodi lahayn loogu iibin jiray suuqaqa magaalada Hargeysa iyo Boorama. Inkasta oo ay jireen qayb Booliska ka mid ah oo u qaybsanayd, misana iyaga laftooda ayaa si musuq ah daawo ula lahaa gedisleyda koontrabaanka. Sidaas darteedna koontrabaanku isma uu taagin ilaa uu kacaanku dhashay. SYL taliskeedii hortiisa dadweynuhu way ka niyo jabeen, markay arkeen in qaranimo lo iska dhigay, qabyaaladiina la soo baraarujiyey, dareen gobol gobolna uu unkamay. Taasi waxay dhiiri gelisay in koox saraakiil ciidamada qalabka sida ah oo ka tirsan gobolka woqooyi ay afgambi isku dayeen bishii Diisesambar 10dii, 1961kii. Taasi uma ay suura gelin, ka dibna waa la xidhay hase ahaatee maxkamadii danbi ayay ku wayday. Sifahaas ayuu garsoorka dalkuna ku sugnaa. 1962ka bilowgiisii macallimiinta ka tirsan woqooyiga ayaa shaqada ka fadhiisaty 1963na dadweynihii ayaa cashuurtu diiday in ay baxshaan.

doorashadii dawladda hoose ee 1963kii oo kuraasta loo tartamayey 665 dhamayd SNC waxay ka heshay 15% SYL 74% SDU 11%. Doorashadi golaha guud ee ummadda ee 1964kii waxa ay dhacday iyada oo dagaal Soomaaliya iyo Itoobiya dhexmaray socdo SYL iyada oo adeegsanaysa tab iyo xeel siyaaso qabiil ku unkan ayay ku libaysatay doorashadii. SNC waxay xoog ku lahayd mgaalooyinka waaweyn ee moqdisho, Hargaysa Galkacyo iyo Jamaame. Aadan Cabdille Cismaan ayaa markaasna madaxweyne loo doortay, waxaa uu isna markaasi raiis'al Wasaare u doortay Cabdirasaaq Xaaji Xuseen. Cabdirasaaq waxa uu isku dayay in uu dhiso dawlad aan qabiil qabiil iyo gobol gobol loo qaybsanin, hase ahaatee golihii cod kalsooni ayuu siin waayay.

Madaxweynihii waxa uu mar labaad waydiistay Cabdirasaaq in uu dhiso dawlad. Bishii Sebtembar 27dii, 1964 ayuu dhisay dawlad isaga oo ka laabtay aragtidii uu markii hore qabay, dabadeedna goluhu wuxuu siiyay cod kalsooni ah.

Dawladii Cabdirisaaq waxay isku dayday in ay isbeddel dhaliso. Waxa uu ra'iis al wasaaruhu isku dayay in uu tir tiro musuqmaasuqii hirgalay, maamulka hababka xafiisyadana uu hormarsho. Baaqiisu wax uu ahaa in «Karti iyo hufnaan shaqaalaha dawladdu yeesho, kii shilin ummadda ka cunaana issaga la waayayo». Hase ahaatee, Cabdirisaaq umay suuragelin in uu cidhib tiro musuqmaasuqii, maxaayeelay musuqa waxa uu ahaa nidaam xididaystay oo madaxda siyaasadda iyo shaqaaluhu ay toos iyo qarsoodiba u meelmarshaan. Cabdirisaaq waxa uu isku dayey in uu dalka hor u marsho waxaanu dajiyey jaangooyo 5 sanadood ah 1963-67. Hase ahaatee jaangooyadaas waxay ahayd mid aan si toos ah u hormarin baahida ummadda ee mudanka ahayd. 1966kii bishii Maajo, Cabdirisaaq waxa uu ku dhawaaqay in jaangooyadii ay hoobatay, sababtuna ay ahayd, iyada oo aan war bixin cilmi leh la adeegsan. Jaangooyada waxa la qoray iyada oo aan cidiba is waydiin waxa marka hore ay ummaddu u baahan tahay. Inta Dugsi iyo inta macallin ee loo baahan yahay, inta qof ee gobol walba ku nool, ama meelaha wadooyinka looga baahan yahay, amase inta dakhliya ee dalka soo gala IWM. Wadooyinka waqtigaasi la dhisay waxa ay isku xidhayeen Afgooye iyo Shalaambood Kismaayi iyo Jilib, Muqdisho iyo Afgooye. Intaasoo idilina waxay gargaar u lahaayeen beeraha muuskka ee badankooda uu talyaanigu lahaa. Hase ahaatee waxay dawladdaasi qorshe u gashay in waddooyin isku xira Afgooye iyo Bay. Hargeysa iyo Berbera, Hargeysa iyo Burco Shalambeed iyo Jilib la dhiso. Dawladdii Cabdirisaaq in kasta oo ay isku dayday in ay dhaqdhaqaaq horumar leh abuurto, nasiib dar-

ro waxba ugama suura gelin qorshaynta oo ka khaldantay awgeed. Markii 1966kii la gaaray waxa Jamhuuriyada ka jiray 233 dugsi oo kuwa hoose ah, arday 20,000 tiro leegina way ku jireen. Dugsiyada dhexe tiradoodu waxay dhamayd 32 (Laba iyo sodon) ay ku jireen 6,00 oo arday kuwa sarena waxa dhamaayeen 12 (Laba iyo toban) oo ay ku jireen 1,457 arday. Halkaas waxa aan ka garan karnaa in boqolkiiba 30 ay u gudbi karayeen dugsiyada dhexe, boqolkiiba 7 (toban) ardayna ay geli karayeen dugsiga sare. Guud ahaan taasi micnaheeda waxa uu ahaa in ardayda dugsiyda hoose boqolkiiba 70 (Toddobaatan) dugsi dhexe aanay gelin, boqolkiiba 93% na dugsi sare ay waayaan.

1964kii waxa lagu qadaray Caruurta Soomaaliyeed in boqolkiiba konton (50) ay dhintaan inta aanay shan jirsan. Misana Jaangooyadii 1963-67 caafimaadka waxa loo qorsheeyay 3.0%

## GOBANIMADII INTII KA DANBAYSAY1960-69

### TURUNTUROOYINKII GOBANIMADA:

Waagii gobanimada loo halgamayey, axsaabta siyaasiga ihi waxay raadraacayeen himilooyin qaranimada ummadda Soomaaliyeed farsugaya. Hase ahaatee aragtidoodu waxay ku koobnayd guubaabinta iyo baraarujinta dadweynaha.

Waxa ay dadweynaha garansiiyaan in gumaystuhu cadawgooda yahay, sidaas darteedna ay lama huraan tahay in taliskiisa dabarka loo gooyo. Hase ahaatee, iskuma ay dayin in dadweynaha ay ku beeraan kasmo siyaasi ah, kumana ay tallaalinqaranimo sal u noqota unuga qaran Soomaaliyeed. Qaranimo kaska ummadda Soomaaliyeed wuxuu ahaa waqtigaa gobanimada la helay, mid markaas uun uurgalay.

Dadweynuhu dabadeed wuxuu ahaa mid kasmadiisa siyaasiga ihi ay barbaarkadanntay, halkii ay ka hanaqaadi lahayd wakhtigaas ummadd Soomaaliyeed ay madax banaanaatay. Sidaas darteed ayaa iala markii ay gumeystayaashu dalka ka baxeen, fartan ka dhex dhashay madaxdii dalka; tartan loo galay ciddii ka talin lahayd dalka. Waxaana soo if baxday in qabiilka laga door biday qaranka, aragti sifahaas lehna dalka lagu maamulay. SYL haddii ay waayihii hore isu dhigaysay in ay ahayd xisbi heegan u ah daryeelka, guubaabinta qaranimada, iyo adeega ummaddda, waxay markaa isu rogtay gacan giraangirisa qabyaaladda. Waxay u guntatay in aanay xukunka sinaba uga degin, axsaabtii ka soo horjeeday iyana waxay itaalsadeen qabyaalad. Taasi waxay dhalisay in qaranimodii ummaddu iyo maamulkii dawladdu dhantaalmo. SYL waxa ay markaasi hiyiga galisay in ay dhididka u aasto keli talin ku unkan siyaaso qabiil. Ummadda Soomaaliyeedna isaga may hor iman dabaqado ku kala taggan dhaqaale ee waxay isaga hor yimaadeen qabiil qabiil iyo jilib jilib.

Dawladdii waxay noqotay SYL, SYL na dawladii ayey noqotay Muqdisho waxa ay iyana noqotay xaruntii dawladda, dawladdiina waxay noqotay mid ku koobanta Muqdisho, oo madaxda dawladda iyo kaabo qabiiladu ku kulmaan. Adeegga bulshadu «Social Services» wuxuu isna noqday mid aan hdaafinba soohdinta xarunta. Sidaas darteedna Muqdisho ayaa lagu soo qulqulay. Goboladii iyo degmooyinkii iyaa laga soo duuulay,oo markaasi tirsanayay in aan cidina dan ka lahayn.

Tirakoob laga qaaday magaalooyinka Soomaaliyeed 1966, waxaan ka arki karnaa in dadweynaha ku nooli ay 540,600 ay tiro le'ekaayeen, kala bar oo bar in kabadanina ay ku noolaayeen Banaadir (284,900). Muqdisho waxa ku noolaa 1953kii 59.790 oo qof, 1963kii waxay gaareen 172.000 1965kii na 204,

000 oo qof. Tirada dadkaasi magaalooyinka ku nool inta ka shaqaynaysay waxa lagu qadaray 138,810, taasna mecnaheedu ay tahay in afartii qofba mid shaqo hayay, iyada oo waliba 35% ay ganacsiga ku jireen. Muqdisho waxay noqotay meel nin walba oo Soomaali ihi ba uu ku taamo in uu mar uun cagaha dhigo, si uu caanaheeda uga cabo dawladnimada noqotay hal xamar uun lagu maalo. Dadweynuhuna waa uu ka niyo jabay waxaanu arki waayay waxa iska beddelay nolośhiisa tan iyo intii gumeystuhu dalka ka baxay.

Dhinaca siyaasadda waxa ay SYL dhexroorsatay awooddii iyo taliskii dalka. Maamulkii hababka xafiisyaduna waxa uu noqday mid gaabis ah. Shaqaalihii dawladduna waxa ay sugteen musuqmaasuq ay ku dhaawaceen dhaqaalihii dalka, iyaga iyo madaxdii siyaasadduna waxay u go'een sidii ay si deg deg ah uga taajiri lahaayeen hantida ummadda. Axsaabta siyaasaddu markoodii horeba may samaynin qorshayn iyo jaangoyn ay qaranka cusub dhaqaalihiisa hore ugu marshaan. Dhaqaalihii gumeysiga hore u surgooyey ayey raadraaceen, aragti dhaqaale oo cusubna hiyiga ma bay gelin.

Waxa ay se ku maan qaadmeen raacdaynta kaalmo shisheeye, oo ay misana si habaysan ugu faa'iideyn waayeen. Mashaariic horumarin keeni lahayd ayaa si qaab daran loo musuqay, si foolxunna lacagtii loogu talagalay loo baabi'iyey. Waxa ka mid ahaa mashruucii balaarnaa ee Tug-Wajaaleh, iyo Jilib. Dawladihii SYL hoggaanka u haysay iyaga oo garawsan baahidii jirtay in dalku hore uga maro xagga beeraha iyo xanaanada xoolaha, caafimaadka iyo waxbarashada, dhismaha iyo gaadiidka, misana intaba way iska indho tireen, waxaanay garab saareen mashaariic u danaynaysay gumeysiga cusub. Jaangooyadii shanta sano «five year plan 1963-1967» waxa loo sugay sifo aan horumar keeni karin, kadibna waa ay hoobatay. Waxa uu ahaa

mid dhigayay in marka kharashka guud la eego ay 29% ku baxdo gaadiidka, Beeraha iyo xoolahana 17.8%, warshadahana 15.7%, waxb. 6.5% caafimaadka 3.0%, Dhismaha, biyah [illegible] iyo reer guuraagana 6.5%. Jaangooyada sifahaa lihi waxay noqotay mid marka horayba baahida dalka ee mudanka ah xagga danbe la marshay, sidaas awgoodna aan ummadda waxtar u keeni karin. Intaa waxa u dheeraa in jaangooyadaasi 35.6% laga dhaqan geshay, dabadeedna waxa la dhigay qorsheyn gaaban oo laba sano ah 1968kii, taasin [illegible] ay [illegible] shmicna li'i uga baxa hantida ummadda. Waxa [illegible] do yar yar ah oo Kalluunka iyo Hilibka ah, mid kalluunka ah oo Laasqoray laga dhisay, iyo laba Hilibka ah oo Muqdisho iyo Kismaayo laga sameeyay.

Dakadda Berbera iyo tan Kismaayana [illegible] dhisay kaalmaha dawlada shisheeye ah. Markii gobanimada ay Soomaaliya qaadatay, gumeystayaashii waa ay ka baxeen dalka, markaasi waxa la filayey in Soomaalidii taliska qabatay ay siyaabo Soomaaliya waxa uga baddalaan. Waxa suuragal ahaad in deegaanka si cilmi leh loo darso, fiirooyinkii gumeystuhu inaga raarideen la ilaabo ,kuwa cusubna oo dhaxalgal noqdana la meeleeyo. Hase ahaatee, dawladihii SYL is kuma ay hawlin sidii beeraha iyo xanaanada xoolaha loo horumarin lahaa, iyada oon ogsoonahay in boqolkiiba 40% waxa aynu dibadda u dhoofinaa ay xoolaha iyo waxa ka soo baxa ahayeen. Muuska oo isna ah shayga labaad ee u badan waxaan dhoofino, waxa [illegible] acday in Talyaaniga, uu iibkiisu gooni ugu sugnaa [illegible] u dhigay intii uu Soomaaliya ka gadan jiray [illegible] qolkiiba 80% Muuska ka iibsan jiray Soomaaliya, [illegible] qolkiiba 50% ayuu Soomaaliya ka qaadanayey.

Markii la gaaray 1969kii ganacsiga dibeddu waxa uu ku sugnaa in 114 milyan oo shilin ay dawladda ka dhimanto «deficit»

taasna waxa sababay iyada oo alaabta debedda laga keenaa ay boqolkiiba 59.7% ahayd midda la isticmaalo «consumer goods», 40.3% alaabta wax lagu soo saaro «goods for production». Waxa debedda loo dhoofshaana boqolkiiba 26.5% uu muus ahaa, boqolkiiba 60.3% xoolaha, 13.2% waxyaabo kala duwan. Nolosha dadweynuhu waxay markaasi dib uga dhacday heerkii ay toban sano ka hor taagnayd.

1967kii, Golaha guud ee ummaddu wuxuu doortay madaxweyne cusub. Markan Cabdirashiid Cali Sharmaarke ayaa la doortay, oo isna markaasi Maxamed X. Ibraahim Cigaal ra'iisal wasaare u doortay. SYL hase ahaatee, talilskaasi waxba kama ay beddalin. Siyaaso qabiilkii, musuqii, eexdii iyo qaraabo kiilkii waa u sii kordhay, waxaana tartan loo galay siilihii qabiil walba cid ugu yeelan lahaa golaha guud ee ummadda. waxaana abuurmay axsaab aan aragti siyaasadeed lahayn, ee qabiil ku unkan, doonaysana si ay golaha ummadda u galaan, dabadeedna SYL ku biiraan. Golaha guud ee ummadda wuxuu noqday masrax dadweynaha laga maaweeliyo, dawladdiina waxay isu rogtay sac xarunta lagu maalo. Sida dalalka Afrika ka dhacday, gobanimadii waxay noqotay kabihii ninka cad oo madaxdii siyaasadda iyo shaqaalihii dawladdu ay gashadeen, sadbursigii gumeystahana ay meelaystaan. Mushaarooyinka waxa ay ku darsadeen bangalooyin qalabku u dhan yahay, wasiiraduna kuwo lagu tilmaami karo «palaces». Haddii dalalka Faransiisku gumeysan jiray ay «Peugeot 403» ku xarago jiirayaan, Abidijan na «cheveriota» madaxdu debedda ka keensato, Muqdisho sidoo kale ayaa Fiyaat 124-125 ... lixdii biloodba la bedelan jiray, wax yaabahaas baana dadweynuhu jidhka iska gelin jiray. Ninka reer miyiga ihi waxa uu gobanimada u arkay mid aan isaga u dhalan ee dadka magaalooyinka jooga oo kaliya ku hoortay. Shaqaalaha dawladda qaarkood waxa ay haysteen mushaarooyin

balkii ay shaqa ka hayn lahaayeen, maxaa yeelay cilmi iyo awood toona uma lahayn shaqooyinka loo dhiibay ee ay mushaarka ku qaadanayaan.

## SOOMAALIYA IYO SIYAASADII DEBEDDA 1960-69

N.F.D waxay tahay dal Soomaaliyeed. Xataa haddii aynu xiganno,xogwarran Ingiriisku baxshay 1962kii waxa uu dhigayaa in NFD ay deganyihiin dad Soomaaliyeed oo ka badan boqolkiiba 62%. Waxa kale oo halkaasi deggan (Rendille) Rayndile, oo muslin ahaa afkoogana kan Soomaaliga isku qays yihiin. Ingiriisku markii u bariga Afrika kala qoqobayey 1890kii ayaa NFD iina ka mid ahayd dalalkii uu ku qobtolay bulshooyin kale oyna dhaqan, diin iyo af toona wadaagin. 1909kii Ingiriisku waxa uu xaraajin soohdimeed marahay wabiga Taana. oo uu ku magaacaabay xariijintii Soomaalida-Somali line. Waxa uu Ingiriisku ku andacoonayay Soomaalidu in aanay soo dhaafin deegaanka xariijintaasi ku ekayd. Ingiriisku 1914kii waxa dalkaasi Soomaaliyeed u kala qaybshay laba meelood. Meeli waxay noqotay NFD, qaybta kalena «Juubaland». Misana 1925kii Ingiriisku Juubaland waxa uu ku wareejiyey Talyaaniga, isaga oo abaalgud uga dhigay Talyaaniga oo D.II.A Ingiriiska kaalmeeyay.

Ummadda Soomaaliyeed ee deggan NFD waxay si door ah ugu dadaaleen in iyagu ay aayahooda ka taliyaan, taliska gumeystahana ay dabarka u gooyaan 1948dii Ingiriisku waxa uu albaabada u xidhay xisbigii SYL ee NFD ka furnaa, madaxdoodiina jeelka ayuu u taxaabay. 1957dii doorasha la qabtay dadweynaha Soomaaliyeed ee NFD way qaadaceen, iyaga oo aan rabin in dawladda kiinya ay qayb ka qaataan. Intii ka danbaysay fiiradaasi way iska baddeleen waxa anay arkeen in aayahoodu ay ka talin karaan, haddii ay urur siyaasi ah sameys-

taan. 1959kii waxa ay abuureen xisbiga dadka gobolka Woqooyi ee horusocodka «Northern Province People's progressive party» 1961kii NPPP waxay ka bilaabatay Kanu oo xisbiga Kiinya ugu wayn ahaa. Madaxda siyaasadda ee reer NFD waxay rabeen in dalkoodu si dhakhso leh u madaxbanaanaado, dabadeedna markaasi ay dadweynuhu ka tashaan ay kali istaagaan ama ay Soomaaliya ku biiraan. 1962kii xafiiska gumeysiga ee Ingiriisku waxa uu ku ballan qaaday in dadka reer NFD la qadarin doono waxa ay iyagu rabaan, inta aanay Kiinya madaxbanaani helin.

Dawladda Ingiriisku NFD waxay u dirtay laba guddi. Midi waxay u xilsaarayd in ay afti ka soo qaado waxa ay dadka Soomaaliyeed doonayeen, mid kalena waxay u socotay in Kiinya ay gobollo u qaybiso. Dadkii reer NFD waxa ay boqolkiiba 80% codsadeen in aayahooda iyaga ay ka taliyaan, hase ahaatee Ingriisku guddidaasi uu markii horeba sidaa been beenta ah u diray go'aanadoodii muu garawsan. Guddidii kale ayuu warbixinteedii raacay, sidaa awgeedna NFD waxa loo kale qayshay laba gobol oo kiiniya la raacshay gobolka woqooyi, bari, iyo gobolka waqooyi galbeed.

Dawladdii Soomaaliyeed oo markaasi Cabdirashiid madaxda ka ahaa, markii ay ogaatay in Ingiriiska aayetashigii ummadda NFD uu meel iska dhigay, xiriirkii siyaasadda ayey u goysay, «BBC» laliye isgaarsiinta ahaa oo Berbera uga dhisnaana waa loo raray. Ummadda Soomaaliyeed ee Jamhuuriyadda dagganaydna bannaanbaxyo ay ku gedoodeen Ingiriiska safaaradihiisa, iyo wada hadallo ay la yeelato Ingiriiska iyo madaxda Kiinya, Roomana ay ku kulmaan. Markii la isa soo horfadhiistay, madaxdii Kiiniya waxay cuskadeen in aanay dalkooda qayb la rabin, ingiriiskuna waxa uu ku andacooday in arrinta sifahaa lihi ay mid Afrikaanka u gaar ah tahay, sidaa darteedna

aanu rabin in uu dhexgalo. Dawladdii SYL ee Cabdirasaaq hoggaanka u hayey ayaa waxay isku dayday in wada hadallo la soo cusboonaysiiyo. 1965kii Cabdirazaaq mar uu Caruusha oo Tansaaniya ah wad hadal la yeeshay Kiinyaata, Kiinyaata shirkii waa uu ka baxay ka dibna waxay dadkii reer NFD abaabuleen Jabhado dagaal ku qaaday gumeysatada madow, oo socday ilaa iyo markii Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal uu Prime Minister noqday. Cigaal ayaa heshiis nabadgelyo la samaystay dawladdii Kiinya, taageeradii ay dhaqdhaqaaqa xoraynta NFD helayeenna joojiyey.

WEERARKII ITOOBIYA IYO SOOMAALIYA:

Bishii Feb. 6dii 1964kii oo ku ekayd bil ramadaan ah ayaa Ciidammada Itoobiya oo ku gaashaaman ciidamada lugta, taangiyo, iyo diyaarado ay ka soo weerareen Jamhuuriyadda Soomaalida meelo kala duwan-Togwajaale, inna Guuxaa, Feer Feer iyo Doolo. Ciidamadii Soomaalidu iyaga oo niyad geesinimo leh ku dagaalamayo ayay weeraradii xabashida joojiyeen inkasta oo ay ka hub iyo ciidanba badanaayeen. UMA ayaa soo dhexgalay arrintaasi, dabadeedna bishii Maajo 23dii ayaa Kharduum oo Soodaan ah labada d al heshiis oggolaadeen. Waxa lagu dhexdhexaadiyey in xabadda la joojo, ciidamadana 6 mayl laga durkiyo xad ku sheegga, dicaayadaha Raadiyahana la joojiyo marka laga bilaabo bisha Abriil 2da. Ka dib waxa Itoobiya gudaheeda dadka Soomaalidu ka fureenjabhado, hase ahaatee gacan weyn oo ay isbeddel ku keenaan siyaasadda xabashida may yeelan

JABUUTI:

1957kii wixii ragga, Faransiiska waxa uu u oggolaaday in ay codkooda dhiibaan, markaas oo golaha guud ee dalka la

dooranayey «Territorial assembly». Maxamuud Xarbi ayaa guddoomiye ku xigeen golayaashii ka noqday.

Golaha Wasiirada oo ka koobnaa 8 wasiir, afar uu ku jiro Xarbi ayaa Soomaali ahayd, laba Danaakil, midna Carab, mid ka kalena reer Yurub. Aftidii 1958kii uu Faransiisku qaaday, waxa uu ku andacooday in boqolkiiba 25% ay diideen taliska Faransiiska iyo distoorkiisa. Waxaa se hubaal ah in xarbi iyo madaxdii siyaasadda ee ka soo horjeedday gumeystaha Faransiiska si habaysan u guubaabiyeen dadweynaha garansiiyeen in taliska dabarka loo jaro. Hase ahaatee waxa halkaasi iyana codkoodii ka dhiibtay ciidamadii Faransiiska ee layaabka lahaa, oo aan xaq u lahayn in ay ka qayb qaataan aaya taahiga ummadda Soomaaliyeed. Maxamuud Xarbi waxa uu geeriyooday 1960kii, waxana had iyo jeer loo xusuus yeelan doonaa in uu ahaa nin geesiya oo qarannimada Soomaalida rabay in uu dhiso. 1967kii Faransiiska waxa uu mar labaad dalka Soomaalida ah ugu ceshay in aayahooda ay ka taliyaan. Hase ahaatee isaga oo tab iyo xeel gumeysi adeegsanayaa ayuu markaana ummadda Soomaaliyeed xaqeedii ka duudsiiyey isagoo ka been sheegay go'aankii aftida. Dawladihii Soomaalida ee SYL hoggaanka ay u haysay, inkasta oo ay isku tilmaami jireen dawlad dhexdhexaad ah, misana siyaaso sargooyo habaysan leh ku ma ay dhaqmi jirin. Inta badan siyaasadda debaddu waxay ku unkanayd raacdaynta kalmo ahisheeye, sidaa awgeedna aragti toos u sugan ma lahayn. Markay dawladdii SYL isku dayday in ay taageero ka hesho dawladihii Afrikaanka si dalalka Soomaaliyeed loo mideeyo, UMA waxa uu guddoomay in soohdimaha Afrika sidii gumeysigu u sugay loo dhaafo, loona qaddariyo. Taasina dhirbaaxo ayey ku noqotay siyaasadii midayn a dalalka Soomaaliyeed.

## DHALASHADII KACAANKA

Waxa ahaan kara jiraal, waxa marka hore caqli gal ah, oo u sugma in uu lagama maarmaan u yahay horumarka. Waxa markiisa hore aan caqli gal ahaynna ma noqdo jiraal. Haddaan hadalkan kor ku qoran ifsano, waxaan garan karnaa dadka reer Afrika dalalkay u dhasheen in lagu gumeystaa wax la garawsan karo inaanay aheen, gumeysiguna horumarka bulshada Afrika mid uu u baahnaa uu san ahayn, sidaas darteedna gobanimada iyo madaxbanaanida ummadaha Afrika ayaa jiraal ahaa, gumeysina waxaan jiri karin. Haddiiba bulsho ay rabto in nolosheedu waarto, wax jirana ay noqoto waxa laga ma maarmaan u ah horumarkeeda, madaxbanaani, gobanimo, cadaalad, caafimaad, midnimo, xeer, xasilin, nabad, tacab, yaqiin, IWM. Intaas ayaa jiraal ah, gumeysi, dulmi, kali tashi, yasid, takoor, musuq, gaajo IWM na ma ay aha wax loo baahan yahay, caqligana ma geli karaan, sidaa darteed ma aha wax jira.

Sidaas darteed dawladahay SYL hoggaanka u haysay may ahayn wax jiraal ah, kacaan in uu dhasho ayaa jiraal ahaa. Kacaankaassi wuxuu dhashay 21kii Oktoobar 1969. ka dib markay Ciidamada qalabka sidaa af gambiyeen dawladdii SYL. Kacaankaasi, muu ahayn mid ay ciidamadu dhaliyeen ee se wuxuu ahaa mid ka dhashay dhaawacii uu taliska SYL u gaystay

ummadda Soomaaliyeed jiraalkeeda. Maxaa yeelay, Madaxdii waxay u qaateen in halgankii madaxbanaanidu ku ekaa gobanimo la helay. Taasina mid khalad ah ayay ahayd oo dalka halagelisay. Maxaa yeelay aragtida sifahaa lihi waxay iska indho tiraysaa baahida loo qabo in dalka dhaqaalahiisa si kacaan-ah loo sugo, waxayna u gacan haadinaysaa gumeysi cusub. Halgankii gobanimadoonku waxa uu higsanayey bulsho si cusboon loo farsugo, oo laga xoreeyo gaajada iyo isku dul noolaanshaha, lana hormarshi nolosha bulshada iyo dhaqaalaha, si ay u hesho marin uu ku tabco qofku xaqa uu u leeyahay in uu si farax leh u noolaado. Hase ahaatee, taasi waxa lagu heli karayay iyada oo la beddelo sargooyada gumeystaha, SYL se iskuma ba hawlin. Kacaan in uu dhasho waxaa jiraal ka dhigay iyada oo:-

a) ay dhimatay qarnimokaskii ummaddu National consciousness.

d) La baraarujiyey siyaaso qabiil eex-dareen , gobo iyo

c) Taliskii la qabiileeyey lana dhexroorsaday.

d) La baraarujiyey siyaaso Qabiil eex-dareen gobol iyo degmo IWM.

e) Musuq iyo deg deg u taajir madaxdu u fiigatay.

f) Qadariskii bulshad oo lumay.

Intaas oo idili waxay ahaayeen qodobada taliskii SYL dhulka la gooyay kacaanka dhalashadiisana sababay. Jaha warreeruu taliska SYL ummadda Soomaaliyeed galiyay waxa heerkii u xumaa uu gaaray markii 1969 loo tartamayay kuraasida golaha guud ee ummadda oo dhamayd 123. Waxa u soo banba-

xay 69kii xisbi, SYL doorashadaasi waxay xoog iyo tab intay lahayd isugu gaysay in xisbi kale uusan kursi helin. Madaxdii iyo axsaabtii aan ka tirsanayn SYL na waxay iyana tab iyo xeel ba-itaalsadeen qabyaalad.

Taliskii SYL run ahaantii waxa uu ahaa mid aan sinaba ummadda Soomaaliyeed waxtar u gaysan rabin. Madaxdii waayihii halganka u fiiganayd daryeelka ummadda, goobaabinta dadweynaha iyo dhismaha qaran Soomaaliyeed, waxa nasiib darro noqotay in ay noqdeen dar dumiyay qarankii ay hor ka hoggaamin lahaayeen. Marka ninka madaxda ahaa ee ku baaqayey dhismaha qaran cusub, iyo midowga Afrika uu marka uu taliska qabto ku adeegsado qabyaalad, ee wasiirka, ambaasadoorka, agaamisaha iyo badhasaabka ku magacaabo siyaaso qabiil, maalin uun buu arkaa iyada oo shan ama lix qabiil fardo u soo fuuleen oo iyana doonaya in wasiirkooda, ambaasadoorka IWM loo magacaabo. Doorashadii 1969kii ummadda Soomaaliyeed sifahaa ayey ku ekayd, waxaanay u qaybsanayd xerooyin jilib jilib iyo qabiil qabiil ah oo mid waliba ka kale ku eegayo nacayb doonayeyna in uucunaha la ledo. Sidaasi darteed ayaa madaxweynihii dalka Soomaaliyeed aan faras uun loo soo fuulin ee bunduq intuu nin askariyihii u cabaystay toogtay, bishii Okt. 15dii 1969. Sidaa awgeed baa dadweynuhu maalintii 21ka Okt. Ciidamada taageero ku siiyeen, iyaga oo filayay in isbeddelku u keeno taliswadaag uu qofku ka qayb qaato, dhismaha ummadduna uu noqdo qayb ka mid ah waayo-arag qofka Soomaalyeed, taasina ay ka dhalata taliskii dhexroorsanaa oo la dhexfuro.

Ciidamadii qalabka sitay markay af gambiyeen taliskii SYL waxa ay baabiyeen golahii guud ee ummadda, iyo distoorkii dalka u yiil. Waxa ay soo saareen Axdi «charter» 22kii Oktoobar 1969 cadaynaya ula jeeddooyinka kacaanka. Waxa isla markaasi unkamay golaha sare ee kacaanka uu Guddoomiye u ya-



Carruur, cirroole, rag iyo dumar ka qayb qaadanayaa Iskaa wax-u-Qabso

hay J.S.G. Maxamed Siyaad Bare, oo golaha gobolka ee kacaanka iyo golaha degmada ee kacaanka. Guddiga golaha sare waxay ka koobmaysay 25 qof oo ka tirsan Ciidamada qalabka sida. (6) Lix waxay ka tirsanaayeen Booliska sagaal iyo tobanna ciidamada Xoogga dalka.

Sarreeye Gaas Jaamac Cali Qoorsheel, oo Booliska ka tirsanaa waxa la xidhay bishii Abriil 1970kii iyada oo lagu dacweeyay in uu afgambi abaabulay. Waxa weli la sugayaa in maxkadda la horkeeno. Sareeye Axmed Maxamed Cadde oo isna Booliska ka tirsanaa waxa laga qaaday jagadii odayga magaalada Xamar bishii Noofambar 1970kii isaga oo musuq iyo maamul xumi lagu dacweeyey, ka dibna waa la xidhay. Sareeye Maxamed Caynaanshe Guuleed iyo Salaad Gabayle Kediye, Cabdiqaadir Maxamad dheel oo ahaan jiray G/se waxa bishii May, 1971kii lagu dacweeyey in ay af gambi abaabulayeen, ka dibna waa la xiray, Maxkamadana waa la horkeenay dil bay ku xukuntay dabeedna waa la toogtay.

Bishii May 7dii, 1970 waxa kacaanku la wareegay baanankii shisheeyaha, Warshadda Sonkorta ee Jawhar SNAI. Shirkadda Nalka, qaybinta Batroolka, shirkadaha iyo shirkadaha Caymiska (hase ahaatee shirkadaha Muuska waa la iska dhaafay). Talaabadaasi waxa ay tilmaan u noqotay, himilooyinka kacaanka ee ku aaddan in dalka dhaqaalihiisa si cusboon loo surgooyo. Waxaanuu madaxweynaha golaha sare ku tilmaamay talaabadaasi in ay suuragalinayso abuuridda kaydka ummadda si hanti abuur u furmo, balraarinta waxyaalaha dalku soo saaro, horumarinta warshadaha ummadda, koobidda waxyaabaha debedda laga keeno iyo kordhinta waxa debedda loo dhoofiyo oo intuba sal u noqonaysa surgoynta jaangooyada cusub. Bishii Oktoobar 21dii 1970kii waxa uu madaxwaynaha G.S.K ku dhawaaqay in Jamhuuriyadda Demoqraadiga ee Soomaaliya ay

noqon doonto dal hantiwadaag ah. Markii ugu horraysay taariikhdeeda ayaa Soomaaliyamadaxdeedu caddaysay haddii dalka hore loo marin rabo lagama maarmaan in ay tahay in bulsho cusub la dhiso waddo horujeed lehna loo jeexo sifaha horumarkaasi lagu taabi rabo. Marinka qudha ee u furan qaramada soo korayaa si ay horumar deg deg ah u gaaraan waxa uu yahay habka hantiwadaagga, oo cidhib tiraya ku dul noolaanshaha, meelaynayna sinaan iyo caddaalad, ayuu Jaalle Siyaad ku yiri khudbadi uu ummadda Soomaaliyeed u jeedshay bishii Okt. 21kii 1969. Kacaanku isaga oo dhashay wakhti aynu tilmaanay in ummadda Soomaaliyeed ay ka dhuntay kasmadii siyaasadu, qabiilna laga doortay qaranka, musuqna uu ku talaalmay maamulka iyo qadariska bulshada, waxa si cad qofka waayeelka ihi u garan karaa in talaabooyinka kacaanku ku baaqayay dhibaato hor leh la kulmayeen.

Sidaa awgeed, waxa kacaanku isku dayey in dadweynaha la guubaabiyo lana garasiiyo qadariska cusub ee hantiwadaaggu beeri rabo. Shaqaalaha maamulka u qabanayey kacaanka waxa intooda badani ahaayeen, kuwii gumeysiga iyo dawladahii SYL ba la soo shaqeeyay, sidaa darteedna rimanaa fiirooyin iyo aragti ka duwan kuwa uu hantiwadaaggu fulin rabo. Kacaanku waxa uu isku hawlay in uu guubaabiyo dadweynaha oo u ku talaalo kasmo siyaasi ah dareen qarankaas ahna gesho. Sidaa darteed ayaa kacaanku oogay olole kale geddisan oo ku aadayay canbaaraynta iyo la dagaalanka qabyaaladda iyo musuq maasuqa, oo golaha sare u dajiyey xeerar iyo qawaaniin qabanaysa qofkii ku kaca siyaaso qabiil iyo musuq. Waxa uu kacaanku abuuray dugsi cusub oo loogu magac daray nin ka mid ahaa geesiyaashii ku dhintay dagaalkii Soomaaliya iyo Xabashida dhexmaray 1964kii oo la oran jiray Maxamed Cabdilaahi Xalane. Dugsigaasi Xalane waxa lagu tababaraa shaqaalaha dawladda iyo Ardayda dugsiyada sare ka soo baxda. Sha-

qaalaha dugsigaasi la geeyo waxa looga jeedaa in maskaxdooda la ifsho lana garansiiyo qadariska cusub ee hantiwadaaggu beeri rabo; isla markaasna tababar militari ah ayey qaataan, si haddii loo baahdo loo heli karo dadweynaha dalka difaaciisa qayb ka qaata. Waa la is weeydiin karaa inta tababar saddex-bilood ku aadani uu ka beddeli karo aragtida qof shaqaale ahaa oo in badan ku soo dhaqmay kana soobiyo cabay qadaris ku lid ah hantiwadaagga. Waxa aan se ilaa hadda ogsoonahay in musuqmaasaq aanu wali tirmin qabyaaladina ay wali xoog leedahay.

Kacaanka waxa baaqiisu uu ahaa ummadda Soomaaliyeed isku kalsoonaato ay iskeed wax u qabsato si isku filaansho deg deg ah ay u gaadho

Mashaariic iskaa wax u qabso ah ayaa si isdaba joog ah magaalooyinka iyo tuulooyinka uga furmay. Dawladduna waxay abuurtay Mashaariic deg deg ah «crash programmes» Bishii Feb. 16, 1970kii, 2500 oo dhallin ah ayay dawladdu qortay 1060 ka mid ah waxa loo diray in ay falaan beeraha Janaale, Afgooye, Jawhar, Baladweyne iyo Wajaale, 500 oo kalena waddooyinka ayaa loo diray, 1000 ka mid ahaa waxa loo qaybshay biyoxidheenada iyo ceelasha, mashaariicda karaashka. Ulajeedada uu kacaanku ka lahaa waxa ay ahayd in midhaha cuntada isku filaansho laga gaaro, islamarkaasna dhallintu shaqooyin ay helaan, tababarna ay ku qaataan.

Dadweynuhu meel kasta ha jooge eh, waxay iskaa wax u qabso ku dhiseen, dugsiyo, masaajidyo, cusbataalo, golayaal hanuuninta ah, waddooyin, ceelal, kanaalo, beero IWM. 1972kii kacaanku waxa uu hormarshay habka xukunka dawladda hoose Taliskii SYL waxa uu ahaa mid dhexroorsaan awoodda iyo maamulka dalkana dad yari gacanta ku hayeen. Habkaasi waxa uu ahaa mid gumeystihii laga dhaxlay oo meelaynayey in

dadweynaha laga furo talada dalka qaybta ay ka qaadan lahaa-yeen. Ninka shisheeyaha ah ee D.C ama Badhasaabka ah ayaa isagu talada iyo waxqabadka ahaa, dadweynahana waxa laga rabay in ay fuliyaan hadba go'aanka uu ninka cadi gaaro. Kacaanku waxa uu isku dayey in habkaasi isaga ah la dhexfuro, oo talada qayb laga siiyo qofka. Waxa la abuuray gole, mid degmo, mid tuule iyo mid xaafado. D.C iyo Barasaabkii waxay noqdeen guddoomiyayaal, iyaku fusha hadba waxa golaha ku jiraa ay gooyaan. Habkii magaalo awal nin mudane ihi uga hadli jiray ama ay soo dooran jirtay, maanta magaalo waliba waxay u qaybsan tahay xaafado, xaafad walibana waa ay sii qaybsantaa. Qaybtii walba lixdan qof ayaa guddi u ah. Guddiga xaafadda oo dhan markii la isu geeyo waxa tiradoodu ku xidh-maysay hadba inta qaybood ay tahay. Haddii ay 6 qaybood ta-hay guddida waxay ka koobmaysaa 360 haddii guddida xaafada ee dhexe lagu darana 420.

Habkaasi dawladda hoose waxa loo hormarshay si gobolka, iyo degmada iskood ay isu maamulaan; wixii dhibaato gaar ah ee degmada haystana ay wax uga qabtaan. Habkaasi dawlada hoose loo dajiyey isaga oo ku unkan taliswadaag iyo wadajir, haddana waxa inta badan dhacda ninka guddoomiyaha gobolka ama kan degmada in uu talada maroorsaday, oo uu isu dhigay jikii gumeystaha ahaay oo kale aan dadka taladooda qadarin ji-rin. Wax badan ayay dhacday in rag sifahaa la yimid oo kale la-ga qaaday jagooyinkii ay hayeen. Hase ahaatee, rag maamul xu-mi lagu dhaliilay ayaa inta meeshii ay joogeen laga kaxeeyay haddana meelo kale la gayey. Arrimahaas oo kale hadday caado noqdaan waxa hubaal ah in aan nidaam kaasi dawladda hoose hanaqaadi karin.

1972kii waxa lagu dhawaaqay qoraalka af Soomaaliga



Ololaha ciribtirka wax akhris la'aanta iyo wax qoris la'aanta

1973ka wuxu noqday sanadkii af Soomaaliga far barashadiisa laga hirgelinayey magaalooyinka, 1974ka waxa loo qorsheeyey in Miyiga laga hirgasho. Kacaanka intii ka horraysay, wax badan ayaa laga dooday qoraalka af Soomaaliga, hase ahaatee go'aan way ka gaari kari waayeen dawladihii SYL. Siddaas awgeed waxbarashadu waxay ku xirnayd kaalmaha debedda. 1969kii ardayda Soomaaliyeed ee ku maqnayd dalka Ruushka wax ay tiro la ekaayeen 482, Talyaaniga 172, Masar 152, Jarmalka Galbeed 132, Maraykanka 93, Jigoslafaakiya 84, Sacuudi Caraabiya 40, Suudaan 40, Iglan 34, Faransiiska 32, Hindiya 29, Jarmalka Bari 27, Yuguslafakiya 21, Swisarlaand 3, iyo 105 dalal kale ku maqnaa. Aqoonta iyo waxa barashada markaasi waxay la ahayd taliskii SYL in ay af qalaad ku xirantahay kuu doonaba ha ahaatee. Sidaas awgeedna looma aabe yeeli jirin dalalka ay ardadaasu waxbarashada u aadayso. Qoraalka af Soomaaliga waxa uu horseed u noqday unugga bulsha cusub oo la dhiso, aqoonteeda iyo garashadeedana kor loo qaado. Magaalooyinka si la yaab leh ayaa barashada far Soomaaliga uga hirgashay, dugsiyada hoose iyo fasalo ka mid ah dugsiyada dhexena si lifadoon ayaa far Soomaaliga uga hirgalay. 1974ka waxa wali socda hirgelinta ololaha horumarinta reer Miyiga. Kacaanku waxa uu isku hawlay in waxbarashada loo tabiyo dadweynaha iyo Carruurta Soomaaliyeed oo dhan. Waxbarashada dugsiyada ilaa kan sare, waxa laga dhigay bilaash, waxaana la isku soo dhoweeyey tirada dugsiyada hoose, kuwa dhexe iyo kuwa sare, si aanay u dhicin in arday Soomaali ihi dugsi u waayo. Waxa kale oo haatan hirgalay in qofkii waxbarashadiisa soo dhamaystaa shaqo hora laga siiyo, halkuu awal suuqa meeri jiray. 1974kii waxa waxbarashada dalka loo surgooyay nidaam cusub. Dugsiyada hoose iyo kuwa dhexe muddadii waxbarashada waxa heer walba laga dhigay 3 sano kan sarena Afar sano. Waxa kale oo la guddoomay in waxbarasha-

da dugsiyada ilaa heerka sare maadadaha lagu dhigo af Soomaali. Si markaasi ay isugu xidhmaan guriga iyo Dugsiga, dugsiga iyo bulshada dadweynuhu oo sanad ka hor far Soomaaliga la baray, tan reer miyigana maanta ay ardayda dugsiyadu ku hawlan yihiin sidii ay jahliga uga saari lahaayeen. Ololaha horumarinta reer miyiga ee sanadkii 1973kii dhamaadkiisii la galay, waxa isweydiin leh, in uu mid haikaas ku ekaada noqdo iyo in uu saldhig u noqon doono jaangooyo lagu horumarin rabo nolosha bulshada reer miyiga oo ilaa iminka ka hor aan si dhab daryeelkooda la isku hawlin.

1972kii waxa kacaanku la wareegay qaybinta cuntada iyo ganacsigaba. Waxa abuurmay Wakaaladda lagu magacaabay W. Ganacsiga ee ummadda, iyo mid kale oo ah W. horumarinta Beeraha oo beeralaydu ka qaadato midhaha ay soo saaraan. Misana iyadu dadweynaha dib uga sii qaadda Wakaaladdaasi ganacsiga ee ummaddu dhibaatooyin ayey la kulantay, iyana dar kale ayay abuurtay.

Ololaha ciribtirka wax akhris la'aanta iyo qoris la'aanta.

Wakaaladdu iyada oo aan loo samayn qalabkii cuntada lagu kaydiyo iyo shaqaale dhisan ayaa hawshaas ballaaran lagu wareejiyey. Wakaaladdu dabadeed xilkii way ka soo bixi kari wayday, raashinkii dadkii way gaarsiin wayday, qorshihiina waa uu ka xumaaday. Meelo cunta looga baahan yahay iyo meel haysata cunto ku filan mararka qaarkood may kale ogayn. Shaqaalaha qaarkoodna waxa ay meelaysteen musuq, dadweynihiina ciriiri ayey ka geshaan cunnadii uu sida joogtada ah u heli jiray kacaanku markii uu arkay qaabxumadii ay ENJ-e wax u maamulaysay, waxa qaybintii iyo iib geliinta cunnada loo dhiibay dawladda hoose, oo iyana garabsatay xarumaha hannuuninta dadweynaha ee ka dhisan xaafadahaay magaalo waliba ka

koobanto. In kasta oo sanadka1974 ku oo ahaa mid adduunka oo dhami ciriiri ka galay cuntada misana kacaanku si doorroon ayuu shacbiga ugu suuragelshay inaanay dhibaato culus kaga imaanin helitaanka cunnada Dhibaato waxa ay kaga timi ummadda Soomaaliyeed abaar ekaysay Gobolada Bari Sanaag Nugaal, Togdheer, Mudug, Galgaduud iyo Berbera. Kacaanka iyo ummada Soomaaliyeedba si geesinnimo iyo kalsooni leh ayey ugu hawl galeen sidii loo gargaari lahaa ummadda Soomaaliyeed ee abaartu dhaawacday noloshoodii, xoolahoodiina cidhib tirtay.

Kacaanku sida uu ku caddeeyey Axdiga koowaad waxa uu ku baaqayaa in uu abuuro bulsho cusub oo ku dhisan shaqo, xuquuq, sinaan iyo caddaalad iyada oo la qadarinayo dhaqanka iyo degaanka Soomaaliyeed. Waxaa uu higsanayaa in uu is baddel dhaliyo; is beddel aan saacadda dib loo eryin ee horusocod meeleeya, isbeddel aan lagu sugin dalka qaab iyo far dal shisheeye laga sargoosto ee ummad Soomaali ah oo cusboon, dhaqankeed, dhaqaalaheed, danaheed, diinteed iyo degaankeed lagu jaangooyo laguna warsugo. Intaasi hirgasho ama hoobato la arki doonee.

## SIYAASADDA DIBEDDA —1969—74

Kacaankum ma: ‹ uu dhasha 21kii Oktoobar 1969 Axdigii u horreeyey ee ka s o ıxa GSK waxa u cadeeyey qodobo arrimaha gudaha iyo siyaasadda dibedda labadaba saldhig u noqondoona. Talaabadii wa: ee kacaanku qaadayna waxa ay ku aroortaa Axdigaasi koowaad iyo kan labaad ee soo baxday Okt. 1970 oo isaguna caddaynaya in JDS, ay tahay qaran hantiwadaag ah. Qodobada arriamaha debedda waxa ay ku aadan, I. In la taageero isku duubnida qaramada adduunka iyo dhaqdhaqaaqyada u halgamaya gobanimadoonka.

2. In lala dagaalamo gumeysiga kii hore iyo kan cusuba.

3. In loo guntado midaynta dalalka Soomaaliyeed.

4. In la aqoonsado aragtida isla noolaanshaha nabad gelyo oo ummadda adduunka dhexmara.

5. In JDS raacdo siyaasadda dhexdhexaadka ah.

6. Mucaahadooyinka ıȝo hishiisyadii hore loo galay in la aqoonsado.




Siyaasadda debeddu waxa ay noqotay mid horujeed leh, waddo cusboona si toos ah cagta ugu haysa. Bishii Abriil 5dii, 1970kii Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxa ay aqoonsatay Jamhuuriyadda dadka ee waqooyiga kuuriya

Bishii Abriil 11diina waxa na aqoonsatay Jamhuuriyadda jarmalka ee Dimuqraadiga ah. taasi waxay dhalisay in Bishii juun 3dii Maraykanka iyo Jarmalka Isutaggu ay goostaan in Soomaaliya kaalmadii ay siin jireen ay gooynayaan. Soomaaliya se waxay goosatay in ay gacmaha ka laabato kaalmo si quudhsi leh loogu tebin rabo oo misana ka dhigta Madaxa dalka dad fuliya aragtida shisheeyaha ah. Waxa u kacaanku cadeeyey in Soomaaliya aanay ubaahanayn kaalmo lagu fulin rabo ujeeddooyinka qaranka bixinaya. waxa Soomaaliya ka unkuntay falsafadda isku-kalsoonida «Self relience» oo sal u noqotay arrimaha gudaha. Sidaa si le'eg ayaa siyaasadda dibeddu u noqotay mid aan dal shisheeye ah isku tiirin si dalka hore loogu marsho. Hase ahaatee, dalalka saaxiibka la ah Jamhuuriyadda ayaa laga guddoomaa kaalmo la xiriira horumarinta dalka. Jamhuuriyadda siyaasadii ahayd dhexdhexaad bahdilan waxay isu noqotay dhexdhexaad horusocod hufan ah oon ka aamusi rabin xuquuqda qaramadu u leeyihiin in ay madaxbanaanaadaan iyo xaqa aadamigu u leeyahay in uu aayihiisa ka taliyo. Waxa ay Jamhuuriyaddu dagaal ku qaaday gumeysiga oo qofka aadamiga ahaa xaqiisa duudsiya, sidoo kale ayay gumeysiga cusub u cambaaraysay oo ah kan raba in uu meeleeyo ku dul noolaanshaha soo koraaya. Isla markaasi waxa ay Jamhuuriyaddu dagaal ku qaadday takoorka iyo midab kala sooca oo liddi ku ah qaddariska aadamiga addoonsi iyo midiidsina dhidbi raba. Siyaasadda dibeddu waxay garab saartay dhaqdhaqaaqyada gobanimodoonka iyo dagaalada ay kaga hoos bixi rabaan gumeysiga. Dalalka Soomaaliyeed ee gumeysiga shisheeyaha ku hoosjirana waxa ay u guntatay siffihii ay dadka Soomaaliyeed aayahooda kaga talin lahaayeen.

Soomaaliya siyaasaddeedii dibedda ee go'aanka ahaan jirtay waxa ay muddo shan sano ah isu bedashay siyaasad fidsan oo ka ifka ururrada adduunka aragtideedana ka hirgelaysa.

Bishii Oktoobar 1970 waxa Muqdisho lagu qabtay aqoon isway-daarsi la xiriira dhaqanka midowga Afrika. Hordhaca u noqday bandhigii dhaqanka ee midowga Afrika ee lagu qabtay Aljeeriya 1971-72. Waxa Jamhuuriyadda DS ka qaybqaadatay shirkii dawladaha dhexdhexaadka ah oo lagu fulanqeeyey sidii dawladaha soo koraaya xagga dhaqaalaha uga hor mari lahaayeen, islamarkaasna waxa shirkaasi guddoomiyey in si nabad gelyo leh lagu raadiyo xoraynta dalalka Afrikada koonfureed ee gumeysiga ku hoos jira, wada hadalna lala yeesho dawladda midab takoorka ah ee koonfur Afrika. Aragtidaasi may noqon mid raaligelisa falsafadda siyaasadda dibedda ee JDS, sidaa darteedna waxa Muqdisho lagu qabtay 1972kii shir ay ka soo qayb galeen dalalka Afrikada Bari iyo kuwa dhexe. Shirkaasi waxa ay si cad JDS uga hirgalaysey aragtideeda la xiriirta dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka iyo xoraynta dalalka gumeysiga ku hoos jira. Shirkaasi waxa ka soo baxay caddayn la magac baxday «Caddaynta Muqdisho» oo runtii loo qaadan karo in ay ka mid ahayd waxyaabihii sababay Boortaqiisku in uu siyaasadiisa gumeysiga dib uga laabto. Cadaynta Muqdisho waxa ay ku baaqday, in gumeysi waji kasta ha lahaadee aanu nabad u ledin, dalalka Afrika ee gumeysiga ku hoos jirana ay bunduq caaradii oo kaliya ah ku taabi karaan madaxbanaani iyo gobanimo. Ururrada xoraynta dalalka Boortaqiisku gumeysto iyo kuwa kaleba waxa la guddoomay in (UMA) uu af iyo addinba wax u taro, oo sidii hore u dhici jirtay aanu arinkani ku ekaanin af gobaadsi «Lip-service», JDS waxay si joogta ah uga qayb qaadatay shirka guud ee U.U.M. iyi U.M.A. waxaan se halka ku soo qaadi doonaa kuwii ugu mudnaa ee Jamhuuriyaddu kalin mudan ah ka gashay.

1972kii dagaal ayaa dhexmaray dalka Yugaandha iyo Tansaaniya. Xoghayaha arrimaha dibedda Jaalle Cumar Carte Qaalib ayaa hortiiba labada dal isu maray isaga oo rabay in

uu heshiis ka dhex dhaliyo, madaxweynaha GSK na ka sida murti dagaalka lagu beejin rabo. In kasta oo UMA arrinta labada dal soo dhexgalay, hadana kaalintii ay JDS ka ciyaartay ayaa dha lisay in dagaalkii is taago madaxda labada dalna la isugu keeno Muqdisho iyaga oo ka qayb galay Sanad guuradii saddexaad ee kacaanka Oktooba, 21kii 1972.

1972kii waxa kale oo xoghayaha arrimaha dibeddu ka qayb galay shirkii Xoghayayaasha arrimaha dibedda ee dawladaha dhexdhexaadka ah lagu qabtay «Joorgtawn» oo Giyana ah. Fadhigaasi waxa lagu falanqeeyay qodobo hordhac u noqday shirkii guud ee madaxda dalalka dhexdhexaadka ah ee aljeeriya lagu qabtay Sept 1973kii shirka guud ee Aljeeriya lagu qabtay waxa uu ahaa kii ugu horeeyey taariikhda dawladaha dhexdhexaaadka ah ee madaxdii ugu badnayd timaado.

Madaaxweynaha GSK waxa halkaasi uu ka ahaa guddoomiye ku xigeen. caddayntii ka soo baxdty waxa jahawareer ilaa hadda ku haysa dawladaha hore u maray ee hantiggoosiga ah. Soomaaliya waxay ka dhiibatay shirkaasi fiiradeeda ah in waxa dhexdheexaad looga jeedo dib loo qeexo, maxaayeelay, tan iyo intii qii radaasi soo shaac baxday 1960 amuuraha adduunka ee la xiriira siyaasadda iyo dhaqaalaha wax badan ayaa iska beddelay. Dhexdhexaad micnaheeduna waa aanu noqono qaramada adduunka oo kiisa addoonsi cusub raba, kiisa takoor iyo midabkale.sooc raba iyo kan kale ee u doodaya xaqa uu u leeyahay in uu madaxbanaani helo ay dal dhexdhexaad u sinmaan. Micnaheedu waa inuu noqdaa gardarada, dagaalka, iyo ku dul noolaanshaha kuwa raba oo laga gaanshaanto. Shirkaasi waxa uu isku raacay in adduunka maanta jooga loo surgooyo hab dhaqaale oo cusub maxaayeelay sida uu dhaqaalaha adduunku ku egyahay, waa mid u faa'iideeynaaya dawladaha hodanka ah, ee ka hantiabuurta midhaha ay ummadaha aan horumarini soo saaraan.

Waxa JDS si joogta ah ay uga qayb qaadataa shirka guud ee dawladaha muslinka, inta badana ay kaalin mudan ah ka ciyaartaa.

Shirkii Xoghayayaasha dawladaha muslinka ah ee Tiriboli qabtay 1973kii, Soomaaliya waxaa ay ka mid tahay guddi afar ah oo loo diray si ay u soo baaraan sifaha foosha xun ee loola dhaqmo dadka muslimiinta ah ee deggan dalka Filibun. Fadhigii golaha Guud ee dawladaha Muslinka ah ee Laahoor lagu qabtay Feb. 1974kii Soomaaliya waxay markana ka mid ahayd guddi loo xilsaaray dhexdhexaadinta Bangaladhash iyo Bakistaan. Gudigu waxay Mujiiba Raxmaan keeneen Shirkii guud oo markaasi lagu horseeday in labada dal heshiis dhexmaray

Shirkii Guud ee UMA 1973kii, hadiiba 1964kii Soomaaliya lagu gacan saydhay doodeedii midaynta dalalka Soomaaliyeed markan Golaha Xoghayayaasha debaddu ee UMA waxay ku hesheeyeen in arinta Soomaaliya iyo Itoobiya fadhiga Madaxda Afrika loo gubiyo ka dibna waxaa loo xilsaaray guddi sideed dal ka koobanta oo meelaysay waxa ururka uu ka qaban rabo dalka Soomaaliyeed ee Itoobiya gumeysato.

Jamhuuriyadda DS waxa ay bishii Feb. 1974kii ku biirtay ururka carabta oo waligeedba Soomaalidu ay la wadaagi jirtay diinta Islaamka iyo dhaqan waayo hore ku aroora. Arrinta Falastiin iyo dhibaatooyinka carabta ku yimaadana si door ah ayey JDS ugu dadaashay in ay waxtar ka gaysato. Dagaalkii Yuhuudda iyo Masar iyo Suuriyana ee Bishii Okt. 1973kii JDS waxay ka geysatay gacan wayn. Waxa u dirtay ciidamadii Carabta ee dagaalka ku jiray cunto ah hilib iyo kalluun, waxa aanay horseeday in xiriirka siyaasadda ay dawladaha UMA ku jira u gooyeen dawladda Israa'iil. Taasna guul ayaa laga gaaray, ka dib markii dhawr dal oo keliya mooyee, intii kale oo

...ay cilaaqaadka Israa'iil u gooyeen.

Waxa Bishii Juun 1974kii Muqdisho lagu qabtay shirkii ... ee UMA. Waxaana ka soo qayb galay madaxda qaramada ... intoodii badnayd. Fadhigaasna waxa Madaxweynaha ... loo doortay in uu shirguddoomiye ka noqdo UMA sanad... 1974ka-1975 Islamarkaasi Xoghayaha arrimaha dibedda ee ... Jaalle Cumar Carte Qaalib oo ahaa guddoomiyaha golaha ... xoghayayaasha dibedda ee UMA waxa uu isu taagay jagada ... xoghayaha guud ee UMA, Hase ahaatee codkii ugu badnaa uu ... waxa u noqday 26 cod. Waxa isaguna isu taagay jagada ... xoghayaha arrimaha dibedda ee dalka Saambiya, oo isna he... 17 cod. Sidaa darteed mid naba waa uu heli waayey tiradii ... ahayd laba dalool tirada xubnaha ku jira ururka ... codkood siiyaan qofka u taagan jagadaasi. ka dib markii ... isku mari waayey ayaa madaxweynaha GSK ka baqay in ... ururku kala jabo, sidaa darteedna waxa uu ku taliyey in jaga... loo dhiibo nin ka tirsan Kamaruun oo uu ka tirsanaa ... xoghayahii guud «Ekankaaki» ee is casilay. Fadhigaasi waxa ... soo shaacbaxay haybadda siyaasadda dibedda ee JDS oo ... ficilo gelisay dalal isku tirinaayay in ay dhul fidsan oo ... ah iyo dad tiro badan ba leeyihiin.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad waxa uu ka qayb ga... shirkii guud ee ururka Carabta ee bishii Oktoobar 1974kii ... lagu qabtay Rabaad. Halkaasna waxaa uu ka jeediyey in ma... ... Carabta iyo Afrikaanku iska kaashadaan shaqaalaha, ... siyaasadda iyo dhaqankaba. Waxaana la guddoomay in sanad... ... 1975ka labada dhinac kulan ay yeeshaan. Madaxweynuhu waxa uu ka qayb galay fadhigii sagaal iyo labaatanaad ee UMA, ... oo ku hadlaaya magaca JDS iyo kan guddoomiyaha urur... ka Afrika waxa uu codsaday in Koonfur Afrika laga saaro UMA. ... Hase ahaatee, arrintaasi waxa ay argagax gelisay gumeysa

tayaasha hantiwgoosatada ah ee Maraykanka, Ingiriiska Fa-ransiiska oo golaha Nabadgelyada ee ururka markii ugu horay-say iyaga oo wada jira codkoodii «Fiito» «veto» arrintaasi ku diidday. JDS waxay ka qayb gashay fadhiyo badan oo la xiriira dhaqaalaha, siyaasadda, dhaqanka IWM. Bishii Juun 1974kii waxa ay JDS ka qayb qaadatay shirkii lagu falanqeeynayey xeerkka badaha oo lagu qabtay Karakas oo Fenisuweela (Cara-cas) Venesuella «Law of the sea». Shirkaasi waxa ay dawladaha horumaray ku doodayeen in masaafadda uu hadda ka yee-lan karaa ay noqoto 12 mayl, khayraadka badda ku jirana ee siman yahay. Dawladaha soo koraya ee Soomaaliya ka mid ta-hay waxa iyana ay caddeeyeen in aan badda khayraadka ku jira loo sinayn ee hadba dalka lihi iska leeyahay. Soomaaliya waxay aqoonsantahay in badda inta ay ku leedahay uu xeebta ka fidsan yahay 200 oo mayl. Hase ahaate shirkaasiwaa la is-ku mari waayey dib ayaana loo kulmayaa.

JDS waxa ay ka qayb gashay bishii Sept. 1974kii shir gaar ah oo U.U.M. qabatay laguna falanqeeyey alaabta qaydhiin iyo tamarta (U.N special session on raw materials and energy). Shir-kaasi iyo fadhiyo badan oo kale ba JDS ay ka qayb gashay. Taas micnaheedu maaha in shirkaasi loo dhegeysi tagay, ee badnaaba haddii uu heer madaxweyne ama heer xoghayayaa-sha debedda ku egyahay madaxweynuhu kaalin wayn oo mu-dan ah ayuu ciyaaray inta badanna marka uu kulan ku egyahay heerka xoghayayaasha waxa inta badan kaalin weyn ka ciyaaray Jaalle Cumar Carte Qaalib oo si doorroon ugu dadaalay in si-yaassadda debedda ee JDS ay waji cusub, horujeed, hufnaan horusocod iyo haybed ba yeelato. Haddiiba waayihii hore Soo-maaliya Maabka adduunka uun lagu arki jiray, maanta Muqdi-sho waxa ku kulma madaxda qaramada horusocodka ah. waxaas-na loo yimaadaa in waayo-aragnimo laga kororsado habka ka-

caanka Soomaaliyeed u fulin rabo, hantiwadaag, isku filaansho iyo isku kalsooni.

Qaybta hoos ku qorani waxa ay la xiriirtaa, mucaahadooyinkii gumeystayaashu ay la galeen odayaashii Soomaalida, kuwii iyaku ay hoos ahaan u kale saxeexdeen; araaji Soomaalidu ay ku codsanayeen midaynta dalalka Soomaaliyeed (dagaalkii labaad ee adduunka) markii uu dhamaaday. Gabayo la xiriira halganka gobanimadoonka, iyo kuwa kale oo wax ka sheegaya taliskii SYL waraaqdii koowaad iyo tii labaad ee kacaanka.

## MUCAAHADOOYIN AY KALA SAXIIXDEEN INGIRIISKA IYO MADAXDII DALKA SOOMAALIYEED EE GOBOLADA WOQOOYI. JUULAY 14DII 1884-16KII JUULAY, 1884KII DISAMBER, 1884, 3DII DISAMBER, 1884, 13KII JEENAWARY 1885KII.

Iyada oo ciidamadii khaliifka Masar ay ka guuri rabaan magaalada Berbera, Bulaxar iyo xeebta Soomaalida guud ahaan, haddii aannu nahay odayaasha hoos ku saxeexan waxaa nu rabnaa in mucaahado an la galno dawladda Ingiriiska si madaxbanaanidayada loo dhawro, xasilooni loo helo iyo waxyaabo kale oo hagaagsan.

Waxaana la isku raacay lana guddoomay arrimaha hoos ku qoran.

### XUBINTA I

Odayaasha ——————— waxay caddaynayaan in aanay dalkooda waligood iyo waaqood qayb dalkooda ka mid ah cidna ba u gooynin, cidna ka iibin cidna ka rahmin.

### XUBINTA II

Maraakiibta calanka Ingiriiska sidata in loo oggol yahay in ay ku soo xirato dakedaha Soomaalida ee Berbera, Bulaxaar, iyo meelaha kale ba.

## XUBINTA III

Dadka Ingiriiska ah ee deggan dalka Soomaaliyeed in ay helaan nabad gelyo iyo ilaalin, dalkana ay si nabad ah ku mari karaan.

## XUBINTA IV

In dawladda Ingiriisku awood u yeelato in ay wakiil ka socdaa uu dego Berbera ama meeshii kale ee dalka ka mid ah Wakiiladaasna si xurmo leh loola dhaqmo loona oggolaado hadba cidda ay dawladda Ingiriisku u garato in ay nabad gelyadiisa sugto.

Waxa saxeexay madax ka tirsan qaybaha bulshoda Soomaaliyeed ——— Ingiriiskana waxa u saxeexay Badhasaabka, Hindiya, iyo Gaashaanle F. M. Hantar.

## SHIRKII GUUD EE SOOMAALIDA JEENAWARY IDII 1945KII.

Shirkii guud ee Soomaalidu waxa uu go'aankan isku raacay una gudbiyay xoghayaha ururka ummadaha midoobay. Go'aankan oo ay isku raaceen guddiyadii ka kala egmanaa bulshada Soomaaliyeed. Waxa uu la xiriiraa aayaha ummadda Soomaaliyeed, waxaannu dhigayey.

Iyaga oo madaxda hoos ku saxeexan, xubnaha ka mid ah U.DH.S (SYL) guddida dhexe ee U.DH.S, axsaabta siyaasadda (SNS) iyo madaxda qabiilooyinka dalalka Soomaaliyeed, ay shir guud oo Soomaaliyi u dhantahay ku yeesheen Muqdisho Feeb. Idii, 1948kii waxa shirkaasi guddoomay la iskuna raacay, in go'aanka soo socda loo gudbiyo U.U. midoobay.

Haddii aan nahay Soomaali oo dad muslin ah, isku jinsi ah; af iyo dhaqanka keliya wadaaga; magaca «Soomaali» naloo yaqaan ilaa afar malyuun na aanu tiro leegnahay, waxa aanu gocsanay in ay dil ku tahay danaha ummadda Soomaaliyeedd in la kala qaybsado oo xukun gumeysi lagu maamulo. Waxa aan xaq dabiica ah u leenahay in aayaha ummadda naga aan ka talino; lana dhawro xuquuqda aadaminimaduna noc cggoshahay, oo aan u noolaano ummadda kaliya ee aanu nahay. Waxa halkan aanu ku caddaynaynaa in dadka Soomaaliyeed oo dhan ee ku hoos jirtay, Talyaaniga, Faransiiska, Ingiriiska' N.F.D. iyo maxmiyadaha Itoobiya ay u fiigan yihiin in la mideeyo oo la hoos keeno maamul siyaasi ah, mid dhaqan iyo mid dhaqaale oo kaliye.

Waxa aan si sharaf uga codsanyaa U.U midoobay in garab na lagu siiyo in la tiro qaybta ummadda Soomaaliyeed lagu kala ooday shan soohdimood iyada oo daryeelka iyo danaha Soomaaliyeed la iska indha saabay.

——— Waxa Saxiixay ——— ururradii axsaabta iyo madax ka tirsan bulshada Soomaaliyeed oo leh salaadiin iyo cuqaal.

Arji la xiriira midaynta dalalka Soomaaliyeed oo dadka Soomaaliyeed ee Ingiriisku xukumi jiray u direen dawladda Ingiriiska Bishii Juulay 7dii, 1947.

Haddii aanu nahay dadka Soomaaliyeed ee deggan dalka Soomaaliyeed ee maxmiyadda u ah Ingiriiska, oo ah madaxda siyaasadda, salaadiinta, cuqaasha iyo odayaasha dalka ba waxa aan dawladda boqortooyada Ingiriiska si sharaf leh uga codsanaynaa arimaha aan hoos ku soo sheegi doono nala garato.

1. Waxa aanu garansanahay in danaha dadyowga iyo xuquuqda ummaddayada hore loo dafiray, ka dib markii ay dalkayaga iyo dadkayaga kala qaybsadeen Ingiriiska, talyaaniga, faransiiska iyo Amxaaradu.

2. In dhibaatada uu kala qoqobkaasi abuuray, ku aado surmaynta horumarka ummadda iyo horukaca dhaqaalaha dalka. Aqoondarida, Cudurka, iyo gaajada maanta dalka haysat?a haystaa waxa ay ka soo maaxdaa kala qaybinta qaranka Soomaaliyeed.

3. Waxaan dawladda Ingiriiska ka codsanaynaa in ay ilaaliso danaha dalka naga; isticmaasho awoodeedda iyo magaceeda si ay isu hortaagto in dadka Soomaaliyeel aan himiladooda la burin.

4. In ay dawladda Ingiriisku garab saarto doodda ummadda Soomaaliyeed ee xaqa ah, kuna dadaasho in aan mar labaad qaybi ku dhicin; dawladaha kale ee aan war ka hayn xaaladdda ummadda Soomaaliyeed ay iska hortaagto in aanay gacanta ku la burin.

5. In dadka Soomaaliyeed ay ahaayeen kuwii askartoodu la dagaal gashay Ingiriiska si Jarmalka loo jabsho. dhigin.

6. In aanu diyaar u nahay in afti laga qaado dadka Soomaaliyeed, si uu ururka ummadaha midoobay u xaqiijiyo waxa ummadda Soomaaliyeed ay rabto, si dadka ka ga??oori raba aayaha ummadda Soomaaliyeed aan shaki uga glin ummadda Soomaaliyeed midowga ay rabto.

7. In waayihii hore dalka Soomaaliyeed nabadi ka dhalan kariwayday, taasna ay sasbab u ahayd kale qaybsigii. Waxa aan

si lixaad leh ugu adkaysanaynaa in maanta lagu cashar qaato waayo aragaa hore.

8. In dalalka xad ku sheegga lala wadaago ay ummada Soomaaliyeed si door ah uga duwantahay oo aanay dhaqan, diin, taariikh, af iyo caado toona la wadaagin, sidaa awgeed waxa aan codsanayaa in ummadda Soomaaliyeed la mideeyo si wakhtiyada soo socda nabad iyo xasilooni uga dhacdo qaybtan adduunka ka midka ah.

9. Ugu danbayntii waxa aan codsanayaa in la ilaaliyo nabadda dalka; dadka Soomaaliyeedna xaqooda in la marsho, ha se ahaatee waxaan xusuusinaynaa qaramada adduunka in ayan nabadi jiri karin ilaa inta ummadla Soomaaliyeed ay midoo bayso ama iyaga la tiro.

WAXA SAXIIXAY

1. Sultaan Cali Muuse.
2. Sultaan Maxamuud Cali Shire.
3. Sultaan Maxamed Faarax.
4. Sultaan Xirsi Cabdilaahi.
5. Madaxweynaha guud ee bulshada ummadda Soomaaliyeed Saciid Caabi (SNS).
6. Xoghayaha guud ee SNS Maxamuud Jaamac.
7. Madaxweynaha SNS ee Ciirigaabo Cumar Hore.
8. Madaxweynaha iyo madax badan oo kali

SNL. Ururka ummadda Soomaaliyeed arji uu u diray U. U. midoobay; oo ku aade aayaha dalkii Soomaaliyeed ee Talyaanigii gumeysan jiray iyo midaynta dalka Soomaaliyeed.

Ururka ummadda Soomaaliyeed iyo ururka dhallinta Soomaaliyeed, oo matila boqolkiiba 90% dadka Soomaaliyeed waxay qabaan in ururka U.M. loo gudbiyo war na laga siiyo arrimaha la xiriira xukunka dalalka, iyo amuuraha siyaasadda.

Sidaa darteed waxa aan aftikoob kan u gudbin rabnaa golaha guud ee U.U.M maxaasyeelay.

a) Waxa aan si adag u codsanayaa in ururku isku hawlo horumarinta amuuraha siyaasadda, bulshada dhaqaalaha iyo waxbarashada dalalka aan weli is xukumin.

b) Waxa aan garansan nahay in haatan uu yimid waqtigii dadka Soomaaliyeed oo maanta u kala qaybsan Ingiriis, Faransiis, Amxaaro, iyo kuwo uu Talyaanigu gumeysan jiray (ex-italian) la midayn lahaa iyaga oo ummadda kaliya ah, oo maamul, dhaqaale iyo dhaqan kaliya la hoos keeno. Habkaas, waxa aan ogsoonahay in uu ku suuragelli karo, si habaysan oo hufan uu u maamuli karo golaha amaansiga ee U.U. M, oo afarta dawladood ee xoogga ihi maamulka guud gacanta ku hayaan. Haatan sida ay ummadda Soomaaliyeed ku sugantahay sinaba uma ogalin, aayahayaga iyo nolashayada maantana sinaba daryeel uguma keeni karo maamul gumeysi oo gacanta ugu jira xoog kaliya.

## CUDDIGA DHEXE EE URURKA UMMADDA SOOMAALIYEED

Caddayntii ururka dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxa aanu rabnaa in walaalahayo Soomaaliyeed aan la midoowno. Waxa la jecelyahay in aan hor u marno oo aanu gaarno nolol aayahayaga mideeysa. Taas ayaan waxa walba

ka jeccinahay. Haddii wax wal oo nu codsano nale siiyo, oo wixii horumar suura gal ah aan gaarno waxbarashada iyo dhaqaalaha, oo se walaalahayo aanay na soo raacin, waxaan tirsannayna inaan waxa naloo qabtay aysan jirin.

Walaalahayga Soomaaliyeed oo dhami waxay u filganyihiin midow iyo israac. Taasi waxa U.DH. S ku caddeeyay markii horumar ka gaadhay shir guud axsaab iyo madax ka egman dalalka Soomaaliyeed ay kulan ku yeesheen Muqdisho, halkaasna qaraar la gaaray, lagu codsanayo midaynta dalalka Soomaaliyeed

Guddiga dhexe ee SYL

Muqdisho 29kii Jeennawary 1948kii.

(GABAY)
## ARLIGAA LA KALA BOOBAY

(FAARAX NUUR)

Sanadku markuu ahaa 1862kii, ayuu Faarax Nuur ku dhashay magaalada Burço mayigeeda, sida na soo gaadhayna, wuxuu geeriyooday 1932kii. Inkastoo meheraddiisu ay dhaqista xoolahaba u badnayd haddana ka muu madhnayn magaalada iyo sida loogu dhaqmo.

Faarax alla ha unaxariistee, wuxuu ahaan jiray gabayaa caan ah oo is ku darsaday feejignaan, fiiro badnaan, ogaal iyo garaaho dheeriba. Gumaysigu aad buu u nebcaa lamana soo marin jirin, nabadgeliyada iyo madaxbannaanaantana aad buu u jeclaa uguna xusul duubi jiray. Gabaygan soo socda wuxuu curiyay markii dalka Soomaaliyeed ay soo galeen dad gumaystayaal ah oo diir cad (Ingiriiska faransiiska Talyaaniga) horena aanu u arki jirin, kuwaasoo markiiba uu faarax ka xumaaday waxyaalihii darxumada lahaa ee ay dadka uga sii jeediyaan; waxaan sakaari ka biirsan ugu sumaynayeen. Gaar' ahaan wuxuu Faarax aad uga dhiidhiyay kala qoqobkii Itoobiya iyo Gumaystayaasha caddaanka ahi ay dalka iyo dadak Soo maaliyeed kala qoqobeen. Isagoo arimahaas taladiisa ka dhiibanaaya, cidhib xumadoodana dadka Soomaaliyeed uga digaya ayuu yidhi:——

Ingiriis Axmaariyo Talyaani, wey akeekamiiye,
Arligaa la kala boobayaa nin u itaal roone,
Anse ila ah kaahiro sabaan iligyadiisiiye,

Orgigaa riyaha taadaxoo oodda Faaliga e
Waa duni habilhii loo ogaa aqalka diideene,
Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye,
waa duni la kala iibsadayoon nala ogaysiine,
waa duni ninkaad aamintaa kuu abees yahaye,
Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye,
Waa duni xaqii la arkayaa la arjumaayaaye,
Waa duni akhyaartii lahayd iib ku doon tahaye,
Ansse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye,
Afka iyo adduunkaa hadloo oodan sadarkiiye,
Ninkay gacanta midig oodan tahay laga ilroonaaye,
Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye,
Nimanyahow Islaam xaajadaa lala aguugaayo;
Odayaashan loo yeedhay ee la anfac siinaayo;
Asaxaabihii bayna yidhi gaal ha aaminine,
Haddaa niman Islaamiyo tihiin aadan ubadkiisa,
Oydaan ilaahay ka'go'in hayna iidina e,

## Ismaaciil Mire iyo Hashiisii Markab.

Markii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan dhintay; dagaalkii Daraawiishtuna dhammaaday.. Ayaa gumeystayaashii ku dhaqaaqeen inay fuliyaan jaangooyooyinkoodii ay ugu talo galeen fidinta xukunka gumeysiga.

Waxaana lagu bilaabay in la calaamadiyo soohdinta beenbeenta ah ee u dhaxaysa dalka Soomaaliyeed ee Xabashidu addoonsato iyo Gobolada Waqooyi ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Markii calaamadaynta soohdintu dhamaatay sannadkii 1933-34, ayaa Xabashidu dadkii reer miyiga ahaa ee Ingiriisku xukumi jiray dib u soo celisay Geeli hawddaaqa ahaana waa qaban waayey buurihii waqooyiga.

Maalin ayaa Ismaaciil Mire arkay hal uu lahaa oo guriga duleedkiisa fadhida; hasha waxa la oran jiray markab Ismaaciil hashii buu u gabyey isaga oo u calaacalaya.

wuxuu yiri: Markabay dalkii waxa bannaan in aanad doonayne,
Dugsi kulule doombaraley, iyo degelkii Reenweyne,
Dareemada laantii ahayd laysu dacareeye,
Dooxii Xidhweynena kufraa degey mareenkiiye,
Daar iyo bangalo miidhan bay inaku deyreene,
Markaanse diriri jiray waadigii damal ka weynaaye,
Daliigahanna kurus baa ku yiil, duudka feensamaye,
Darana waa lahayd aad markaha daafta marisaaye,
Muslin daacad dhiibtaa ku baday maanta duluglayse,
Diqda qaayib, awrtana la daaq deeq allaad suguye,

Gabaygaas iyo dhawaaqyo kale oo ay weheliyeen dhaq-dhaqaaqyo dagaal, ayaa Ingiriiska ku kallifay Xabashida wada hadallo deg deg ah inuu la yeesho. Wada hadalladaasi waxay ku saabsanaayeen in reer guuraaga loo oggolaado inay xad ku sheegga dhankay doonaanba uga tallaabaan. Ismaaciil Mire wuxuu ka mid ahaan jiray abbaan duulayaashii Daraawiishta.

## CALANKA.

Cabdillaahi Sultaan «Tima Cade», wuxuu ku dhashay 1917kii gobolka Woqooyi Galbeed ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya. Cabdillaahi halkaasuu ku koray kuna barbaaray kuna geeriyooday 1937kii isagoo muddo dheer ka gabyi jiray Idaacadda Hargeysa. Caan wuxuu ku ahaa curista gabayga gaar ahaanna wuxuu u lahaa luuq u gooniya loona wada yiqiinay. Gabayadiisu waxay saameeyaan dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah, gaar ahaan waddaninimada iyo qarannimada. Haddaba Cabdillaahi, alla how naxariistee, gabaygan soo socda wuxuu ka tiriyey meel dad Soomaaliya oo isku wada ujeedo ah, isku dan ah, isku duuban, gacmaha iswada haysta oo isku wada niyad ahi ay ugu kulmeen inay u dabbaaldegaan maalin dadka Soomaaliyeed ee gobannimada jecel si gaar ah ay maskaxdooda ugu hayaan, maalintaasooo ahayd 26kii Juun 1960kii maalintaasoo dad Soomaali oo xiri ay taageen Calankii gobannimada Soomaaliyeed ee ugu horreeyey ee laga taago ciid Soomaaliyeed, Calankii gumeystaha Ingiriiskana halkaa laga laalaabay.

Calaankaannu sugaynaye sahankiisa ahaynow
Seermaweydo hillaacdayow sagal maanta darrooraayow
Siigadii naga maydhay.
Saqdhexaannu ahayne kii soo saaray cadceeddow
Samada kii u ekaayee xiddigaa mid la siiyayow
Saxirkii kala guurye, sarreeyow manusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.
Saahidiinta islaanka ee subcisa jimcayaashiyo

Sibyaantiyo haweenku calankay saadsheenow
Cidina kaanay na siinine saatir noogu yaboohayow
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.
Salaantii istiqlaalkow, sadadu kay ku xidhnaydow
Sayruukhii Afrikadow
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.
Sanku-neefle dhammaantii, khalqiga kii u sinnaayeen
Nin saaxiib la ahaynow,singalka kii iska diidayow
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.
Soomaaloo iscunaysoo, saqda qaylo dhawaaqdiyo
Sulub laysu cabbaystiyo, hadba soof la xabbaadhiyo
Saraayaa dami wayday kay siinlaydiisu na saaqdiyo
Kii sadqeeyey qabaa'ile, isu saaray gacmayee saf
Walaaha ka yeelayow.
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.
In sidayda tihiiniyo, in kalaanan saxaynine
Soomaaloo calan taagta, saakay noogu horreysa oo
Seddex wiig iya maalmo haddaan soor cuni waayo
Safrad laygama yaabo sarrina mayso naftaydu e
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana kanna saar
Aan siduu yahay eegnee kaana kanna saar
Nimankii na siraayaye waax-waax noo kala saaftaye
Solanaayey cadkeenna ee inagoo dhexda suunka
Sabarkeenna qarqocray kii sedkeenna cunaayeye
Sarartiisa ka muuqdaye, sarwaalkii ka yaraadaye
Daar loo sibidheeyiyo, sariiraa lagu seexdiyo
kabadh suuf laga buuxshiyo, sagaal booy iyo kuug iyo

Weliba seeska lahaa, kii saabaanka u laabayow
Saaxirkii kala guurye, sarreeyow ma nusqaamow
Aan siduu yahay eegnee kaana 'kanna saar
Sawjarkaa hubka qaataye, intuu soodhka ku taagay
U diyaara salaantiyo, saraakiisha amrraysaay
Sifadii isticmaarka, ka siyaadiya maanta oo
Sibilkeenna agjoogow, sibirtiisa istaaga oo
Nin walbaan siddi dhex oo nin walowsaldex goir
Saaxirkii kala guuree. Sareeyow ma nusqaamaw
Jaaxirkii kala guuree. Sareeyow ma nusqaamaw
Aan siduuyahay eegnee kaana Siibkanna saar

## (GABAY)

### MAANDEEQ (QAASIM) 1960.

Xagga geela dhaqankiisa marka laga eego, Hasha Maandeeq loola baxaa waa hal si dhab ah u raali gelisa ninka leh oo dabeecad wanaag, qurux iyo caano badanba isku darsatay.

Gabaygan sè Qaasim wuxuu kaga hadlayaa maaha hal, waa gobannimadii dadka Soomaaliyeed ay heleen sannadku markuu ahaa 1960kii (Gobolkii Woqooyi iyo kii Koonfureed). taasoo uu halkan (Gabayga) ku muujinayo dhibaatooyinkii faraha badnaa ee halgamadii loo soo galay lahaayeen iyo sida mudanayaashii markii gobannimada la helay xilkii ummadda la saaray ay kaalintoodii u gabeen dalkana qas iyo xumaan ugu horseeddeen. Wuxu ku soo gebegebeynayaa in isbeddel fiican oo danta ummadda ku jirtaa uu dhici doono iyadoo hoggaanka ay qabandoonaan madax daacad ah, nadiif ah, horusocod ah, oo xilkas ah.

WUXUU YIRI

Ayaantaan dhashiyo maanta oon uurka ka cirraystay
Hashii aan intaa iyo intaa oon la dabajoogey
Hashii aan Amxaarkiyo kufriga ugu unuun gooyey ,
Ardaa boodhleh mooyee hashaan aqal ka dheeraaday
Ayaantay hallowdaba hashaan daba adeegaayey
Irmaanaatay Maandeeqee waa iba kuryeyseene
Innamada dhowaan ii kacow waydin eersadaye
Arrinkiisu ruuxuu xunyahay aayatiin ma lehe
Na maydaan abaal marine waad na ambinaysaane

Afarteeda naas baan lahaa ubadka deeqsiiye
Ma afurin agoontii waddiyo kii usha u sidaye
Enefdhii dhankeedaan lahaa u ummul taalleeye
Addissababa gee baan lahaa ayda doogga lehe
Iliilaha Jabuutaan lahaa aad yar soo mariye
Ood dheer ka saar baan lahaa aarka soo dhiciye
Ilaa ururka dayrtaan lahaa awrka haw tu'inne
Iimay ha daaqdaan lahaa adhaxda jilaale
Iilkii darwiishkaan lahaa udubka gaadhsiiye
Axan Sheekh Bashiir baan lahaa aar la'aan dhimaye
Ammuuraha is dhaafaan lahaa aakhiro u tebiye
Axmed Gurey u sheeg baan lahaa iilka wuu qabanne
Oomaar dul-gee baan lahaa uubtii loo qodaye
Illinkeeda Maxamuud Xarbaan ka ag dhaqaaqeeyne
Nimaanse aabbihii maali jirin looma aamino e
Waa taas abaar iyo dhul baas u ambo qaaddeene
Waa taas ilmaha loogu xidhhay geed adaahiyahe
Ergin iyo aroor gocondho lay adhi la daadaaye
Umal iyo harraad waa waxay la alwanaysaaye
Ololkeedu waa ii baxaa oogta waaberiya
Waxba arartu yay ila durkine waxaan ku soo ooday
Ololihii mar uun baa la shidi kii arbacadiiye
Markaasaa rag iimaanka qaba la igman doonaaye
Aagaanka buuxsada dhowaan ma arki doontaane.

## GEERAAR GUUBAABO AH.

## XASAN KAYD CABDILLE (WALAANWAL)

Geeraarkan oo uu curiyey Xasan Kayd Cabdille (Walaanwal). Wuxuu kula hadlayaa Talisyada caddaanka ah ee xag dhaqaale iyo xag siyaasadeedba waxa ka gumaysta iyagoo rumaysan kuna doodaya in ciddii aan diirkoodu sidoodoo kale caddan ahayn aanay iyaga kala sinayn xagga maskaxda, awoodda iyo dadnimada.

Haddaba kas-xumayaashaas wuxuu geeraarkan Xasan ku tusaalaynayaa, in marka midabka diirka ee kala geddisan laga yimaado, dadyowga ummadaha adduunyadan ku dhaqani ay iska gaadhi karaan waxyaalaha badan ee ay ka mid yihiin maskaxda (Garaadka), awoodda, aabuurta iyo dadnimadaba.

Xasan wuxuu ku nuuxnuuxsanayaa garashada is indhotiraysa ee talisyada cadaanka waxyeelooyinka faraha badan ee ay u geysatay dadyowga ku nool adduunyada seddexaad iyo kuwa ku dhex nool dalalka reer galbeedka qaarkood. Taa waxa dheer inuu muujinaayo sida geesinimada leh ee dadyowgaasi ay maanta danahooda ugu halgamayaan dhibaatooyinka haystana ay uga gilgilanayaan, si ay u muujiyaan inaan cidina kaga horrayn karayn xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo aqoontaba, cidkastoo aadami ihina aanay farciddideed iyo waxa ka yar toona dheerayn.

dhabankaaga caddaanku ****
Ma dhaliili karaayo
Dhab ah baa ku abuuran.
Haddii kayga la ddhawrana
Dhuxul laygama beerin *****
Alle kaama dhex qaadine
Dhagax buur ka sameeye.
Dhinbiil weeye kulayl ahe
Dhallintayda tuseen *******
Dhaqankooda bartaan
Dhirbaaxooyin isiisoo
Dhuunta layga wareemo
Xiniinya ku dhexyaalina
Dhabarkayga ma roorin *****
Dhamaan way wada kaamil **
Waa inaan dhaqso kuu holli-
yaayoo
Hadaad dhuuni la quutiyo
Dhirtaasaanu qadhaaban ****
Wixii duurka dhex jiifee
Dhafnaa idiloole *******
Dhallaankaygaba ka soori
Dhawaaqiisa baxaayana ****
Dhegtaydaa u dalooshee

Dhafoorkayga madow
Labadoodaba dhiig cas oo
Dhuuxa lowga ku jiifiyo
Dhoohanow waa isku mid
Adna dheeman guduudan
Labadeenaba dhoobiyo
Naftaydan aad dhibaysana
Dhalanteedka dadkaagu
Illaa ka dhameeyey
Inkastaad dhabannaaniyo
Oo dhogtar kapral sidiisa
Dhiman maayo hortaa.
Amba way dhibayaane
Dhudhunkaygiyo xooguna
Oo qajeelaan dhursugaayee
Dhulkaa kaa duudsiiya mar
Dheefba noo wada diidana
Oo dhafaruurtiyo goonkiyo
Dhandhanaanka badnaa e
Dhoobadayda ka buuxaan
Dhibta aadamiga haysiyo
Adigu dhaadiba mayside
Dhurwaayow qof la mooday
Dhayahaaga bal eeg.

## HESHIISKII DHEXMARAY SHIRKADDA IMBERYAALIYADDA INGIRIISKA EE AFRIKADA BARI IYO DAWLADDA TALYAANIGA.

Heshiiskii dhexmaray 3dii Agoost, 1889, Shirkadda Imberyaaliyadda Ingiriiska ee Afrikada Bari, dhinac, iyo M. Catalani, oo uga ah Charge d'Afaires Boqorka Talyaaniga London, oo wakiil ka ah Dawladda Boqortooyada Talyaaniga, dhinaca, kale, halkaaso layskula oggolaaday sida hoos ku qoran:-

Ayadoo la tixraacayo wadahadaladii hore u dhexmaray, welina socda sshirkadda Ingiriiska iyo Sayid khaliifa, Suldaanka zinjibaar, kuna saabsanaa sidi suldaanku shirkada Ingiriis ka ugu wareejin lahaa dalalka dhulalka iyo wadamada ku yaallo xeebta ka bilaabanta ay kuna jirto Kismaayo tan iyo waqooyiga afka wabiga Jubba, kuna jiraan dekadaha Baraawa Marka, iyo Muqdishu, xagga badda tan iyo 10 mayl, iyo warsh iikh xagga baddana tan iyo 5 mayl.

Iyo ayadoo la tixraacayo warqaddii uu Sayid khaliifa boqorka zinjibaar uu u qoray 15 Janaayo, 1889, boqorka Taly ah Qunsul guud oo zanjibaar u fadhiya, halkaasoo u ugu oggo laaday Boqorka Talyaaniga, in uu kala heshiiyo shirkadda Ingiriiska, sidii uga wax u wada qabsan lahaayeen Kismaayo.

Ayadoo la tixraacayo sida ay dawladda Boqortooyada Tal yaaniga ugu hanweyn tahay in ay dhulal iyo dekado ku yeela to xeebta Afrikada Bari iyo sida shirkada Ingiriiska u jacesh shahay in ay ku gargaarto Dawladda Boqortooyada Talyaaniga sida ay ku gaari lahayd ujeeddoyinkeedaas:

1) Hadda, waxa halkaan labada dhinacba ku wada heshiiyeen in marka Sayid Khaliif, Suldaanka Zansibaar uu siiyo gagacantana u galiyo Shirkadda Ingiriiska dalalka, dhulalka iyo waddamada la soo sheegay, oo ku yaal xeebta ka bilaabata ay kuna jirto Kismaayo tan iyo Waqooyiga afka wabiga Jubba, ay ku jiraan dekedaha Baraawe, Marka, Muqdisho, xagga badda tan iyi 10 mayl, iyo Warshiikh xagga Badda 5 mayl waxay ya Shirkadda Ingiriisku ku wareejin doontaa, ama faikeeda geli doontaa sidii loogu wareejin lahaa qof Dawladda Talyaanigu soo wakiilatay dalalka, dhulalka iyo waddamada hore loo soo sheegay, iyo dekedaha Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Warshiikh, ayadoo ku xirayso oggoolaanshaha Suldaanka, haddii Dawladda Talyaanigu ku haysato shuruudaha iyo siyaabaha ku jiri kara siinta loogu ballan qaaday Shirkadda Ingiriiska dekedaha iyo dhulalka hore loo soo sheegay ama shuruudaha ugu wanaagsan ee looga heli karo Suldaanka.

2. Dawladda Talyaanigu waxay halkaan ku oggolaanaysaa in ay ka abaalmariso Shirkadda Ingiriiska wax allaale wixii kharaj, wixii ay waydiisato, sheegato oo suuragal ah, haddayba jiraan, oo kaga iman karo heshiiskan, ama fulintiisa.

3. Shirkadda Ingiriisku waxay kula heshiinaysaa dawladda Talyaaniga in ay wada qabsadaan Kismaayo iyo dhulalka agagaarkeeda sida Suldaanku oggoolaado, labada qola heshiinayso waxay u wada haysanayaa una wada maamulayaan si wadajir ah oo siman. Shirkadda Ingiriiska iyo Dawladda Talyaanigu labadooduba way wada lahaan doonaan Kismaayo iyo dhulalka u dhow ee sugan ayayna ugu wada sinaan doonaan wixii xuquuq ah iyo wixii sadbursi ah, kuse xiran, haddayba jiraan, shuruudaha lagu ballan qaadayo siinta hore loo sheegay. Dawladda Talyaaniga iyo Shirkadda Ingiriiska waxay wada qaadi

qayb isu dhigantana ka bixin doonaan wixii kharaj ah ee ku baxa maamulka waxayna wada qaybsan doonaan wixii faa'iida ah daanku Kismaayo gacanta u geliyo Shirkadda Ingiriiska; Shirkadda Dawladda talyaaniga mar alla markay suuragal noqoto; in dad ay soo dirsatay shirkadda Ingiriiska oo ka wakiil ah iyo waiikiil ay soo dirsatay Dawladda Talyaanigu ay kaga heshiiyaan islana meel dhigaan magaalada Kismaayo sifaalayn tifaftiran oo lagu gaaro h[illegible]da nololeed iyo sidii sifaalooyinka qodobkan loogu f[illegible]lin lahaa si saaxiibtinimo.

4. Dawladd Talyaanigu waxay ballan qaaday in ay xadiddo dhulka Afrikada bari oo ayada ay qaybta u leedahay iyo hawlaha dhulballaarsiga, in ay iska celiso soo jiidasho xag siyaasadeed ah ama si kale ah, in ay oggolaato dhul dul ka ilaalis ah, in ay yeelato dal; in ay soo farageliso qaybta Ingiriiska; dalalka iyo qabaa'illada yaal galbeedka ama koonfurta xariiqi laga qabtay geddiga waqooyi ee afka wabiga Juba, oo ay doonayso in ayan soo dhaafin marna wabiga Juba dhinacyadiisa waqooyi iyo bari tan iyo halka barta ay iska gooyaan loolka sideedaad ee waqooyi iyo dhigta afartanaad ee bari, iyo xarriiq si toosan laga soo jiido barta aan hore loo soo magacaabin oo la barbar socota loolka, goynaysana dhigta soddon iyo shanaad ee bari.

Shirkadda Ingiriiska, ayana dhankeeda, waxay ka ballan qaadaysaa in ay xadiddo dhulka ay qaybta u leedahay iyo hawlaha dhulballaarsigaa ee Afriaka Bari; ayadoo iska celinaysa soo jiidasho xag siyaasadeed ah ama si kale, in ay oggolaato dhul dul ilaalis, in ay yeelato dhul, faragaliso qaybta Talyaaniga: dalalka ama qaabaa'illada yaal bariga iyo waqooyi-bariga xariijinta loo soo tifaftiray, haddiise, inta la soo ilaaliyo ay caddaato in marinka wabiga Jubba uu ka xiggo xagga waqooyi ama

xagga bari xarriijinta hore loo soo hadal qaaday, markaas geddiga waqooyi ama geddiga bari ee wabiga hore loo soo sheegay, sida arrinta noqon karto, ayaa kolba loo aqbalayaa xarriijinta kala qaybisa labada qolo ee hore loo sheegay. Qodobkaanse, wuxu khusaynayaa wixii qallooca oo wabigu yeesho tan iyo barta.

Xarriijimaha kor lagu soo hadal qaadav waxay si muuqata ugu calaamad san yihiin khariidadda halkan ku xiran; khariidadda oo si l... aqoonsado, ay labada qolo wada saxiixeen.

5. Waxa kaloo halkan lagu heshiinayaa in dawlada Talyaaniga iyo Shirkadda Ingiriiska si wadajira oo sinnaan ugu yeelan doonaan xaq in ay maraan wabiga Jubba iyo kuwa ku biya-shuba, haddii ay Dawladda Talyaanigu u baahato in la soo jiid ay ku gasho dhulalka ay qaybta u leedahay, sida hore loo soo hadal qaaday.

6. Labada qolo ee heshiinayo waxay oggol yihiin in wixii afgaranshawaa ah, oo ka yimaada macnaynta ama fulinta heshiis kan; ama wax kasta oo ka yimaado oo xadgudub ah: waxa la hor dhigayaa, markii si saaxiibtinimo ah lagu xallin kari waayo, si ay go'aan uga gaaraan Guurtii dhex dhexaadis, wixii ka s... baxa dhexdhexaadis kaasina labada qolo oo heshiinaya... ...a diidi karaan. Xubnaha Guurtidaas waxay noqonayaan d... labada qolo si heshiisa ku wada doorteen, haddiise la waayo, qola waliba waxay magacaabi doontaa, garsoore (Arbitrator) ama tiro isu dhiganta oo garsoorayaal is le'eg, garsoorayaalshaasi sida lagu magacaabay waxay isku xuli doonaan (Umpin) hal garsoore.

7. Dawladda Boqortooyada Talyaaniga waxay la harayssa in ay awood buuxda u yeelato in av wareejiso xuquuqda, awoodeeda iyo sedbursigeeda, ama kuwa ay ku yeelan doonto

heshiiskan Shirkad Talyaani ah oo hadda la dhisayo oo lagu magacaabi doono «Shirkadda Boqortooyada Talyaaniga ee Afrikada Bari», ama magac sida u eg, waxayse ballan qaadaysaa in ay Shirkaddaasi dhowri doonto ballanka halkan Dawladda Talyaanigu ku qaaday; oo mas'uul ka ahaan doonto dhowridda ballamada halkan ku qoran. Waa in heshiiskan loo fasiro si waafaqsan sharciga Ingiriiska.

Waxa lagu sameeyey, laguna saxiixay Loondon, asagoo laba warqadood ah, af Ingiriis iyo af Talyaani, waxase layslagartay in kan af Ingiriisku noqdo midka ballantiisu fulaysoo, maalinta 3da Agoosto; Sannadku yahay 1889.

Waxa saxiixay Sir W. Mackinnanka iyo Signor M. Catalaniga lasoo sheegay, waxa goob joog ka ahaa Gerje S. Machenzie.

ismailpages.wordpress.com
ISMAIL DIGITAL LIBRARY

Habaynta: Ismail Aw-Abdi